

QIIMAHA: ETB 8.40
ISBN: 978-99944-2-108-4

Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya,
Wasaarada Waxbarashada

WAXBARASHADA MILGAHA QARANKA IYO ANSHAXA BUUGA ARDAYGA FASALKA 6aad

JDFI
WW






# WAXBARASHADA MILGAHA QARANKA IYO ANSHAXA

## BUUGA ARDAYGA

## FASALKA 6aad




Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya,
Wasaarada Waxbarashada



## Daryeelka haboon ee Buuga Ardayga

Buugani waa hantida dugsigaaga si haboon u daryeel, ha u geysan waxyeelo hana xoorin buugan.

Waa kuwan 10 siyaabood oo kaa caawin karra daryeelista buugan:-

1. Buuga ku jaldiyee walxo adag sida bacda balaastigada jaraa'idka duugaaha ama wargeysyada oo kale.
2. Buuga dhig had iyo jeer meel qalalan oo nadif ah.
3. Xaqiiji iney gacmahaaga yihiin nadiif marka aad isticmaalayso buugan.
4. Waxba ha ku qorin jaldiga kore iyo gudaha hoose ee boggaga buuga.
5. Astaynta buuga bogagiisa u isticmaal jeex waraaq ah ama callamad-xadhig yar.
6. (Bataatan), mar naba ha ka jeexin buuga wax sawir ah ama waraaq ah.
7. Hadii ay jeexanto waraaq ka mida ah boggaga buuga fadlan isku dhaji adiga oo isticmaalaya xabag/koolo.
8. Si taxadar ku jiro buuga u geli boorsada
9. Si taxadar ku jiro u maaree marka aad cid kale u dhiibuyso/u gudbinayso buuga
10. Isticmaalka ugu horeeya ee buuga cusub fadlan u/jiifi dhinaca bogiisa dambe, islamarkaana markiiba fur dhawer bog adigoo si tartiib-tartiib ah u kala qabanaya boggaga. Taasina waxay jaldiga buuga u horseedi doontaa xaalad wanaagson.

Calamada Dawlad - Deegaanada ay ka kooban tahay Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalke Itoobiya


Calanka Dawlad- deegaanka Tigraay


Calanka Dawlad- deegaanka Canfarta


Calanka Dawlad- deegaanka Amxaarada


Calanka Dawlad- deegaanka Oromiya


Calanka Dawlad- deegaanka Somaalida


Calanka Dawlad- deegaanka Benishangul- Gumus


Calanka Dawlad- deegaanka Qaramada, Qowmiyadaha iyo shucaubta Konfureed


Calanka Dawlad- deegaanka Gambeela


Calanka Dawlad- deegaanka Hararida

XubnahaDawlad-Deegaanadu waxay u dhigan yihin sida ku xusan qodoba 47aad ee dastuurka Jamhuuriyada Dimuqraadiga federaalka Itoobiya.

# WAXBARASHADA MILGAHA QARANKA IYO ANSHAXA

## BUUGA ARDAYGA
## FASALKA 6aad

**Qraha Buuga:**
**Deeq Axmed Badal**

**Tafatirayaasha :**

**Maxamed Bade**
**Maxamed Cabdi Rooble**

**Jamhuuriyda Dimuqraadiga Federaalaka Itoobiya, Wasaarada Waxbarashada**

**Laxmi Publications**

## Mahadnaq

Dib u habaynta, daabacaada iyo qaybinta buugta waxaa maalgaliyay mashruuca kor u qaadida tayada waxbarashada guud ee loo yaqaano (GEQIP), kasoo ujeedadiisu tahay in la kobciyo tayada waxbarashada ee ardayda fasalka 5-8 ee dhamaan dugsiyada dalka Itoobiya.

Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya deeqda ay ka heshay mashruuca kor u qaadida tayada waxbarashada guud (GEQIP) waxay usoo martay ururka horumarinta caalamiga ah (IDA) Credit No. 4535ET, the Fast Track Initiative Catalytic Fund (FTICF) iyo qaybaha kale ee bahwadaagta horumarinta Talyaniga, gargaarka Holand iyo Boqortooyada Ingiriiska ee ka timaada waaxda horumarinta caalamiga ee loo yaqaano (DFID).

Waxaa kale oo gacan ka gaystay soo saarista buuga ardayga iyo Kan baraha ee ku lamaan, shaqsiyaad iyo ururo (hay'ado) kala duwan oo fara badan, islamarkana aanan halkan lagu soo koobi Karin. Hase yeeshe, waxaa xusid gaar ah mudan, Mayra Maarbi, oo wakhti badan gelisay kobcinta awoodeed ee qorayaasha buuga ee wasaarada, si loo soo saaro qalab xidhiidh isdhexgal iyo jawi saaxiibtinimo la leh hawlaha baris-barashada. Taageerada maaliyadeed ee u midawga Yurub u fidiyay hawlaha shaqo ee Mayra ka waday Itoobiya, waa mid loo jeedinayo amaan/bogaadin. Waxaa kale oo mahadnaq halkan looga soo jeedinayaa: Golha Faderashinka ,-J.D.F.I, Wakaalada Warbaahinta Itoobiya, Wasaarada Dhaqanka iyo Dalxiiska , Wasaaradii hore ee Warfaafinta, Macadka daraasaadka Itoobiya,Ururka Macalimiinta ee Itoobiya, iyo Wakaalada wax soosaarka iyo baahinta (fidinta) qalabka tacliinta ee Itoobiya,oo dhamaantood u fidiyay taageero dhanka sawirada ah. Waxaa mahadnaq mudan shaqadii Helen PaPworth ee tabaruca ahayd, iyada oo ahaan jirtay Waaxda Cilmiga Milgaha qaranka iyo Anshaxa islamarkana tafatirtay,hubisay buuga ardayga iyo buuga baraha ee ku meelgaadhka ahaa.Waxaa kale oo mahadnaq mudan tabarucayasha Ingiriiska ee lagu meleeyay wasaarada dhexdeeda ee awood noo siiyay inaan isticmaalo khibradooda mashruucan iyo kuwo kaleba.

Waxaa kale oo la ilaawin Karin oo mahadnaq balaadhan mudan Xafiiska Waxbarashada Dawlad Deegaanka Somalida oo door wayn ka qaatay dadaalka loogu jiro in la soo saaro buug taya leh.

© Jamhuuriyada Dimuqraadiyada Federaalka Itoobiya, Wasaarada Waxbarashada.

Daabacaada koobaad, 2002 T.I

Dib u qabaynta, daabacaad iyo soo saarida buugta waxaa wasaarada waxbarashada u sameyay shirkada gaarka ah ee daabacaada Laxmi iyo Gopsons Paper Ltd, Indiya heshiiska tirsigiisu yahay GEQIP No.ET-MOE/GEQIP/IDA/ICB/G-10/09-B.

Xuquuqda buugani way dhawran tahay.Qayb ka mid ah daabacaada dib looma saari karo lamina kaydsan karo si markale dib loogu soo saarro ayadoo la adeegsanayo qalabyada kala duwan ee daabacaada. Waa in ogolaansho laga helo mulkiilaha ama fasax qoraal oo ku ogolaanayo inaad isticmashid daabacaadaha lagu mamnuucay xeerarka Jamhuuriyafa Dimuqraadiga Fedaraalka Itoobiya eek u cad Federal Negarit Gazeta,bayaanka tirsigiisu yahay 410/2004 ee xuquuqda daabacaada(Copy Right and Neighbouring rights protection proclamations, 10th year, No, 55, Addis Ababa, 19 July 2004.

# Hordhac

Waxbarashada iyo horumarku waa laba shay oo aad iskugu dhaw islamarkana aan kala maarmayn. Taasi waa sababta ugu muhiimsan ee aan u leenahay waxbarashadu waa furaha horumarka ee Itoobiya.

Dunida casriga ah ee aan ku noolahay qof kasta wuxuu u baahan yahay inuu yeesho a qoon cusub, xirfad iyo aragti wanaagsan. Waana u jeedada manhajkan, kaas oo ka turjumaya nidaamka waxbarasho ee dalka, oo ay tahay inuu jawaab ka bixiyo isbadalka xaaladahan.

Mudo shan iyo toban sano ah ayaa laga joogaa markii ay Itoobiya hirgalisay siyaasada waxbarashada iyo tababarada. Tan iyo xiligaas, dalkeenu wuxuu kasoo hoyay guulo wax ku ool leh dhinacyada fidinta waxbarashada, isku dhelitirnaanta iyo jaan go'naanta mabaadiida waxbarasho. Waxaa kale oo dadaal dheeri ah loo galay loona gali doona kor u qaadida tayada waxbarashada.

Si loo joogteeyo horumarkan, waxay wasaarda waxbarashadu dajisay jihooyin lagu horumarinayo manaahijta. Qorshahu wuxuu taabanayaa dhamaanba maadooyinka iyo fasalada ka hor waxbarashada dugsiyada hoose, dugsiyada hoose, dugsiyada dhexe, waxbarashada guud ee dugsiyada sare iyo tan heerka u diyaargarowga tacliinta sare. Ujeedadeeduna waa in la hirgaliyo qodobadii iyo mabaadiida ku cad siyaasada waxbarashada iyo tobarada, waxayne gogol xaadh u tahay diyaarnta dhamaanba qabbyana manaahijta la xidhiidha uuna ka mid yahay buuganta tilmaanu Bare liyo kan ardayda ee ku lammaaan.

Daabacaada iyo dib usoo saarida jihooyin u dajisan manhajka iyo buugaag cusub ama tilmaame bare ma ehe xal ka kali ah ee lagu xaqiijin karo tayada waxbarashada ee dal walba. Kor u qaadis joogta ah waxay u baahantahay ka qaybgalka dhamaanba qaybaha doorka ku leh. Kaalinta barayaasha waa in ay nqote mid aad u firficoon u isugu jirta heer bare ilaa mid hawlwadeen ah ama hormuud. Si gacan loogasiiyo arintan, barayaashu waxay heleen, ayna sii wadandoonaan tobobaru iyo kor uqaadida xirfadoodo.

Wasaarada waxbarashada

# Tusmada Buuga


| | | |
|---|---|---|
| Cutubka 1: | Nidaamka dimuqraadiyada | 1 |
| Cutubka 2: | Saraynta Sharciga | 12 |
| Cutubka 3: | Sinaanta | 24 |
| Cutubka 4: | Cadaalada | 34 |
| Cutubka 5: | Dal Jacayl/Wadaninimo | 44 |
| Cutubka 6: | Masuuliyada | 55 |
| Cutubka 7: | Dhaqanka Shaqada | 64 |
| Cutubka 8: | Isku Filaansho | 73 |
| Cutubka 9: | Dhaqanka Kaydsiga | 82 |
| Cutubka 10: | Ka qaybgalka Firfircoon Ee Bulshada | 91 |
| Cutubka 11: | Aqoon Raadsi | 100 |

CUTUBKA 1

# Nidaamka Dimuqraadiyada

Ujeedooyinka Cutubka: kadib marka cutubkan dhamaado Ardayeey Waxaad:

- Fahmidoontaan xuquuqaha dimuqraadiyadeed iyo kuwa bini aadmnimo.
- Kalasaaridoontaan faraqa u dhaxeeyo xuquuqaha aadaminimo iyo kuwa dimuqraadiyadeed.
- Ogaanidoontaan Macnaha iyo muhiimada nidaamka dimuqraadiga ah.
- Fahmidoontaan kala duwanaansha ka muuqdo qowmiyadaha iyo shucuubta Itoobiya.
- Ogaanidoontaan aas aaska xidhiidhka arimaha dibada ee Itoobiya.

## 1.1. Macnaha Nidaamka Dimuqraadiyada ah

Waxaad fasalka 5aad ku soo qaadateen in erayga dimuqraadi lagasoo qaatay luuqada Giriiga. Maxasuusantahiin waxa dimuqraadiyada tahay? Nidaamka dimuqraadiga se?

### Hadalkii Mudane Gedi

Mudane Gedi waa Maamulaha dugsiga hoose markii waxbarashada Teeramka 1aad ay bilaabantay ayuu Gedi isugu yeedhay dhamaan ardayda dugsiga goob waxaanu soo jeediyay hadalkan sosocdo:

"Ardayda sharafta leh ee qaaliga ah eey waan idin salaamay waxaani idiinku hambalyeeynayaa sanadka cusub in uu inoo noqdo sanad wacan. Waxaan rajaynayaa in sanadkan uu noqon doono mid ka duwan kuwii hore oo waxbarashada si heer sare ah aan udhamaysandoono. Intaas kadib, waxaan doonayaa in aan halkan ka soo jeediyo qorshaha sanadkan hawlaha aan qaban doono labo kamid ah.

1. Si ay hawsha u socotane waxaan in ay isku dubaridaan u doortay Ardaydan soo socodo: fasalka 6aad Arday cumar, fasalka 5aad Axmed. Fasalada 1aad - 4aad waxaan u xilsaaran Arday cali.
2. Ardayda oo iska dhagaysanaysa hadalka ayaga oo la yaaban ayaa ugu danbayntii bilaabay sawaxan iyo buuq. jaamac ayaa ydhi macalin sideed anaga ardayda oon wadahadlin oo nan dooran gudi ama cid namatasha adigu kaligaa udooratay? oo hadda waxay ka dhigan tahay cid aan dooran ayaa naxukamayso oo lagu soo xulay rabitaanka hal shaqsi? ma ehe in ay sidaas noqoto. Sanadkii hore macalin kayagii maadada anshaxa iyo wadaniyada ayaa nabaray in hanaankaas oo kale aan u ahayn nidaam dimuqraadi ah.

## Nidaamka Dimuqraadiyada

Nidaamka diimuqraadiga ah in uu yahay mid ka qaybgalinayo aragtida dadka iyo cida ay arintu khusayso in ta aan go'aan layska qaadan ayaan baranay. Hawlaha dhexdayada Jirta ee dugsiga hadba in aan anagu ka doodno ayaan xaq u leenahay mana ahan adiga un aad iska go'aamisid.

Haddii ka waran ardaydu ay inta baddan maalmule Sabtida iyo Axada hawle kale qabanayaan? Maamule Geedi oo ka muuqato wajigiisa farxad iyo dhoola cadayn ayaa ka codsaday ardaydu in ay dhaqaystaan. Mudane Geedi wuxuu u sheegay sida uu ugu faraxsan yahay ardayda gaar ahaan arday Jaamac. "Weey dhantahay! Waxa la doonayo waa sidaas! Ane waxaan tijaabinay bal inta aad ka fahanteen casharada iyo duruursta ku saabsan anshaxa suuban iyo wadaniyad. Runtii waan faraxsanahay maadama aad muujiseen nidaam dimuqraadi ah.

### Layliska 1aad

Waxaad ka doodaan su'aalahan.

1. Sheekada ma ka fahantay waxa dimuqraadi iyo nidaamka dimuqraadiga ah yahay?
2. Ka dooda guud ahaan geedisocodkii sheekada iyo dooda sida ay uga dhaxmuuqatay nidaam dimuqraadiyadeed.
3. Labadii go'aan ee maamul Geedi gaadhay marka dhinaca dimuqraadiyada laga eego ma ku sax Sanaa mise ma haboonayn?

Dimuqraadiyadu waa hanaan maamul oo awooda xukunka ugu sarayso ay shacabka kasoo askunto. Nidaamka dimuqraadiga ah cida xukumayso shacabka waxaa soo xusho isla shacabka waxayna ku timaadaa rabitaankooda. Nidaamka dimuqraadiga ah masuulka la doorto haddii uu gudan wayo xilkiisa waa laga badali.

Nidaamka dimuqraadiga ah waa mid ku dhisan ka qooybgalka bulshada is la markaana lagauSxoojin karo nabada iyo horumarka wuxuuna mud naanta siiyaa rabitaanka shacabka. Hanaanka dimuqraadiga ah bulshadu waxay noolashooda, dhibaatooyinkooda, go'aamada ay qaadanayaan dhamaan waxay ku xaliyaan wada haddal iyo is fahan.

### Layliska 2aad

Ka dooda su'aashan soo socoto.

Marka la leeyahay nidaamka dimuqraadiga ah waa mid ku dhismo ka qaybgalka bulshada islamarkaana mudnaanta siinayo rabitaanka dadka maxaynu u Jeednaa?

### 1.1.1. Baahida loo qabo nidaamka dimuqraadiga ah

- Siddee buu nidaamka dimuqraadiga ah ku noqday mid muhiim ah?

Dalkeenu si ka duwan dalal badan oo kale waa mid ay ku dhaqanyahiin qaramo, qowmiyado iyo shucuub badan. Sidaas awgeed nidaamkan dimuqraadiyadu wuxuu sigaar ah muhiim ugu yahay dalka Itoobiya.

1. Wuxuu damaanad qaadayaa in dhamaanba qowmiyadaha iyo shucubta ku dhaqan dalka ay helaan xaqooda. Waxaa kale oos meesha ka saarayaa

dhaqanka eexda iyo cadaalad la'aanta islamarkaana cid walba loo eegayo si siman. Xiligan lagu jiro dhamaan qowmiyadaha ku dhaqan Itoobiya waxay ku dhaqmaan dhaqamooda, adeegsadaan luuqadahooda ayne isku maamulaan.

2. Arinta kale ee nidaamka dimuqraadiga ah sida gaarka ah muhiimka ugu yahay Itoobiya waa ayada oo qowmiyadahan ku kala duwan diimaha iyo dhaqamada inta ay meel iska dhigaan faraqaas u dhaxeeyo hal meel iyo aragti midaysan yeeshaan.

## Layliska 3aad

- Ka dooda su'aashan idinka oo koox koox ah.

Waa maxay sababta looleeyahay nidaamka dimuqraadiga ah wuxuu si gaar ah ahmiyad ugu leeyahay dalkeena Itoobiyaa?

### 1.1.2. Tiirasha aas aaska u ah nidaamka dimuqraadiga ah

- Fasalkiin ma ka jiraa hanaan dimuqraadi ah? Maxaa hanaanka dimuqraadiga ah ee fasalkiina lagu cadayn karaa?
- Waa maxay marka aynu leenahay waa in aad kala duwanaanshaha fikirkiina is waa fajisaan oodne wada noo laataan?

Haddii mid ka mid ah ardayda fasalkiine ee aad fikirka ku kala gadisantahiin xidhiidhaka idinka dhaxeeyo wax lagaa weeydiiyo maxaad ku jawaabi lahayd? Shaxdan hoos ku qoran ku guuriya buugtiina haddii aad ku faraxsantihiin goobta dhahyso "waan ku faraxsanahay" calamadeeya; hadii aydaan ku faraxsanayne meesha dhahayso "kuma faraxsani" ku calamadee adigoo adeegsanayo calaamada (✓).

| Hawsha/ficilka laqabanayo | Waan ku faraxs anahay | Ku ma faraxsani |
|---|---|---|
| Hadii lagaadhigo horjoogaha fasalka: | | |
| Haddii laylis layskugu kiin daro in aad wadajir uga shaqaysaan; | | |
| Hadii nadaafada fasalka qof kale in aad isla qabataan lagu guqoro | | |
| Haddii hal kursi labadiisa dhinac aad ku wada fadhiisataan; | | |
| Haddii aad hal naadi xubin ka wada noqotaan idinka laydiin doorto hogaan; | | |
| Haddii laguudiro shaqo kooxeed dabeed adiga lagaa dhigo hormuud ka. | | |

Waxaa jira astaamo kala duwan oo lagu garto nidaamka dimuqraadiga ah ,waxaana ka mid ah

**B. ka qaybgalka bulshada**

Nidaamka dimuqraadiga ah waxyaabaha aas aaska u ah waxaa ka mid ah ka qaybqalka firfircoon ee bulshada. Bulshada in ay ka qaybgasho xiliyada doorashada. Waxaa kale ay ka qaybqaataan arimaha sida horumarka, dhaqaalaha iyo kuwa kale

**T. Xaqiijinta Sinaanshaha Shacabka**

Nidaamka dimuqraadiyada ah shacabku wey siman yahiin. Qofne looma eegayo diintiisa, midabkiisa, qowmiyad, Jinsi ama waxa uu aaminsanyahay. Waxay dadku usmanyahiin fursadaha waxbarashada, shaqada, dhaqaalaha iyo kuwa kalaba.

**J. Jirtaanka dhaqanka isku dulqaadashada**

Marka laleeyahay in laqaato ku kala duwanaanshaha fikirka waxaa looga jeeda sida dadku ugu kala duwanyahiin midabka, jinsiga, luuqadaha, diimaha, iwm ayay ugu kala gadisanyahiin fikir kane. Sidaas awgeed in aad aqbashid garowstlidne fikir kooода isla mar kaana xushmaysid. Waxaa muhiim ah in la ixtiraamo aragtida kuwa kale lana dhagaysto fikir kooda xataa haddii aadan ladhacsanaayn erayada.

### Layliska 4aad

ka shaqeeya su'aalahan soocoda

1. Qor labo ka mid ah tiirasha ama qodabada aas aaska u ah nidaamka dimuqraadiyada?
2. Faa'iido caynkee ah ayaa ku Jirto in ka laduwaan shaha laqaato dabadeedna lawadnoolaado ayada oo lakala duwanyahay?

## 1.2. Xuquuqaha Adaminimo iyo kuwa Dimuqraadiyadeed.

### 1.2.1 Xuquuqaha Adaminimo iyo kuwa Dimuqraadiyadeed waxa ay ku kala duwanyahiin.

- Sheega saddax ka mid ah kuwa lagu tilmaamo xuquuqaha adaminimo?
- Sheega saddax ka mid ah kuwa lagu tilmaamo xuquuqha Dimuqraadiyadeed?

***Xuquuqaha Aadaminimo*** waa kuwa qofku leeyahay oo ku yimid si dabiici ah islamarkaana dhamaan dadku ka simanyahiin mar haddii ay yahiin biniaadam. Waxaa ka mid ah xaqa qofku u leeyahay in uu noolaado, xuquuqda dhaqdhaqaaqa iyo kuwo kale.

***Xuquuqaha Dimuqraadiyadeed*** waa xuquuqaha ay ku naaloodaan bulsho ku dhaqanto nidaam dimuqraadi ah. Waa xuquuqaha ay leeyahiin qofka iyo bulshada katirsan meel nidaam dimuqraadi ah lagaga dhaqmo si ay uga qaybqaataan arin walba oo ka jirta dalkooda. Waxaa ka mid ah xoriyada hadalka, xuquuqaha isku imaanshaha iyo banaanbaxa, iyo xuquuqaha in aad waxdorratid laguna doorto iyo kuwa kalaba.

Xuquuqaha biniaadmiga iyo kuwa dimuqradiyadu waxay leeyahiin waxyaabo ay ka siman yahiin iyo kuwo ay ku kala duwanyahiin. Waxaa mid ka dhigayo maadaama ay labadoodubo u taaganyahiin xuquuqaha aas aasiga ah ee biniaadamku u baahanyahay. Waxay ku kala

duwanyahiin asal ahaan halka ay salka ku hayaan. Xuquuqaha aadamiga waa kuwa dabiici ah ay tahay in ladhowro mar haddii uu biniaadmigu yahay biniaadmi. Halka kuwa dimuqraadiga ahne ay yahiin kuwa qof walba waxa uu aaminsanyahay, fikirkiisa iyo aragtidissa in uu dariiq nabadgalyo ah ku soo bandhigo in loo xaqiijiyo.

## Layliska 5aad

Shaxda hoos ku qoran inta aad buugtiina ku guurisaan xuquuqaha soo socdo bal qaybta ay hoos yimaadaan kuwa "Aadaminimo" iyo "Dimuqraadiyadeed" kala sooca. Adeegsada calaamad "(✓)" si aad u tilmaamtaan.

| Tusmo oyinka xuquuqaha | Xuquuqa Aadaminimo | Xuquu qaha dimuqra diyadeed |
|---|---|---|
| Xuquuqda isu imaatinka | | |
| Xuquuqda madaxba naanida diimaha | | |
| Xuquu qda is abaa bulida | | |
| Xuquuqda in aad wax dooratid laguna doorto | | |
| Xuquuqda noolaa nshaha | | |

### Arday Daahir iyo Bare Duulane

Ardayga la yidhaahdo Daahir waa fasalka 6aad. Aroota hore ardayda marka ay safka ku jireen ka horne aanaygalin fasalka ayuu asaga ku akhrikahayo una sheegaya in ay xuquuqda biniaadaminimo iyo tan dimuqradiyadeed ee dugsigooda aanan wanaagsanayn, islamarkaana hanaanka hogaanka ee dugsiga guud ahaan u xunyahay ayaa waxaa maqlay macalinkii subaxaas safka ardayda horjoogay ee Duulane.

Wuxuu weydiiyay Daahir oo waa maxay? "hadal ayaan Jeedinayaa" ay uu daahir ugu jawaabay. "oo hadal caynkee ah?" ayuu weeydiiyay bare dulane. "oo waxay dooniba ha noqoto; ee maxaa ka khuseeyo? In aan waxaan doono ku hadlo waa xuquuqdayda dimuqraadiyadeed! Ayuu yidhi arday daahir. Bare Duulane maadamu uu ka xanaaqay jawaabta Daahir wuxauu ku bilaabay dharbaaxo una jiiday dhanka xafiiska. Ka dib wuxun bilaabayne in uu qaraaco arday Daahir.

## Layliska 6aad

Indinka oo ku salaynayo sheekada ka jawaaba su'aalahan.

1. Hadalkii uu jeedinayay Daahir ma ku saxsanaa mise kuma saxanayn? Sabab?
2. Bare Duulane in uu Daahir u gacan qaado maku saxsanaa mise may? Sabab?
3. Duulane wuxuu ku xadgudbay xuuqda Dahir. Xuquuq caynkee ah ayuu hadaba ku xadgudbay?
4. Bare Duulane iyo Daahirba si aanayba ugu xadgudbin xuquuq maxay ahayd in ay sameeyaan?

### 1.2.2. Muhiimada ay leedahay in xuquuqaha Aadaminimo iyo kuwa dimuqraadiyadeed la darayeeelo



Jaantuska 1.1 Faa'iidooyinka Xuquuqaha

- Saw ir walbaa fariin caynkee ah ayuu xambaarsanyahay?
- Idinka oo ku salaynayo sawirada, waxaad faahfaahisaan faa'iidada xuquuqaha aadamiga iyo kuwa dumuqraadiyadu u leeyahiin biniaadamka.

Dhamaanba dadku waxa ugu muhiimsan ay ku hamiiyaan waa in ay ku noolaadaan duni iyo noolal ka madaxbaan isjid-jiidad,Cadaadis, cadaalad daro, cabsi galin iyo amin daro. Marka dadku si ay cabsidaas iyo cadaadis kaba ooga nabadgalaan islamar kaane ka dhowrsan aadaan in xoog, buuq, qalalaaloso iwm aanay u adeegsan, ayaa waxaa la damaanad qaaday xuquuqahan biniaadamka iyo kuwa dimuqraadiiyada.

Xuquuqaha Aadamimio iyo kuwa dimuqraadiyadeed aad ayay muhiim u yahiin sababtuna waa: Human and democratic rights are essential:

- In la helo nabad ku wada noolaansho;
- In nooc kasta oo shaqo ah si nabadgalo loo qabto;
- In ay gacan ka gaystaan sidii loogu hoos noolaan lahaa maamul ka dhowran cabsigalin, eex, cadaalad daro oo daryeelo sinaanshaha shacabka.

**Layliska 7aad**

ka dooda su'aalahan soosocdo

- Waa maxay sabata aynu u leenahay xuquuqaha aadaminimo iyo kuwa dimuqraadiyadeed aad ayeey muhiim ugu yahiin bini aadmiga? (kajawaaba su'aasha idinka oo eegayaho xidhiidhka idinka dhaxeeynayo bulshada dugsiga, sida saaxiibadiin, macalimiintiina amase shaqaale kale ee dagusiga.)

## 1.3 Kala duwanaashaha ka dhax muuqdo qowmiyadaha, iyo shucubta Itoobiya



Jaantuska 1.2 Qowmiydaha iyo Shucubta Itoobiya

- Maxaad sawirka ka fahanteen?
- Maxaa looga jeedaa marka laleeyahay Itoobiya waa hoyga ama carwada qaramo, qowmiyado, iyo shucuhb?
- Waa maxay faa'iidada ku jirto haddii fasalkiina dhexdiisa qowmiyado kala haysto diimo kala duwan la ixtiraamo xuquuqo hoodaas?

Itoobiya waa dal ay kunool yahiin in ka badan sideetan (80) qowmiyadood. Qowmiyadahan iyo shucubtan waxay leeyahiin wax ugaa rah oo lagu garto. Shacab walba wuxuu leeyahay luuqad ugaar ah uu ku faano; diin iyo dhaqamo kalaba. Maadaama ay dhamaan qowmiyadahan iyo shucuubtan kala duwan ku wada noolyahiin hal dal iyo jaceel ka dhaxeeyo islamarkaana ka midaysan yihiin dhinac aragtida dalka ayaa waxay keentay in la yidhaahdo Itoobiya waa hoyga ama carwado qaramo, qowimiyado iyo shucuub kala duwan. Sidaas daradeed, waxaa muhiim ah in aan ku dhaganaano bilicdan dhaqameed ee dabiiciga ah aanane sii xoojinayo midnimadeena.

Quruumaha, qowmiiyadaha iyo shucubta reer Itoobya kala duwanaanshahooda in ay midnimo u badalaan muhiimada ay leedahay ayaga oo ka dharagsan ayay samaysteen hal nidaam oo ah fadaraali.

Hanaanka Fadaraaliga ah ee Itoobiya waa nidaam u taagan ilaalinta xuquuqaha qowmiyadaha iyo shucubta dalka. Haddii xataa ay Jireen kaladuwanaansho dhinacyada aragtida wuxuu nidaamku suurtagalinayaa in aynu ku xalino si nabadgalya ah iyo wada haddal.


## Layliska 8aad

Ka jawaaba su'aalaha soo socdo.

1. Waa maxay kala duwanaanshaha ka dhaxmuuqdo qaramada, qowimyadaha iyo shucuubta Itoobiya?
2. Qowmiyadaha iyo shucuubta ku dhaqan Itoobiya si aanay u dhicin is maandaaf ka yimaado kala duwanaanshaha, maxaa loo baahanyahay in ay ku dhaqaaqaan? Hadiise uu is ku dhac yimaado maxaa loo baahanyahy in ay sameeyaan ?

## 1.4 Xidhiidhka Arimaha Dibada

### 1.4.1 Xidhiidhka ay Itoobiya la leedahay wadama dariska ah




Jaantuska 1.3. Itoobiya iyo Wadamada Dariska ah

- Intaad sawirka khariirada ku guurisaan buugiina, qora magacyada dalalka dariska la ah Itoobiya.
- Xidhiidhka Itoobiya ay la leedahay wadamada dariska ah waa mid ku dhisan mabaadii caynkee ah?

Mid ka mid ah mabaadiida aas aaska u ah xidhiidhka dibada ee Itoobiya hanoqoto wadama dariska ah iyo kuwa kale ee Afrikaankaba ah waa

in lagula noolaado nabadgalyo iyo xidhiidh ku dhisan sidii loo sii xoojin lahaa xaalada dhaqaalaha iyo isdhaxgalka umadaha. Xidhiidhka ay Itobiya la leedahay dalalka dariska ah waa mid ku salaysan daris wanaag, walaal tinimo iyo nabad ku wada noolaansho oo laxoojiyo.

Wadamada dariska ah sida (Jibuuti, Suudaan, Kiinya) xidhiidhka ay Ittobiya la leedahay waa mid leh dhiiragalin heer sare ah islamar kaane sii xoogaysanayo marba marka ka danbayso. Haddaan soo qaadano xidhiidhka horumarka, Suudaan oo kale waxaa Jira xidhiidh toos ah oo isgaadhsiinto taleefoonada isku xidho labda dal.

Inkasto oy labada dal mudo aad u dheer daris ahaayeen haddane ma Jirin wado isku xidha oo wanaagsan. Laakiinse hadda waxaa jira xidhiidh toos ah oo dhinaca gaadidka u kala goosha labada dal. Sidoo kale dhanaca dhaqaalaha,nabadgalyada iyo dhinacyo kalaba wuu taabtaa xidhiidhku. Sidaas daraadeed, xidhiidhka u dhaxeeyo Itoobiya iyo Suudaan aad ayuu u wanaagsanyahay.

Sidoo kale xidhiidhka adag ee ka jira Itoobiya iyo Jibuuti labada wadaanba aad ayeey uga faa'iidaystaan. Sida la ogsoonyahay xiligan dakata Jibuuti waa mida laf dhabarka u ah ganacsiga dibada ee dalkeena. Markaas waxaa Jira xidhiidh adag oo ka dhaxeeyo dadka Itoobiya iyo Jabuutiba.

## Layliska 9aad

Ka dooda su'aashan soo socoto

1. Marka aynu leenahay xidhiidhka Itoobiya ay la leedahay dalka dariska ah waa mid ku dhisan xoojinta daris-wanaaga maxaa looga jeedaa? Tusaale ku xooji Jawaabtaada.

## 1.4.2 Aasaaska Xidhiidhka Siyaasada Arimaha Dibada ee Itoobiya



Jaantuska 1.4 Aas Aaska Xidhiidhka Arimaha Dibada Ee Itoobiya

- Jaantuska 1.4. muxuu inatusinayaa?
- Ma awoodeen in wax aad ka fhantaann xidhiidhka arimaha dibada ee Itooobiya? Haddii aad awoodeen waa maxay waxa aas aas ka u ah xidhiidhka dibada ee Itoobiya?

Mabaadiida aas aas ka u ah xidhiidhka arimaha dibada ee Itoobiya waa dhisida nidaam dimuqraadi iyo horumar ku dheehantahay. Waxaa muhiim ah in aynu xaqajiino sidii shacabaka dalka ku dhaqan uga gudbi lahaayeen saboolniinada iyo dib u dhaca loona abuuri lahaa hanaan suurtagahinayo in muwadiniimntu ka faa'iidaystaan.siyaasada dibada ee dalka. Sidaas awgeed siyaasada disbada ee dalkeena malahan wax ujeeda ah oo ka baxsan qodobadaas. Danaha qaranka marka ay nuleenahay waxaan u jeednaa danaha dadka reer Itoobiya. Waxa aadka muhiimka u ahne in dadkuna ka faa'iidaysanayaan dalakane laga hirgaliyo maamul suuban iyo midaam dumuqraadi ah.

Biloowiga iyo gunaanadka siyaasada dibada ee dalkeena waa dadajinta hor umarka iyo dimuqraadiyada guud ahaan.

## Layliska 10aad

Ka dooda su'aashan soosocoto.

- Waa maxay wax loo yidhi siyaasada dibada ee dalkeenu waxay salka ku haysaa dhisida nidaamka dimuqraadiyadeed iyo horumarka?

# Nidaamka Dimuqraadiyada

## Gebogabada cutubka

Nidaamka dimuqraadiga ah waa mid ay shacabku xukumaan maamul ay soodoorteen iyo dawlad rabitaankooda ku timad. Dal sida mid keena oo kale ah ay ku noolyahiin dadyoow kala dhaqamo, kale diimo iyo luuquda kala duwan haysta in ay walaalinimo iyo Isfahan kuwada noolaadaan nidaamka usuurtagaliyo waa Kan dimuqraadiyada.

Nidaamka dimuqraadiga ah waxaa lagu gartaa aastaamo u gaar ah. Waxaana ka mid ah. Jiritaanka ka qaybqalka shacabka; xushmaynta sinaanshaha shacabka iyo Jiritaanka dhaqanka isku dulqaadashada.

Xuquuqaha aadamininyo iyo kuwa dimuqraadiyadeed waxay leeyahin waxay ku kala duwanyahiin iyo kuwa ay iskaga mid yahiin. Maadaamada labadoodub ay yahiin xuquuq aas aasi ah waa isku mid. Kala duwanaanshahooduna, xuquuqaha aadaminimo maadama uu qofka yahay biniaadam waa kuwo uu leeyahay waana dabiici. Xuquuqaha dimuqraadiyadeedna waa kuwa nidaamka dimuqraadiga ah uu muwaadiniintu u fasaxa hayo. Waa kuwa ka jira bulsho ku dhaqanta nidaam dimuqraadi ah.

Xuquuqaha aadaminimo iyo kuwa dimuqraadiyadeed waa kuwo aad muhiim uga ah dadka. Sababtuna waxay suurtagalinayaan nabad kuwada noolaanshaha, hawlwalba in si nabadgalyo ah loo fuliyo iyo in ay suurtagaliyaan ku noolaanshaha cadaalad, sinaan iyo nidaam ka dhowran cadaadis ama caga Juglayn.

Itoobiya waa dal ay ku noolyahiin qaramo, qowmiyadu iyo shucuub leh dhaqamo, luuqado iyo diimo kala duwan. Maadaama ay hadaba qowmiyadahan iyo shucubtan kala duwan ay kuwada noolyahiin is qadarin iyo is dhaxgal walaltinimo waxaa Itoobiya loogau magic daray hooygii  dadka kala duwan ku noolaayeen. Qowmiyadaha iyo shucuubta reer Itoobiya maada ay ka dharagsanyahiin faa'iidada kuwada noolahashaha waxay samaysteen  nidaam suurtagalinayo arimahaas oo  ahne Kan fadaaraliga ah.

Siyaasada arimaha dibada ee Itoobiya mabaadiida aas aaska u ah qodobka mid ah waa dhisida dariiqo ay dadyowga Afrikaanka ah kuwa dariska aynu nahay iyo kuwa kale ugawada faa'iay staan dhaqaalaha kobcayo iyo walaal tinimada. Dalkeenane wuxuu si wanaagsan u ixtiraansanyahay uguna dhaqmaa arintaas.

Qodobada aas aaska u ah siyaasada dibada ee Itoobiya a waa dhisida nidaam horumar iyo dimuqraadiyad ku dheehantahay. Waxaane muhum ah in marwalba lagu hawlanaado siyaasado horseedi karo sidii shacabka uga gudbi lahaayeen saboolnimada iyo dib u dhaca uguna faa'iidaysan lahayeen horumarka.

## Erayada ugu muhiimsan ee cutubka

**Fadaarali:** Dawlad leh ismaamul gaar ah iyo awood siyaasadeed oo baahsan islamarkaane u qaybsan dawlad-deegaaneedyo

**Dimuqraadi:** Nidaam maamul oo dadku soo doorto islamar kaane awooda ugusarayso ay leeyahiin shacabka.

## Su'aalaha Gebogabada Cutubka 1aad

Su'aalahan hoos ku xusan ee gebogabada cutubkan inta aad buugtiina ku qortaan ka shaqeeya.

I. Weedhahan soosocda haddii ay sax yahiin ku qira "Run" hadii ay khalad yahiina "Been".

1. Siyaasada arimaha dibadaee Itoobiya waxay leedahay ujeedo ah in la dhowro danaha qaranka.
2. Nidaamka dimuqraadiga ah wuxuu bulshada ka dhax abuuraa sinaan iyo cadaalad.
3. Xuquuqaha dimuqraadiyada iyo kuwaa aadamiga waxay ka simanahiin in ay labaduba yahiin kuwa si dabiici ah laguhelo.
4. Nidaamka dimuqraadiga ah waa mid ay shacabka maamulaan masuuliyiin ay soo doorteen
5. In la aamino kala duwanaanshaha fikirka lana qaato oo kali ah maahine wax kale oo larabaa in aad is ixtiraamtaan.

II. Kuwa ku hoos qoran xarafka "B" uga soo dooro kuwa ay isleeyahiin ee hoosyala xarafka "T"

| B | T |
|---|---|
| 1. Xoriyada fikirka, muujinta dibad baxyo nabadgalyo ah. | B. Xuquuqda aadaminimo |
| 2. Xuquuqda noolaanshaha | T. Aasaaska siyaasada dibada |
| 3. Daris-wanaag walaal tinimo | J. Xuquuqaha dimuqraadiyada |
| 4. Dhisida horumarka iyo nidaam dumuqraadi ah | X. Aasaaska xidhiidhka arimaha dibada |
| | Kh. Qaramada, qowmiyadaha iyo shucuubta |

III. Su'aalahan soosocda ka dooro jawaabta saxda ah

1. Teeba ah aas aaska nidaamka dimuqraadiga ah?
   B. isku dulqaadasho T. Sinaanshaha
   J. ka qaybqalka shacabka X. Dhamaanba
2. Sideebay shacabku uga qaybqaataan nidaamka dimuqraadiyada?
   B. In ay waxdoortaan lana doorto
   T. Xubin ka noqoshada ururo kaladuwan ee bulshada
   J. Ka qaybgalka shirarka deegaanka
   X. Dhamaanba

3. Waa maxay siyaasad arima dibadeed oo dhowrayso danaha qaran?

   B. Waa siyaasada gacan ka gaysanayso gaadhitaanka horumar degdag ah ee dalkeena.

   T. Mid gacan ka gaysanayso in nidaamka dimuqraadiga ku xididaysto dalkeena

   J. Waa mid gacan ka gaysanayso sidii ay bulshada si toos ah uga faa'iidasanlahayd hoorumarka

   X. Dhamaanba

## IV. Meelahan banana ku buuxi erayga ama weedha ku haboon

1. In kaladuwanaanshaheena dhinacyada sida luuqadaha, dhqamada iyo kuwa kalaba aan ugu wada nolaanlahayn is qadarin nidaamka gacanta ka gaysan karo waa _________________.
2. Qadobada aas aaska u ah xidhiidhka siyaasada dibada ee Itoobiya waa _______________ iyo _______________.

## V. Su'aalan soosocda ka bixi jawaab gaaban

1. Qaadashada kala duwaanshaha fikiirkeena iyo in aan kala duwananshahaas fikradeed u badalo mid is qadarin iyo wada noolaansho marka la yidhaahdo maxay ka dhigantahay? Faa'iida ku jirtase waa maxay? Tusaale ku muuji.
2. Waa maxay sababta loo leeyahay nidaamka dimuqraadiga ah dal sida Itoobiya oo kale ah ahmiyada gaar ah ayuu u leeyahay? Tusaale adeegso.

CUTUBKA 2

# Saraynta Sharciga

Ujeedooyinka guud ee cutubka: ka dib marka ay cutubkan dhamaystaan ardaydu waxaad:

- Fahamtaan xuquuqaha sinaanta ee qowmiyadaha Itoobiya.
- Fahmidoonaan faa'iida in sharciga la dhowro loona hogaansamo ay u leedahay muwaadiniinta
- Fahmi doonaan sababta loogu baahday in awooda masuuliyiinta dawlada la xadeeyo

## 2.1 Waa Maxay Dastuur?

- Ma xasuusataan waxii aad ku barateen dastuurka fadaraalka iyo kan deegaanada? Xidhiidh sidee ah ayaa ka dhaxeeyo?

Dastuurka waa sharciga uga sareeyo ee dal lee yahay. Waa Tukmiinti ay ku qeexanyahiin ujeedooyinka siyaasda, dhaqalaha iyo bulshada ee dalka iyo dadkuba. Dastuurku wuxuu gacan ka gaystaan sidii muwaadininta xuquuqdooda loo dhowri lahaa, waajibaadkoodane uga soo bixi lahaayeen.

Dastuurka fadaraaliga ah waa mid cadaynaha ujeedooyinka ugu muhiimsan ee siyaasada iyo dhaqan-dhaqaale ee dalka. Dastuurka deegaankuna waa kan xooga saarayoa arimaha gudaha ee deegaanka sida in aad ismaamushid, dajisid siy aasada bulshada, dhaqaalaha iyo horumarinta deegaanka.

**Layliska 1aad**

Ka jawaaba su'aalahan soosocda:

1. Waa maxay dastuur?
2. Muxuu Mudnaanta saarayaa dastuurka fadaraalka?

### 2.1.1. Baahida looqabo dastuurka dawlada deegaanada

Waamaxay waxa looga baahday in deegaanadu yeeshaan dastuur u gaar ah?

- Dastuurka dawlad deegaanadu waa mid ay iskugu maamulaan deeganada hadba sida ay xaalada gaar ahaaneed ee deeganka tahay laguna salaynayo. Qaar ka mid ah arimaha loogu baahday dastuurka deeganada ayaa ah.
- Wuxuu xaqiijinayo lahaanshaha xukunka iyo maamul ee qowmiyadaha iyo shucubta;
- Wuxuu gacan ka gaystaa hirgalinta is maamul hoosaadka;
- Wuxuu suurta galinayaa soo saarida sharciyo iyo xeerar ku jaangoysan xaalada dhabta ah ee deegaankaas;
- Wuxuu damaanad qaadayaa sinaanshaha luuqadaha, dhqamada, diimaha iyo Jinisga



Jaantuska 2.1 Sharciga oo Loo hogaansamo

## Layliska 2aad

Ka jawaaba su'aalahan soosocdo:

1. Waa maxay ujeedada dastuurka dawlad deegaanada?
2. Sheeg sadax ka mid ah baahida loo qabo dastuurka deegaanada?

### Shaqo kooxeed

In ta aad akhridaan dasturka Fadaraalka iyo kan deegaanka aad ku dhaqan tihiin dabadeedna ku salaysaan su'aalahan soosocda ka soo jeediya warbixin gaaban.

1. Faahfaahiya qodobada ugu muhiimsan ee dastuurka fadaraalku xooga saarayo.
2. Sheega arimaha ugu muhiimsan ee dastuurada deeganada xooga saaray aan.
3. Waa maxay faraqa ay ku kala duwanyahiin iyo waxa ay iskaga midka yahiin dastuurada dawlada deegaanada iyo kan fadaraalka?

## 2.1.2. Kaalinta Xeerdhaqameedyada ku leeyahiin sugida daganaanshaha

- Maxaa loogu baahday jiritaanka xeer dhaqameedyo?

Dadku xiliyadii ay ku hawlanayahiin hawlahooda iyo nolal maal meedkooda caadiga ah waxay dajisanjireen xeerar iyo dhaqamo ay ugu guulaystaan dhibaato walba oo soo wajahda. Ilaa haddane wali sidiibay ku si dhaqmaan. Tusaale ahaan, si ay ugu guulaystaan dhibaatooyinka dhaqaale iyo kan bulshaba waxay aas aastaan ururo sida hagbada (Jamac). Marka ay isku dhacyo yimaadaan waxay aas aasan gudiyo xaliyo dhibaatada. Marka ay leeyahiin xeerar ay dhamaanba dhib aatooyinka ugu gudbaan oo dajisan, waxay xeerarkaasi gacan ka gaysataan in sharciyada deegaanada ee I adajiyo ay xoojiyaan kala dan bayntane si fudud u timaado.

## Layliska 3aad

Ka dooda su'aalahan so'socdo

1. Waa maxay faa'iida Jiritaanka xeer dhaqameedyada ee deegaamada?
2. Kaalin caynkee ah ayay xeer dhaqameedyadu ku leeyahiin sugida daganaanshaha deegaanda?

## 2.1.3. Dhibaatada ka soo gaadhi karto muwaadiniinta sharci oo la dhawri waayo

- Dhibaato caynkee ah ayaa ka imankarto haddii sharciga loo hogaansami waayo?

### Fasalkii Sharciga dajistay

Ardayda Fasalka 6aad waxay biloowga sanad dugsiyeedkan dajisteen sharci ayaga oo kaashanayo baraha horjooga fasalka. Waxay heshiis ku gaadheen in Arday walba uhogaansamo sharicga. Qodabo ka mid ah sharciga ayaa ah in saacadaha la ilaaliyo; loo hogaansamo sharciyada dugsiga lana dhowro. Waxaa in uu nidaamka fasalka ilaaliyo loo doortay arday Cilimi. Inkasto oo Cilmi dhamaanba sharciyada dugsiga u hogaansamay haddana madhacin in ay ardayda kale sidaas sameeyaan. Waxaane aad u hoosaysay dadaalka Cilimi ee sidii ardaydaas ugu hogaansami lahayd sharciga. Tani waxay sababtay in fasalka aanun ka hirgalin nidaam waxbarasho iyo anshax. Inta baddan ardayda fasalka waxaa hoos usii dhacayso rabitaanka iyo xiisaha ay u hayaan waxbarashada.

### Layliska 4aad

Ka jawaaba su'aalahan idinka oo kaashanayo sheekadaas:

1. Waayo cida masuulka ka ah in sharcigaasi dhaqan gali waayo?
2. Maxay ahayd in uu ku dhaqaaqo baraha horjoogaha fasalka si sharcigu u sii nagaado?

U hogaansanka sharciga wxaa loga jeeedaa marka ay dhamaan muwadiniinta sharciga ixtiraamaan sharcigana uu xadidayo. Ilaalinta sharcigane waa marka muwaadiniintu ay arkaan dadkale oo sharciga jabinayo in ay difaacaan sharcigaas si nabadgalyo ah. Haddii sharicga loo hogaansami waayo waxbarsho, nabadgalo horumar iyo wada noolaansho majiri karaan.

### Layliska 5aad

Inta aad akhridaan xaaladahan hoors ku qoran ka dib ka dooda bal wax ay ahayd in laqabto:

1. Haddii uu shaqaale ka tirsan dugsiga oo soo daaha asaguba ku yidhaahdo ardayda hasoo daahine ;
2. Haddii shaqaale aan ba bilicda dugsiga danayn uu ardayda ku yidhaahdo ilaaliya nadaafada dugsiga.

Si loo difaaco sharciga waa in marka hore loo hogaansamo sharciga.

### Layliska 6aad

Ka dooda su'aalahan soo socdo:

1. Dhibaatooyin sidee ah ayaa ka dhalankaro haddii sharciga la dhowri waayo?
2. Ilaalita sharciga ayaa musuul ka ah? in la dhowrase?

## 2.2 Anshaxa

### 2.2.1 Macnaha anshaxa




Jaantuska 2.2. dadka waayeeelka ah oo loo gargaaro waa anshax wanaagsan



Jaantuska 2.3 Anshaxa Suuban aan dhaqan ka dhigano

- Fariimo caynkee ah ayaad ka daalacateen sawirka?
- Idinkuse ficilo caynkee ah in aad ka qaybqaadataan ayaad ku faraxsanaan lahaydeen?

### Abaalka Anshaxa Suuban

Muxamed waa Araday dhigta fasalka 6aad. Waa mid lagu yaqaan dhaqankiise wanaagsan dhinaca dariska, qoyskooda iyo dugsigaba. Muxamed dabecadiisa suuban marka lagayi maado waxaa kale oos ku wanaagsanyahay waxbarashada.

Waxaa aad looguyaqaan u hogaansanka sharciga dugsiga iyo awaamirta. Dad badan ayaa waxay ugu yeedhaan "Willki caqliga badnaa". Xiliga aanusan waxbarashada qaadanayn wuxuu ka qaybqaataa naadiyada kala duwan ee dugsiga; gaar ahaan midka wadaniyada iyo anshaxa. Sidaas daraadeed aayuu laba jeer ku helay abaal marin

#### Layliska 7aad

Ka jawaab su'aalahan soo socda idinka oo tixraacyo sheekada.

1. Ayaad u malaynaysaan in ay gacan ka gaysteen anshaxa wanaagsan ee waxbarashada natiijada leh ee uu Muxammed ku si foobay?
2. Faa'iidooyin caynkee ah ayay kuu soo hoyinkaraan in lanoqdo qof leh anshax wanaagsan?

Waxa aynu ku kala saaro in ficiladu khalad ama sax yahiin waa anshax. Kaalinta muhiim ah ayuu anshaxu ku leeyahay in abuuro dad leh dhaqan wanaagsan.

Anshaxa wanaagsan waa ka bulshadu ogalaansho ka hela islamarkeena wanaag horseedi Kara. Anshaxa aan ha boonayne waa wax walba ooy

bulshada aqbali waydu loona arko dhaqan xun. Guud ahaan, waxaa la odhan karaa anshaxu waa hanaan lagu cabiro dabeecadaha wanaagsan iyo kuwa xun xun.

## Layliska 8aad

Shaxda hoos ku qoran intaad buugaagtiina ku guurisaan ficilada qoran ee cabiraya heerka anshaxa oga jawaaba "Anshaxa wanaagsan" iyo "anshax aan wanaagsanayn". Isticmaala calaamada ( " ✓ ") si aad u tilmaamtaan jawaabtiina

| Tusmooyinka anshaxa | Anshaxa wanaagsan | Anshax aan wanaagsanayn |
|---|---|---|
| Uhogaansamida awaamiirta iyo xeerarka dugsiga | | |
| Gacansiinta dadka liita | | |
| Ku dhaqaaqida ficil aan bulshada ku ha boonayn | | |
| Isku dhacyo abuurid | | |
| Ixfiraamla'aanta waalidka iyo dadka kaa wayn | | |
| Quursiga dadka taagta daran | | |
| Xafidida sirta | | |
| Run sheeg in aad ahaalid | | |
| Beenala In aad noqotid | | |

### 2.2.2 Anshaxa laga sugayo ardayga ee heer dugsi

- Waa maxay anshaxa heer dugsi ee ardayda laga sugayo?

**A. as aaska anshaxa ardayga waa qoyska.** Caruurta in ay noqdaan kuwa anshax wanaagsan ku barbaara waalidiinta kaalin sare ayey ku leeyahiin. Dugsiyaduna si aan ka hoosayn waalidiinta ayeey door muhiim ah ku leeyahiin dhisida iyo soo saarida arday anshax leh. Guud ahaan, anshaxa heer dugsi laga sugayo ardayda aad ayeey u badanyahiin waxaana ka mid ah

**B. Xushmaynta iyo u hogaansanka xeerarka iyo shraciyada dugsiga.**

Si loo helo hanaan baris barasho oy ku dhe hantahay kala dambayn iyo is citi qaadin waxaa muhiim ah in la dhiso sharciyo iyo xeerar. Ardaydu waxaa laga sugayaa in ay u hogaansamaan sharciyada iyo awaamiirta dugsiga uu dajistay. Sidoo kale in ay ardaydu raacaan talada iyo jihaynta baraha hadba siiyo.

**T. Daryeelida hantida dugsiga.**

Hantida iyo qalabyada laga helo dugsiga dhex diisa waa kuwa lagu dhisay lacag laga soo uruur iyo shacabka. Ma ehe qalab sifudud loo badali karo mar haddi uu bururo. Sidaas daraadaad, ardayda anshaxa wanaagsan ee wadaniyiinta ah waa kuwa daryeelo hantida dugsiga sida kuraasta, fasalada wax lagubarto. Buugaagta wax lagabarto.

**J. Dhowrida naadafada iyo bilicda dugsiga iyo fasalada**

Mid ka mid ah anshaxa wanaagsan ee ardayda lagsugyo waxaa weeyaan dhowrida nadaafada iyo blicda dugsiga. Waxaana ka mid ah in arday wala ka qaybqaato nadiifinta fasalada; xanaanaynta dhirta dugsiga, haddii ay la kulmaan cida waxyeelaynayso dhirta in ay maamulka dugsiga u soo gudbiyaan iyo kuwa kalba.

**X. Qadarinta bulshada dugsiga**

Si loo taabagaliyo hanaanka baris barasho ee dugsiga kaalinta dhamaanba bulshaooyinka waa mid muhiim ah. Marka cid walba oo ku haw lan gacan ka gaysashada taabagalka baris barashda in la dhowro lana xushmeeyo waa arin laga sugayoardayda.

### Layliska 9aad

Ka dooda su'aalahan soo socdo

1. Haddii kuraasta fasalka dayacmaan oy jajabaan ardayda san adka dambe fasalkaas soo gali doonto maxay wax ku baran doonaan? Ka dooda dabadeedne waxa aad xal u aragtaan soo bandhiga.
2. Heer dugsi ahaan anshaxa ardayda laga sugayo maxaa ka mid ah?
3. Maxaa loogu baahanyahay in ardaydu yeelato anshax wanaagsan?
4. Waa maxay doorka qoysku ka gaysankaro dhisida jiil anshax wanaagsan leh?

## 2.3 Xadaynta Awooda Maamul

### 2.3.1 Waa maxay xadaynta awooda maamul?

- Tuuladiina ama degmadiina qof lasoo doortay oo masuul ah kuna dhaqmo si ka baxsan sidii sharciga fasaxayay waligiin ma aragteen mise ma maqasheen?
- Talaaba caynkee ah ayaa loo baahanyahay in laga qaado qofka u dhaqmo sidan oo kale?

Xadaynta awooda maamul waa sharci kuu ogaalano heerka awoodada maamul ay tahay in aad ku dhaqanto. Masuul walba ay shacabka soo doorteen ama ka shaqeeya xafiisyada adeega bixiya waxaa jira sharci xadidayo awoodiisa maamul,waxaane jira sharcisiinayo awood maamul islamarkaana ay tahay in uu ku dhaqmo . Lama Ogala in xadka awooda maamul ee masulka la siiyay wax ka baxsan adeegsado ama ku takrifalo kursiga. Haddii dadku ay ku shaqaynayaan si ka baxsan sidii sharcigu fasaxay ma dhalan karto hanaan wanaagaan oo shaqo. Qof walba wuxuu u fulin arinta hadba sida uu u arko ama la noqota. Tusaale ahaan, Ardayga hor joogaha fasalka haddii uu dhaafo xadkii loo fasaxay ee ilaalinta nidaamka fasalka, waxaa iman buuq iyo kala dambayn la'aan fasalka dhexdiisa

### Layliska 10aad

Waxaad ka doodaan su'aalahan soo socdo

1. Maxaa loogu baahanyahay in la xadeeyo awooda maamul ee masuuliyiinta?
2. Dhibaatooyin caynkaa ah ayaa dhalan kara haddii ayna jirin xadaynta awooda maamul ?

## 2.3.2 Baahida loo qabo xadaynta awooda maamul ee masuuliyiinta shacabku soo doortay

- Waa kuwee masuuliyiinta ay shacabku doorteen?

### Mudane Qabdid

Mudane Qabdiid waa Nin ay shacabku soo doorteen oo ah Gudooniyaha xaafada. Kadib markii loo doortay xilkaas waxii ka dam beeyay wuu badalay dabeecadihii wanaagsanaa ee looga bartay. Wuxuu bilaabayba in uu u shaqeeyo si ka duwan sidii sharcigu dhigayay.

Waxaa laysku raacay in uu ku shaqeeyo eex iyo qabayaalad cad. Tusaale ahaan, Guryaha dawlad inta uu dadku ku jiro si musuqmaasuq ah cadaymo u sameeyo deedne ka bixiyo ayuu dajiyaa qaraabadiisa.

Waxaa intaas sii dheerba inta uu awooda masuuliyadeed ee lasaaray sii dhafay ayuuba dhulka dawlada dad si hoose looga iibiyo ayuu fasaxaa. Marka shacabkii soo dartay ayaa arinta fajac ku noqotay. In kasto oo arinta soo shaac baxday haddane in ay talaabo ka qaadaan masuurta galin.

Maalin maalmaha ka mid ah mar uu dadka xaafada isugu yeedhay shir ku saabsan xaalado kale, ayaa qof la socday tacadiga iyo dhibku uu Qabdiid ku hayo deegaanka soo bandhigay arinta. Wuxuuna soo jeediyay in ninkan xilka ka dago lana hor keeno sharciga. Maadaama cid walba arinta ay ogaydba waxaa loo sacabeeyay ninkii sidaas soo jeediyay. Laa kiinse mudane Qabdiid wuu ku gacan saydhay eedaha loo soo jeediyay wuxuuna sheegay in uusan marnaba ka dagayn kursigiisaa.

### Layliska 11aad

Idinka oo ku salaynayo sheekada kor ku xusan ka jawaaba su'aalahan.

1. Waa maxay ficilka mudane Qabdid u sameeyay ee ka baxsan sharciga?
2. Maxaad u malaynaysaan markii uu ninkii u soo jeediyay eeda Qabdiid ka dib dadku in ay u sacabeeyaan?
3. Mudane Qabdiid maadaama uu yidhi xilka ka ma dagayo, ma u malaynaysaan in uu xilka sii hayn doono? Sabab?
4. Deegaankiina in ay arin taa oo kale ah ka dhacday ma maqasheen waligiin? Maxayse natiijadu ahayd?

Kuwa shacabka ay doorteen marka la leeyahay waxaa loo jeeda masuuliyiinta shacab goob kuwada nool wakiilada ay doorteen in ay iyaga matalaan una taagnaadaan ilaalinta xuquuqaha bulshada ay ka soo baxeen.

### Layliska 12aad

Ka dooda su'aashan soo socoto.

1. Sabata loogu baahday in la xadido awooda maamul ee masuuliyiinta intaad fahfaahisaan kadib ka dooda.

## 2.4 Sirta

### 2.4.1 Sirta Saaxiibada

- Waa maxay sirta saaxiibada?

• Ma garanaysan mar aad saaxiibadiin arin sir ah ka wada hadasheen?

• Arimo sidee ah ayaa la odhan karaa wa sir dhexmari karta saa xiibada?

Sirta saaxiibada waa arin qarsoodi ah iyo balan ay kala qaataan labo ama in ka baddan oo saaxiba ah. Haddii sirtaas loo gudbiyo cidkale ma ehe arin wanaagsan. Waxaaba dhici karto in ay dhibaato horseedo. Sirta waxay ka dhaxayn kartaa saaxiibada deegaanka, saaxiibada aad shaqada wadaagtaan iwm. Waxaa muhiim ah loona baahanyahay in sirta ay kuu sheegtaan saaxibadada aad amaan siisid ama xafidid.

**Layliska 13aad**

Ka jawaaba su'aalan soosocda

1. Waa maxay sirta saaxiibada?
2. Tusaale ka bixiya sirta ka dhex jirikarta saaxiibada?
3. Maxaa ka dhalankara haddii sir ay isku ogaayaan labo saxiib ay dibada u soo baxday?

## 2.5 Musuq Maasuqa

### 2.5.1 Macnaha Musuqmaasuq

**Waxaasaa Natiijo ah!**

Ardayada dhigato fasalka 7aad ee magaceedu yahay Canbaro, waa gabadh ka dhalatay qoys dhaqaale wanaagsan,laakiinse aad ugu liidato waxbarashada. Bare Raxma waa macalinka maadada xisaabta ee fasalka isla markaana ah horjoogaha. Bare Raxmo, waxay qoyska Canbaro ka dhalatay u sheegtay in ay gabadhooda ku liidato waxbarashada. Qoyskii Canbaro ayaa bare Raxmo u qoray lacag guno ah si ay xiliga dheeriga ah xaafada wax ugu barto Canbaro. Macalimad Raxmo ayaa biloowday in ay sidaas wax u barto Canbaro. In kaste ooy bare Raxmo u gashay dadaal dheeri ah sidii ay Canbaro u noqon lahayd arday natiijo fiican keena hadane sidaas manoqon. Raxmo maadama ay lacagta ka soo galaysay waalidiinta Canbaro aad u badnayd ma aanay doonayn in ay ka go'odo lacagtaas.

Markii uu imtixaanka soo dhowaaday ayaa waxaa dhacday in ay Raxmo ardayada Canbaro u gudbisay intixaan qish ah. Ka dib markii natiijada la shaaciyay waxaa koow ku soo baxday Canbaro. Ardayda fasalka oo yaaban ogaane xidhiidhka ka dhaxeeyo Bare Raxmo iyo Canbaro ayaa arinta u gudbiyay hogaanka dugsiga. Hadda maadama markii arinta laabadhay ay soo baxday, waxaa bare Raxmo loo gudbiyay gudiga anshaxa oo eegaya waxii laga yeeli lahaa arinteeda.

### Layliska 14aad

Indinka oo ku salaynayo sheekada kor ku xusan ka jawaaba su'aalahan.

1. Bare Raxmo fal musuqmaasuq may geysatay mise ma gaysan?
2. Falal musuqmaasuq oo caynkee ah ayeey Raxmo ku kacday?
3. Go'aan caynkee ah ayuu noqon karaa in laga gaadho falkii bare Raxmo?

Musuqmaasuqu waa sheey hoos udhigayo dadaalka maamul wanaaga ee dal; horumarka, dimuqraadiyada iyo guud ahaan dadaalada loogu jiro in lagagabaxo saboolnimada. Musuqmaasuqa waa fal dambiyeed lagu lunsado hantida shacabaka iyada oo lagu soo gabanayo xi lama maamul iyo masuuliyad

### Layliska 15aad

Waxaad ka doodaan su'aalahan soosocdo

1. Waa maxay musuqmaasuq? Astaamaha lagu gartase waa kuwee?
2. Waxyeelo ?

### 2.5.2 Dad Masuuliyad aan qaadi Karin hadii ay tahay wakiilada Bulshadu dooratay ama masuuliyiinta awooda dawlada haa falalka musuqmaasuq ay fulin karaan

- Waa maxay falalka musuqmaasuq ee ay fulin karaan masuuliyiinta qayra masuulka ah?
- Sidee ayay tahay in aan u isticmaalo masuuliyada maamuul ee uu shacabku noo dhiibtay?

Maamulku waa mid lagu helo doorasho, magacaabis siyaasadeed amaba heerka aqoonta shaqsiga. Kuwa shacabka doortay ee maamulka haya waxaa loogu yeedhaa masuuliyiinta shacabka doortay halka kuwa lagu xulay magacabiis siyaasadeed ama heerka aqoontoodane loo yaqaan masuuliyiinta dawlada.

Masuul kastaayi oo maamul haya waxaa looga baahan yahay in uu u hogaansamo shuruucda dalka is lamarkaana si wanaagsan ugu adeego shacabka. Falalka musuqamaasuq ee ay fulin karaan masuuliyiinta awooda haysaa ee qayra masuulka ah waxaa noqon kara:

- Eexda, laaluushka, waxyeelaynta qof aan waxba binin;
- In loo adeegsado kaabayaasha adeega bulshada ama dawlada si shaqsi ahaaneed;
- Ku shaqaynta qabyaalada iyo saaxiibtiinimo ama kooxaysi.

### Layliska 16aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socdo.

1. Waa maxay faraqa u dhaxeeya kuwa shacabka soo doortay iyo masuuliyiinta dawlada?
2. Falalka musuqmaasuq ee ay gaysan karaan wakiilada shacabka iyo masuuliyiinta dawlada intaad Afar ka sheegtaan dabadeedne faah faahiiya

## Gebogabada Cutubka

Dastuurka waa sharciga ugu sareeyo ee dal waxaana si gaar ah ugu xusan arimaha sida dhaqaalaha dalka, siyaasada iyo arimaha bulshada. Dastuurka dawlad deegaanaduna waa sharciga oo gu sareeyo ee deegaanka kaas oo u fududayno deegaanadu in ay dhistaan maamul ay iyagu leeyahiin.

U hogaansanka sharciga, waa shacabka iyo dadynawha oo lagu maamulo sharciga islamarkaana la daryeelo. Ilaalinta sharciga waa marka qof ku xadgubayo sharciga si nidaamka waafaqsan looga difaaco loogana hor istaago.

Haddii wax walba nidaam looyeeli waayo waxaa iman isku dhaxyaac. Sidoo kale haddii maamulka la xadadayn waayane waxaa dhici xadugabyo. Marka waxaa jiro sharciyo iyo nidaam xadidayo awooda maamul ee masuuliyiinta shacabka soo doortay.

Anshaxu waa hanaan ina barayo sidii aan u kala saari lahayn waxa wanaagsan iyo waxa aan haboonayn. Dugsiyada dhaxdooda waxaa jira anshax ay tahay in ardaydu layimaadan.

Sirta saaxiibada waa arin ama balan ka dhaxayso labo ama inka baddan oo saaxiibo ah islamarkaana qorsoodi ah.

Sirta oo la gudbiyaa ma wanaagsana waxaane laga yaaba in ay labada ama dadka saaxiibada ah ku kala tagaan.

Musuq maasuqa waa fal dambiyeed lagu lunsado hantida shacabka ayada oo lagu soo gabanayo xukun ama maamul. Wuxu si xun u waxyeeleeyaa dadaalka loogu jiro horumarka iyo maamul wanaaga.

## Erayada ugu Muhiimsan ee Cutubka

Qof shacabku soo doortay: waa wakiiladl ay bulsho goob ku dhaqan u soo dooratay si uu ilaaliyo xuquuqahooda islamarkaana iyaga ugu adeego

Xadaynta Awooda maamul: waa xadidida awooda maamul ayadoo laga duulayo dastuurka, sharciyo kale ama xeerar.

Musuqmaasuq: waa fal dambiyeed iyo anshax aan waxanaagsanayn kaas oo lagu lunsado hantida shacabka ayadoo lagu soo gabanayo xukun iyo masuuliyad.

## Su'aalaha Gebogabada ee Cutubka 2aad

### I. Uga jawaab su'aalan soo socdo "Run" ama "Been"

1. Dastuuka dawlad deegaaneedku wuxuu suurtagaliyaa sidii loo dhise lahaa nidaamka ismaamul hoosaadka.
2. Qofka muwadinka ah in uu sharciga u hogaansamo mooyaane in uu sahrciga u taagnaado musuuliyad kama saaro.
3. Loo ma baahna in la xadido awooda masuuliyiinta shacabka soodoorto.
4. Waxaa ka iman karto dhibaato haddii labo qof oo saaxiiba ah sirtii ay isku ogayeen baxdo.

### II. Su'aalahan soo socdo ka dooro jawaabta saxda ah

1. Kuwan soosocdo teebaan ahayn astaamaha anshax wanaaga?

B. Ixtiraamida sharciyad dugsiga

T. Ilaalinta nadaafada dugsiga

J. In aan la qaadan hantida ardayda kale

X. jawaab malaha.

2.Kuwan soo socdo ee ku saabsan xadaynta awooda masuuliyiinta shacabka soo doortay tee baa run ku ah?

B. In lagu shaqeeyo wax ka hooseeyo heer kii awooda

T. In lagu shaqeeyo wax ka baxshsan awoodii lagu siiyay

J. In maamulka loo adeegsado si wanaagsan

X. dhamaanba.

3. Tee baan ahayn falalka musuqmaasuq ee masuliyiinta shacabka soo doortay fulin karaan?

B. Eexda iyo laaluush qaadashada

T. Hantida dawlada oo loo adeegsado dano shaqsi

J. Dhowrida sirta

X. ku shaqaynta qabyaalada.

4. Axdiga iyo balanta ay wada galaan labo qof ama inkab adan oo aad iskugu dhow maxaa looyaqaan?

   B. Sirta qoyska — T. Sirta saaxibka

   J. Sirta dalka — X. Sirta shaqsiga

## III. Meelaha banana ku buuxi erayda ama weedha saxda ah

1. Talo wanaagsan oo kaste ee bulshadu soo dhowayso waxaa looyaqaan Anshaxa ________________.
2. Anshaxa suuban wuxuu ka biloowdaa _________________.
3. Si aad sharciga ugu taagnatid waa in aad marka hore adiguba________________ ilaalisid.

## IV. Su'aalahan soo socdo ka bixiya jawaab kooban.

1. Qor labo ka mid ah waxyaabaha loogu baahday dastuur ka dawladeegaanada.
2. Sheeg saddax ka mid ah anshaxa wanaagsan ee ardayga laga sugayo.

CUTUBKA 3

# Sinaanta

Ujeedooyinka Cutubka: kadib marka aad cutubkan dhamaystaan ardayeey waa in aad:

- Fahamtaan xuquuqaha sinaanta ee qowmiyadaha Itoobiya.
- Ogaataan doorka haweenku ku leeyahiin hor umarka dalka
- Fahamtaan xuquuqaha dadka laxaad la ee dugsiga dhexdiisa:

## 3.1 Xuquuqaha Sinaanta

- Tusaale intaad ka bixisaan xuquuqaha sinaanta ee deegaamadiina lagaga dhaqmo kadib soo jeediya.Mid ka mid ah tiirasha aas aaska u ah nidaamka dimuqraadiyada waa sinaanta. Marka dimuqraadiyad dhab ah jirto waxaa lagugartaa xushmaynta xuquuqaha sinaanta. Sinaantu waa hanaan si isku mid ah u daryee layo xuquuqaha qaramada, qowmiyadaha, shucuubta iyo muwaadiniinta. Dastuurtkii 1995 tii ee tiirsiga Milaadiga dhaqangalay ee Jamhuuriyada Fadaraalka Dimuqraadiga Itoobiya( JDFI) ayaa si cad u kala dhig dhigayo qodobka la xidhiidho sinaanta

### Layliska 1aad

ka jawaaba su'aalahan soo socdo:

1. Deegaamadiina, hadda xuquuqaha sinaanta ilaaiyo in intee ah ayaa laga xushmeeyaa?
2. Sheeg saddax ka mid ah xuquuqaha sinaanta ee aad taqaanid?
3. Qodobada 25aad 40aad, iyo kan 41aad ee Dastuurka JDFI arimaha sinaanta la xidhiidho ee ku cad intaad gaar usocdaan ka dooda.

### 3.1.1 Xuquuqaha Sinaanta iyo Sisiman uga wada Faa'iidaysiga Qowmiyadaha, Shucubta iyo Bulshaooyinka

- Sheega ficilada deegaankiina tusmaaynkaro muwaadiniinta oo si siman wax uga wada faa'iidaysanayo.

Marka la leeyahay sinaanta qowmiyadaha, shucubta iyo dadyowga waxaa loo jeeda ayada oo midine midka kale ka badsanin xuquuqdooda si iskumid ah loo daryeelo. Waxyaabaha ina tusinayo si siman uga wada faa'iidaysiga xuquuqaha sinaanta ee qowmiyadaha waxaa ka mid ah in midba midka kale xuquuqdiisa aasaaska ah iyo dimuqraadiyaded qadariyo, si iskumid ahne uga wada faa'iidaystaan khayraadka dalka.

Nidaamka dimuqraadigs ah ee hadda ka hana qaaday dalkeena waa mid xaqiijinayo daryeelida xuquuqaha sinaanta ee qowmiyadaha dalka dhamaantood

## Layliska 2aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socda :

1. Sheega astaamo muujinayo xaqiijinta xuquuqaha sinaanta iyo si siman ugu wada faa'iidaysiga ee qowmiyadaha iyo shucuubta Itoobiya.
2. Shaxdan soo socoto intaad ku qortaan buugaagtiina ka dibna kala saara waxa deegaankiina laga dhisay iyo waxa aan laga dhisan. Istiimaala calaamada (✓) si aad u tilmaamtaan.

| Kaabayaasha horumarka | Waxii la dhisay | Waxii anan la dhisisn |
|---|---|---|
| Jid (wado) | | |
| Xarun aafimaad (kiliinik) | | |
| Adeeg biyo | | |
| Dugsi | | |
| | | |

### 3.1.2 Bulshooyinka Goob kali ah ku wada nool xarumaha ay si siman uga wada Faa'iidaystaan

- Bulshooyinka deegaankiina ku dhaqani xarumaha ay sisiman oga wada faa'iidaystaan qora.



Jaantuska 3.1 Dugsiyda Waa xarun aanu ka wada faa'iidaysano

- Sheega dhiibatada aad isleedahiin wayi man haddii aynan xarumahan Jirin.


Nidaamyadii horay uga dhisnaa dalka ma aanay ahayn kuwa suura galinayo in qowmiyadaha iyo shucuubta dalka kunool si siman uga wada Faa'iidaystaan kaabayaasha horumarka. Laakiinse manta nidaamka maamul ee ku dhisan dimuqraadiyada ayaa ka duwan kii hore.

### Qowmiyada Soomalida Ee Dawlada Deegaanka Soomalida Itobiya

Dawlada deegaanka Soomaalida waa mid ka mid ah Sagaalaka deegaan ee dalka aas aastay nidaamka Fadaaraaliga ah. Waa deeg aan ay dadkiisa yahiin qowmiyada Soomalida una badan dhaqashada xoolaha iyo qaybo beeralay ah. Sanado ka hor dad baddan ma aanay aqoonba xataa halka ay qowmiyada Soomaalida ka dagto Itoobiya. Ma muuqan dhaqanka astaanta iyo magaca dadka Soomaaliyeed, deegaanku malahayn xarumo hor

umarineed marka laga reebo waxyar aanan la shaeegibakarin. Run ahaantii dadka Soomaaliyeed kuma aanay lahayn dalka xuquuqda ay la hayeen qowmiyadaha kale qaar kood.

Hadda xiligan  la jooga qowmiyada Soomaalida waxay leedahay deegaan ugaar ah; waxaay isku maamushaa Afkeeda hooyo; wax ku barataa, ku dhaqanaa diinteeda waxaana maamulo dad ayaga ka dhashay oo Soomaali ah.




Jaantuska 3.2 Dawlada Deegaanka Soomalida Itoobiya

## Layliska 3aad

1. Waxaad sheekada ka soo saartaan xarumaha dadka Soomaaliyeed kawada faaiidaystaan.
2. Sidee bay bulhsooyinka xarumaha si wada jir ah uga faa'iidaysan karaan?
3. Intee ayaa xarumaha horumarka ee agagarahiina uga faa'iidaysan karto si siman

### 3.1.3 Xuquuqaha sinaanta iyo si siman uga wada faa'iidaysiga oo la daryeelo muhiimada ay leedahay

- Deegaanka aad ku nooshahay xarumaha horumarka ee dawlada iyo shacabka ilaa heer intee dhan ayeey hirgaliyaan xuquuqda si siman uga wada faa'iidaysiga?

Marka aynu leenahay xuquuqaha si siman uga wada faa'iidaysiga waxaan ujeednaa dhaqdhaqaaqyada horumarineed ee ka socdo dalka natiijada ka soo baxdo wax cadaynahayo in si siman looga wada faa'iidaysto. Sida dhamaanba qowmiyadaha, shucuubta dalka ay masuuliyad uga saarantahay ka qaybqaadashada waxkasto oo horumar ah ayay dhinaca kalane xaq u leeyahiin in ay midhaha horumar walba kawada faa'iidaystaan.

Haddii sinaantaasi aynan jirin,waxaa laga yaaba in ay dadku u ku kucaan qalalaaso ayaga oo u halgamayo sidii sinaanshaha loo heli lahaa. Tanine waxay horseedi sharci oo luma iyo kala dambayn la aan. Sidaasdaraadeed, waxaa loo baahanyahay si wadanoolaanshaha iyo midnimada dadka loo ilaaliyo la xaqiiyo jiritaanka sinaanshaha guud ahaanba

## Layliska 4aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socdo:

1. Waa maxay xuquuqda si siman uga wada faa'iidaysiga?
2. Dhibaatooyin caynkee ah ayaa ka dhalankaro nidaamka aanay ka jirin xuquuqda si siman ugawada faa'iidaysiga muwadiniinta?

## 3.2 Astaamaha lagugarto Sinaanta

- Qor sadaax ka mid ah astaamaha muujinkaro sinaanshaha ee deegaan kiina?.
- IFahfahi faa'iidada ka dhalan karto xushmaynta sinaanta muwadiniinta?

Qaramada, qowmiyadaha iyo shucuubta waxay u simanyahiin ka faa'iidaysiga xuquuqaha iyo gudashada waajibaadka saran. Waxaa la ogsoonyahay in qowmiyada iyo shucuubta ku dhaqan Itoobiya ay ku kala duwanyahiin dhinacyada sida Diimaha, luuqadaha amase dhaqamada. Hase ahaata arintan wax samayn ah ku ma laha daryeelida xuquuqaha aadaminimo iyo kuwa dimuqraadiyadeed ee qowmiyadaha. Muwaadin walba haddii uuu ku dhasho meel walba oo ka tirsan dalka waxaa uu leeyahay xuquuq aan ka hooseynin kana sarayn muwadiniinta kale.

### 3.2.1 Cadaymaha Sinaanta Ee Qaramada, Qowmiyadaha iyo Shucuubta Itoobiya

- Qodobka hoos ku qoran ee laga soo xigtay dastuurka intaad si taxdar ku dheehantahay u akhridaan sheega waxa aad ka fahanteen.

"Qowmiyad iyo shucub kasta oo ku dhaqan Itoobiya waxay xaq u leedahay in ay ku hadasho, wax ku barato horumariso luuqadeeda, muujiso dhaqan keeda korna uqaado islamarkaana xafido taariikhdeeda iyo hidaheeda; DJDF, Qodobka 39/2."

#### B. Sinaanta Luuqaadaha

- Waa maxay sinaanta luuqadaho?

Dhamaanba dadka reer Itoobiya wey siman yahiin. Waxayne doonayaan in luuqadahooda si siman uga wada faa'iidaystaan. Arintanina waxaaba si cad u qeexay dastuurka JDFI qodobka 39aad.

Qaramada, Qowmiyadaha iyo shucubta waxay xaq uleeyahiin in ay adeegsadaan luuqadahooda. Tani waxaa ka mid ah ku hadalka, isku maamuliida, waxkubarashada iyo kor uqaadida luuqadahooda.

#### T. Sinaanta Jinsiga

- Ma aa misantihiin in ay tahay in la xushmeeyo xuquuqda sinaantaee ee Lab & Dhadig?

Inkasta oo bini aadamku dabici ahaanba kusoo dhashaan lab ama dhadig, haddane waxaa loo baahanyahay in xuquuqahooda la dhowro. Dumarku ma eha ah in ay xuquuqahooda ku waydo dumar nimadeeda, raguna ay sidoo kale ku waayayaan raganimadooda.

Sinaanshaha Jinsiga waa sinaanta labka iyo dhadiga. Markaas rag iyo dumarku ayaga oon loo egayn jinsigooda ayey siman yahiin una simaynahiin xuquuqaha.

Looma baahno in aan dumarka ula dhaqaoi sidii taariikh ahaan sor jirijirtay ee ahayd in ay raga ka hooseeyaan. Dumarka dabiici ahaanba garaadkooda, kartooda iyo caqligooda kama liitaan raga

## Layliska 5aad

Waxaad ka doodaan su'aalahan soo socdo :

1. Maxaa hoos imanayo xuquuqda adeegsiga luuqadaha?
2. Maxaad umalaynaysaan haddii dumarka ka qaybqaadan waayaan in aan la gaadhikarin horumar buuxa??

### 3.2.2 Kaalinta ka qaybgalka dumarka ay ku leedahay horumarka dalka.

- Qeexa haddii ay Rag iyo Dumarka ay noqoto in ay si isku mid ah loogaqaybaliyo arimaha horumarka dalka faa'iidada ka dhalankarto?

"Xaalada waxbarashada Dumarka dawlad-deegaaneedka Soomaalida"

Deegaankeena Soomaalida Haweenka ku dhaqan sida dalka intiisa badanba ma aanay heli jirin fursad wax barasho. Sanado badan oo la soo dhaafay ayay ahaayeen kuwo laga faquuqo wiilasha laana diido xuquuqdoodii wax barasho. Xaaladahaas waxay ku iman jiraan siyaabo kala duwan ha ahaato aqoon yari, aragtida bulshada ama arin kalaba.

Waayahan dambe aad ayaay xaaladaan is ku badashay oo waxaa jira in tirade Dumarka ee ku soo biirayso goobaha waxbarashada ay aad usoo kor dhayso. Gaar ahaan dugsiyada hoose gobo lada qaar kood Gabdhaha ayaaba ka baddan Wiilasha, halka dugsiyada dhexe/sarane ay aad usoo kor dhayso tirada Hablaha.



Jaantuska 3.3 Dumar Soomaaliyeed

## Layliska 6aad

Ka jawaaba su'aalahan soosocdo:

1. Shee kada maxaad ka fahanteeny.
2. Haweenka ku dhaqan deegaankiine hawlbaha horumarineed ee ay ku haw lany ahiin haddii ay jireen saaxiibadiin isoo bandhiga.
3. Waxaad buugaatiina ku qortaan faa'iidada ugugjirta dhisida dalka marka laxaqiijiyo sinaanta dumarka. Ka dibne kawada hadla ardayda fadhida dhinacaada.

Sanadahii ugadambeeyaan dalkeena horumarka ka socda dumarka kaalin muhiim ah ayeey ku leeyahiin. Tusaale ahaan dhinaca waxbarashada ka qaybgalka dumar ka ee wax barashada kor ayeey usii ka caysaa

## 3.3 Xuquuqaha dadka Naafada ah



Sawir 3.4 Naafadu sida muwaadiniinta kale ayay wax soo Saar leyihiin.

- Usheega saaxiibadaiin wax aad sawirada ka fahanteen.

### "Xalimo iyo Xaawo"

Xaaliimo iyo Xaawo ilaa yaraantooda waxay ahaan kuwa laxaad la, markii ay haleeshay cudurka Dabaysha. Markaas, waxa kolba meel ay ku gaadhan waa Baaskiila Cagoo layaasha. Sanadkan, Xaliimo waxay dhigataa fasalka 7aad Xaawane 8aad. Dugsiga ay wax ka bartaan hadda wuxuu yeeshay dhismayaal cusub oo ah dabaqyo kuwii horane wuu badalay.

Dhinaca hoosa ee dhismaha dabaqa waxaa wax ku barto ardayda fasalada 1aad – 4aad. Ardayda 5aad – 6aad na qaybta labaad ee dabaqa, Ardayda fasalada 7aad – 8aad dhigatane waxay galeen dabaqa 3aad sadaxaad. Laakiin Xaaliimo iyo Xaawo makaraan in ay dabaqa sadexaad fuulaan ay fasalka galaan maadaama lagu riixo biraha curyaamiinta. Waxay ugudbiyeen maamulka dugsiga cabasho iyo codsi in ayaga fasalo ay wax ku baran karaan loo badalo. Dugsigii laakiin wuxuu oogu jawaabay in aanusan arintaas awoodin waxbane u qaban Karin. Maadama aynan su'aashoodii jawaab u helin agagaarkane ka jirin dugsiyokale u dhaow. Xaalimo iyo Xawo waxay ku khasbanaadeen in ay waxbarashadoodii ka tagaan.

### Layliska 7aad

Inta aad shee kada kor ku xusan kus alaysaan ka jawaab su'aalahan soosocda:

1. Ma isleedahiin maamulka dugsiga jawaabtii uu siiyay Xaalimo iyo Xawo way saxsanayd? Sabab?
2. Maxay ahayd in uu dugsigu sameeyo?
3. Ma garanaysaan arday laxaadka la oo deegaankiinaah oy la soo daristay arintan oo kale? Dhibaatadoodase maxay ahayd? Mustaqbalka bulshada maxay idinka idinka sugaysaa?

Laxaad la aantu waa xaalad lasoo darsi karto qof walb waxayna ku timaada si dabiici ah ama mid aan ahayn. Laxaad la aantu waa arin dhalisa in aadan hawlaha sidii qof caafimaadqabo oo kale u qabsan karin. Arimaha dhaliya laxaad la aanta ee dabiiciga ah waxaa ka mid ah cudurka dabeeysha. Kuwa aan dabiiciga ahayna waxaa ka mid ah adeega caafimaadka oo liito, nadaafad daro, shil, isku dhacyada iyo colaadaha. Dalkeena waxaa ku nool kumanaan kun qof oo laxaad la.

Muwaadiniinta laxaadka la waxay xaq u leeyahiin in ay helaan daryeel iyo wali xanaanayn gaar ah.

Tusaala ahaan, in loo fududeeyo, waxbarashada

sida fasalo ugaar ah, qalab ugaar ah, in loo muujiyo jacayl iyo daryeel. Ardayda muwaadiniinta ah waxaa looga baahanyahay in ay garab siiyaan waalahooda laxaadka la ee la nool

### Layliska 8aad

Waxaad ka doodaan su'aalahan soosocdo:

1. Intaad akhridaan dastuurka JDFI qodobkiisa 41/5 ka dooda bal waxa ay tahay in ay dawladu u qabato dadka la xaadka la.
2. Waa maxay taageerada heer dugsi ee loo fidin karo dadka laxaadka la ee wax ka barto?

## 3.4. Baahida loo qabo In la Ixtiraamo Sinaanshaha Diimaha

- Qora baahid loo qabo in la xushmeeyo sinaanta diinta?

Dhamaanba diimaha ka jiro dalkeena waa kuwo sinaanshahooda lagu xaqiiiyay dastuurka. Waxyabaha sidaas ina tusinayane wax aa ka mid ah qof walba ha ahaato si gaar ah ama si wadajira uu xaq u leeyahay in uu doorto diinta uu doono, ku dhaqmo, faafiyo islamar kaane horumariyo. Marka aynu leenaahay sidaas hase yeeshe looma jeedo in qof qof kale ama koox kale diintiisa uu wax ka sheego ama hoos u dhigo. Waxaa muhiim ah in lagu wada nool laado jacayl isqadarin iyo wada noolaansho.

Dalkeena waa mid dhamaanba qowmiyadaha iyo shucuubta ku dhaqan si rabitaan kooda ah u wada noolyhiin ayaga oo midaysan kana midaysan daryee lida danaha guud ee dalka. Si uu u siixoogaysto nidaamka dimuqraadiga ahi waxy aabaha aas aask u ah waxaa ka mid ah xaqiijinta xoriyada diimaha ee dadka kale duwan

### Layliska 9aad

Waxaad ka doodaan su'aalahan soo socda

1. Faa'iidooyin caynkee ah ayay usoo hoyin kartaa dal haddii la qadariyo sinaanta diimaha?
2. Maxaa laga sugayaa muwaadin walba si loo qadariyo sinaanta diimaha?

ama goobaha kalaba, dadka laxaadka la in gacan la siiyo waxay muhiim u tahay horumarka dadka.

## Gebogabada Cutubka

In la qadariyo sinaanta qaramada, qowmiyadaha iyo shucuubta ku dhaqan dalkeena waxay kaalin wayn ku leedahay horumarka. Hadda nidaamka dimuqraadiga ah een ku dhaqano in ay muwaadiniintu simanyahiin waxaa cadayn u ah sisiman uga wada faa'iidaysiga nidaamka.

Aastaamaha sinaanta muujinayo ee dalkeena awaxaa ka mid ah in qowmiyadaha, iyo shucubta Itoobiya ay dhamaantood xaq u leeyahiin in ay horumariyaan kuna dhaqmaan luuqadahooda, diimahooda iyo dhaqamadooda.

Nidaamka dimuqraadiga ah in kasta oy lab iyo dhadig dabiici ahaan kala duwanyahiin, hadane waxay xuquuq siman u leeyahiin ka wada faa'iidaysiga arimaha siyaasada, dhaqaalaha iyo buslhada.

Laxaad la aanta waa xaalad ku timaado si dabiic ah ama aan ahayn. Dalkeena tageerada loo fidinjiray dadka la xaadka la aad ayay u hoosaysay. Laakiinse hadda iyo waxii ka dambeeya dugsiyada hanoqoto

### Erayada Muhiimka ah ee Cutubkas

- Sinaansho: wa marka si iskumid ah dadku oga wada faa'iidaystaan xuquuqaha ugana soo baxaan masuuliyada saaran.
-Qowmiyad: Qaramo, waa shacab leh dabeecad isku mid ah; dhaqan ama aragti isku mid ah; luuqad ay isku fahmaan oo u gaar ah; islamarkaana ku nool dhul dabeecadiisu isku midtahay.
JDFI: Jamhuur iyada Dimuqraadiga Fadaraalka Itoobiya.

## Su'aalaha Gebogabada ee Cutubka 3aad

Su'aalahan soo socda intaad ku qor taan buugaagtiin a ka shaqeeya

I. Uga jawaaba su'aalahan soo socda "Run" ama "Been"

1. Dasturka dhaqangalay sanadkii 1995 ee JDFI, xuquuqda sinaanshaha ee qaramada, qowmiyadaha iyo shucuubta reer Itoobiyaa wax mudnaan ah masiinayo.
2. Hawlaha horumarineed ee ka socdo deegaankiina waxaa kali ah oo masuul ka ah dawlada qudha.
3. Waxay mahiim u tahay horumarka dalkeena in sinaanta dadyowga lagu qeexo dastuurka.
4. In muhiimad iyo daryeelad gaar ah la siiyo xuquuqaha sinaanta ee Haweenka iyo dadka laxaadka la waxay curyaaminaysaa horumarka dalka.

II. Erayda, weedhaha hoos yaaala xarafka "B" ugu soo ooro kuwa xarafka "

| B | T |
|---|---|
| 1. Jiritaan la'aanta sisiman uga faa'iidaysiga | B. Sinaanta lab iyo dhadiga |
| 2. Sinaata Jinsiga | T. Waxa qof hiigsanayo |
| 3. Laxaad la aanta | J. Xaalad ku timaado si dabiici ah iyo si kalaba |
| 4. Himilo | X. wax carqalad ku noqon kara horumarka |

III. su'aalahan soosocdo ka dooro jawaabta saxda ah

1. Mid ka mid ah xuquuqaha sinaanta ee dalkeena waa
   - B. Sinaanta qaramada, qowmiyada iyo shucubta
   - T. Sinaanta jinsiga
   - J. Sinaanta luuqadaha, diimaha iyo dhaqamada
   - X. dhamaanba
2. Midee baa ka turjumayso dumarka?
   - B. wax faa'iida ah ma laha in horumarka ka qaybgalka dumarka la'aantood
   - T. Deegaanada soo korayo ee dalka tirade gabdaha ardayda ah ayaa ka badan tan wiilasha
   - J. Nidaamyadii hore mudnaanta dumarka la siinjiray aad ayay u saraysay.
   - X. Midnaba

3. Waxyaabaha sababa laxaad laanta waxaa weeyaan
   B. Cudur T. Cuno yari
   J. isku dhacyada iyo colaadaha X. dhamaanba
4. Ku wan soo socdo midee ayaa si dhab ah ugu turjumayso luuqadaha?
   B. Luuqadbo luuqada kale weey ka sarayso
   T Dhamaan luuqadaha isfahanka in loo adeegsado weey usi simanyahaiin
   J. Haddii sinaanta luuqadaha laqadarin waayo wax dhibaata ah kama dhalanayso
5. Faa'iido caynkee ah ayaa ka dhalan marka sinaanta qowmiyadaha iyo shucuubta dalka laqadariyo?
   B. Waxay awood uyeelan in ay luuqa ahooda,dhaqamadooda iyo diima hooda kor u qoodaan.
   T. Waxaa dhalan jawi suurta galinayo sidii loga bixi lahaa dib udhaca.
   J. Waxaa dhalan in si cadaalad ah looga wada faa'idaysto khayraadkadalka nabadne lagu wada noolaado
   X. Dhamaanba

## IV. Maeelahan baanan ku buuxi erayada ama weedhaha ku haboon.

1. Waxaan lahayn luuqada, dhaqan iyo diin _______________ ma laha.
2. Fikradaha dib udhaca ah ee Itoobiya badanaa waxa ay soo gaadhaan __________ weeyaan.
3. Qowmiyad, iyo shucuub walba oo Itoobiya ku dhaqan waxay __________ u leedahay in ay ku dhaqanto, kor usoo qaado luuqadeeda, dhaqankeeda iyo diinteedaba.

## V. Su'aalahan soo socda jawaab kooban ka bixi

1. Qeexa faa'iidad ay leedahay qadarinta iyo xaqiijinta xuquuqda sisiman uga wada faai'iidaysiga qaramada, qowmiyadaha iyo shucuubta Itoobiya
2. Qora daryeelka iyo tageerada loo fidinkaro dadka laxaadka la iyo dumarka ee heer dugsi.

CUTUBKA 4

# Cadaalada

Ujeedooyinka guud ee Cutubka: kadib marka aad cutubkan dhamaysataan ardayeey waxaad:

- Fahmidoondoontaan falalka cadaalad darada ah ee laga fulo meela kale duwan.
- Ogaandoontaan muhiimada ay leeyahiin xarumaha bixiya adeega blushada ee deegaankiina.
- Garowsanidoontaan in xarumaha adeega bulshada fidiya loo baahanyahya in ay ka dhowrsanaadaan falalka cadaalada darada.

## 4.1 Falalka Cadaalada darada

### 4.1.1 Falalka cadaalad darada ah ee deegaandaiina laga fuliyo

- Waa maxay cadaalad daro? Ficilada hoos ku xusan inta aad u kala qaadaan cadaalad daro iyo cadaalad kadibna sabata sheeka.

1. Baraha wuxuu u hagaajiyaa dhibcaha imtxaanka ardayda uu is leeyahay way aqoon wanaagsanyahiin.
2. Dhakhtarku cusbitaalka uu ka shaqeeyo wuxuu marka hore daweeyay caruurtiisa.
3. Dadkii safafka ugu jiray in ay qaataan waraaqaha aqoonsiga waxaaa mudnaanta marka hore la siiyay kuwii da'ada ahaa.
4. Dadkii dambiga isku midka ah uxidhnaa ee uu sahrciga xukeemay ay uu garsoorahii kii jaarkiisa ahaa si daaya.
5. Cabdi waxaa loo ogolaaday in uu kubad cayaaro Marymane in ay xaaqada nadiifiso Xaafada oo kali ah.

### Nelson Mandela( Qaybta 1aad)

Mid ka mid ah shaqsiyaad dunida manta magaca ku leh waaa Nelson Mandeela. Nelson Mandelaa wuxuu qol yar oo cadhiidhi ah ku dhax xidhinaa 27 sano. Oma uusan xidhnay dambe uu galay ee waxaa loo xidhay in uu ka soo horjeeday falalkii cadaalad darada ahaa ee ka jiray dalka konfur Afrika.

Xiligaas dalka kuunfur Afrika waxaa ka jiray nidaam la odhanjiray midab takoorka. Waxaane xukumijiray dad Cadaan ah.



Jaantuska 4.1 Nelsoon Mandeela

# Cadaalada

Dadkii cadaanka ahaa ee xukumi jiray dalka koonfur Afrika waxay dadka madoowga ah ee dhulka daganaa ku hayeen cadaadis. Looma ogalayn in ay ganacsdadaan; beerahoodi iyo guryahooda ayaa laga qaaday lana siinjiray dadka cadaanka ah.

Sharciga dawlada wuxuu dhigayay in dadka madoow ka qaybgali Karin xukunka. Tacadiyadan iyo xadgudubyadan joogtada ah qofkii ka soo horjeedsado wuxuu mudan jiray xabsi iyo dil. Mandeelane wuxuu xabsiga ugu jiray mudada dheer waxay ahayd xaaladan oo kale. Wuxuu dadka ku baraa rujiyay in ay kaso horjeedsadaan nidaamka. Kadib 27 Sano oo xabsi ah, Mandeela waa la soo daayay doorashooyinkii dhacayne wuxuu noqday madax way nahii ugu horeeyay ee madoowga ahaa dalka koonfur Afrika.

## Layliska 1aad

Idinka oo ku salaynayo sheekada ka jawaaba su'aalahan soo socdo.

1. Sida kuxusan sheekada ,noocyadii cadaalad darada ahaa ee koonfur Afrika ka jiray qora.
2. Talaabadii uu qaatay Nelson Mandeela ma ku saxsanaa, mise kuma saxsanayn? Sidee?
3. Maxaad ka barankartaan talaabada Mandela?
4. Mandella ka dib markii uu noqday hogaamiyaha dalka falal cadaalad daro oo caynkee ah ayaad isleedahiin in uu ku dhaqaaqo ayay ahayd?

Falaka cadaalad darada ah waa lidka ama kuwa ka soo horjeeda ficilada cadaalada ah. Falalka cadaalad darada ah waxay ku iman Karaan qayb kasta oo ka mid ah xaalad noolal maal meedka. Ficilada cadaalad darada goobo kaladuwan ay ka dhicikaraan sida; dugsiyada; Goobaha cayaaraha, xaafadaha, Tuulooyinka, xarumaha cadaalada bixiya iwm. Falalaka kala gadisan ee cadaalad darada ah lagana fuliyo goobaha kala duwan sababaha keeno waxay noqon karaan ku wa kala duwan.

Falalka cadaalada darada dadka looma eego sisiman islamarkaane waxaa jira dhaqan nin jaclaysi, oo inta baddan lagu soo gabado masuuliyad. Waxay dadku mararka qaar ugu kacaan cadaalad darada ayaga oo ka duulayo qowmiyada, qabiil, diin, saaxiib iwm.

Ficilada cadaalad darada waxay noqon karaan kuwo salka kuhayo dhaqamo soo jireen ah sida gudniinka gabdhaha, iyo in qaybaha dumarka gaar ahaan gabdhaha yaryar qabtaan hawlaha guriga.

## Layliska 2aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socda

1. Talaabooyin caynkee ah ayaa haboon in laqaado si looga hortago falalka cadaalad darada ah?
2. Qora falalka aad leedahaiin waa cadaald daro kana dhaca deegaan kiina.
3. Ayaa gaysta falalka cadaalad darada ah? Mid walba ka bixi saddax tusaale.

# Cadaalada

- Deegaankiina dugsiga aad leedahin waa kan ugu wanaagsan kuwa kale waa kee ? Muxuuse ku mutaystay in uu noqdo?
- Xarumaha kale ee deegaankiina bixiya adeega bulshada kuwooda aad is leedahiin adeeg fiican ayay bixiyaan intaad sheegtaan hawlahi iay qabtaan qora.

Xarumaha bulshada ayaga oon eegayn qaybaha dadka waxaa saran masuuliyad in ay sisiman ugu adeegaan. Xarumaha si ay u bixiyaan adeeg hufan waxaa loo baahanyahay in ay buuxiyaan labo shuruud. Waa mida hore ee in ay ku dheehantay cadaalad; marka labaadne in uu leeyahay karti iyo tayo adeeg bixin. In ay ayaga oon kala qaadan goobaha dhamaanba uga adeegaan si siman ,in ay leeyahiin shaqaale leh xirafd iyo anshax ku filan oy ku gutaan shaqooda.

## Shaqo kooxeed

Intaad saaxiibadiin iskaashataan ood eegtaan adeega Xarumaha deegaankiina bixiiyaan kadibne ku salaysaan shuruudahan hoos ku qoran ka shaqeeya su'aalaha.

1. Xaruuntee ayaa uga wanaagsan ku wa kale?

   B. Dhowrida saacadaha shaqada ______

   T. Jiritaanka xirfalayaal ku filan _______

   J. jiritaanka qalab ku filan ___________
2. Guud ahaan natiijada marka la eego, xaruuntee ayaa kuwa kale kaga wanaagsan dhinaca cadaalada iyo kartida tayada?
3. Waxaad qeexdaan xarumaha adeega ee deegaan kiina heerka tayada iyo cadaaladnimadooda?

| T | Xarumaha oo faaf faahsan | | Dhowrida saacadahaa shaqada | | Jiritaanka xirafadlayaal ku filan | | Cadaalad daro | | Jiritaanka qalab ku finlan | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 1 | Xafiis | Xaafa | Fiican | Liita | Fiican | Liita | Fiican | Liita | Fiican | Liita |
| 2 | Dugsi | | | | | | | | | |
| 3 | Xarun caafimaad | | | | | | | | | |
| 4 | Xarunta beeraha | | | | | | | | | |

## 4.2 Waxyaabaha Sababa Ku Xadgudabka Xuquuqaha iyo Cadaalad darada

- Maxay dadku ugu dhaqmaan ficilida ku xadgudbi karo kuwa kale xuquuqahooda? Faahfaahiya waxyaalaha aad leedahiin waxay horseedan in xuquuqaha lagu xadgudbo.

### "Mudane Caydiid, duqi Magaalada"

Mudane Caydid waa duqa magaalo yar. Wuxuu Caydid gacan wanaagsan ka gaystaa hol fududeenta horumarka magaalada. Dadka maalagashiga doonayo wuxuu u fududeeyaa shariciyada wuxuuna u fasaxaa dhul ay maalgashadaan. Sharicyada waxaa bixiya Gudi uu mudane Caydiid gudoon ka yahay. Marka ay gudidu daraasad samayso waxaa go'aanka gaadha caydid.

Laakiinse mar waxaa dhacday in uu Caydiid siiyay fasaxadhul gabadh ay wada noolayaan walaalkiis oo iska dhigayso In ay tahay maal gashada. Sidaas wuxuu sameeyay gudigii oon ogayn. Dadkii dagana dhulka mudo dheer waxaa lagu amray in ay ka dal dashaan alaabadooda.

Inkasta oy dadkii cabasho ugudbiyaan gudiga iyo mudaneCcaydiidba ma aanay helin fursad ay kula kulmaan. Marka ay tagaanba waxaa loogu Jawaaba weey kala maqanyahiin gudidii.

Markii ay mudo soo noqnoqon hayaan ayayba arinta kasii xumaatay oo Caydiid ayaa ku amray in ay 10 casho kaga baxaan dhulka iyo guryaha maadaama la horumarinayo. Dadkii oo quustay ayaa yidhi wax aan tari karo malaha waa in aan iska sugnaa bal waxa xiga ee imandoono.

### Layliska 3aad

Idinka oo ku salaynayo sheekada ka jawaaba su'aalaha.

1. Ma isleedahiin cadaalad laan ayaa la sameeyay? Sheega arimaha aad is leedahiin waa cadaalad daro ee lagu kacay?
2. Haddii guryaha lasiiyay malgashayaasha aad idinka lahaan la haydeen, maxaad idinka iyo qoysaskiinu samayn lahaydeen?
3. Ma leedahiin aamusnaantii gudiga weey saxsanaayd?
4. Xaaladani cida maamulka si aan haboonayn u adeegsatay waayo? Cida aan ka faa'iiday sanse waa ku weeye?

Guud ahaan waxyaaba horseedo ku xad gudabka xuquuqaha iyo cadaalada darada waxaa ka mid ah:

***B. Marka horaba xuquuqaha muwaadiniinta oon la daryeelin:*** muwadiniintu waxay leeyahiin xuquuqo sida in ay xoriyad ku noolaadaan; in ay wax bartaan; in ay ka mid noqdaan xisbiga ay doonaan iyo kuwa kale. Marka haddii la dhowri waayo xuquuqaha waxaa imman cadaalad daro

***T. Awooda maamul ee shacabka iyo dawlada:*** haddii masuuliyada lagugu amaanaysday aad u isticmaashid in aad kuwa kale ku wax yeelaysid.

***J. Muwaadiniinta oon sisiman loogu adeegin:*** marka labo muwaadin isku maan dhaafaan arin ama marka adeeg lafulinayo oo labo qof mid si gaar ah gacan loo siiyo.

## Layliska 4aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socda

1. Ficilada xad gudubyada xuquuqaha iyo cadaalad darada ayaa gaysto?
2. Waxyaabaha ka dhaca deegaanadiina ama aad ka aragteen Tilifishinka ama adeecadaha ka maqasheen eed leedahiin waa cadaalad daro faah faahiya.
3. Maqaadateen odhaahda dhahayso "xuquuqdaada si loo dhowro, dhowr xuquuqaha kauwa kale?" sabab?
4. Qora cida aad isleedahiin waa in ay dhowraan xuquuqaha islamarkaane ka shaqeeyaan sidii loo dhowri lahaa.

## 4.3 Arimaha Aasaaska u noqon kara jiritaanka cadaalada

- Dugsiigiina iyo fasalad aad wax ku baratan waxyaabaha aas aaska unoqonkaro in cadaalada ka dhaqangasho qora.
- Maxay tahay in uu ku dhaqaaqo qofka cadaalad darada lagusameeyo ama xuquuqdiisa lagu xadgudbio?

Nelson Mandelaa (Qybtii 2aad)

Kadib markii xabsiga laga siiday Mandeela uuna noqday madaxwaynahii ugu horeeyay ee madoowga ahaa dalka Konfur Afrika wuxuu qaaday talaabooyin lagu sugayo cadaalada in ay hirgasho. Waxaana ka mid ahaa

- In la qaado dhamaan sharciyadii ku salaysnaa cadaalad darada.
- In ay dhamaan muwaadiniinta Koonfur Afrika leeyahiin xuquuq isku mid ah.
- Cadaankii iyo madoowgii ayaa bilaabay in ay hal dugsi wax kuwada bartaan, hal xarun caafimaad lagu wada daweeyo.
- Goobahii cayaaraha iyo dalxiiska ayaa bilaabay in si siman ugu adeegaan dhamaan dadka.
- Dadkii madoobaa ayaa bilaabay in ay ka shaqeeyaan xafiisyada dawlada.

Guud ahaan, nacaybkii dadka madoow iyo kuwa cadaanka ah sanadaha baddan ka dhaxjiray ayaa yaraaday. Mandella halgankii dheera iyo dhibkii uu us oomary in cadaalad hanaqaado ayaa wuxuu dunida kaga noqday mid magac iyo sharaf ku dayasho leh mudan.

## Layliska 5aad

1. Idinka oo ku salaynayo sheekada,qora Itlaabooyinkii la qaaday si cadaalad u hanaqaado.
2. Si dal cadaalada ugu dhaqan gasho, maxaa loo baahanyahay in la sameeyo?
3. Intaad ku salaysaan sheekada faahfaahiya faa'iidada cadaalada leeedahay?
4. Qodobadan soo socdo kaalinta ay ku leeyahiin taabagalka cadaalada qora.

- Anshaxa
- Dimuqraadiyada
- Sarayntasharicga
- Sinaanta

Waxyaabaha aas aaska u noqon kara in cadaalada taabagasho waxaa ka mid ah

B. In xarumaha cadaalada fuliya sida maxkamadaha, booliska iwm ay aas aasan yahiin is la markaana adeeg hufan bixiyaan.

T. In hanaanka ku shaqaynta cadaalada iyo sinaanta la dhaqan galiyo:

J. In muwaadiniinta ay ka faa'iidaystaan islamarkaane adeegsadaan xuquuqdooda ah in ay cadaalad helaan.

## Layliska 6aad

Ka jawaaba su'aalaha soo socda

1. Idinka amaba hanoqdaan saaxiibadiin falal cadaalad daro ee idin soo gaadhay intaad sheegtaan soo bandhiga dadaalkii aad u gasheen in aad cadaalad heshaan.
2. Faahfaahiya doorka dugsigadu ku leeyahiin sugida cadaalada?



Jaantuska 4.2 Bixinta Canshuurta Waa Waajibaad-ka Muwaadinimo

3. Xagee bay Dawladu Ka keenaa Adeega ay bixiso dakhliga ay ku fuliso?

## 4.4. Canshuurta

### 4.4.1 Goorma iyo side ayay canshuurtu ku bilaabantay?

- Si dawladu u daboosho adeegyada dadka uga baahanyahiin xageed ayaad u malaynaysaan in ay ka keento dhaqaalaha ay ku fuliso.

**"Sida taariikh ahaan canshuurta ku timid" (Qaybta 1aad) sheeko**

Taariikhda canshuurtu waxay la soo bilaabantay dhalashada nidaamka dawladnimo. Dawladahii Qarnayadii hore curtay waxay ku dhisanaayaan dakhliyadii laga soo uruurin jiray canshuurta. Tusaale ahaan, dawladahiii hore ee Ilbaxnimadii Giriiga iyo Masaarlda waxay ku dhisnaayeen canshuurtii ay ka soo uruurin jireen shacabkii ay xukumi jireen.

Dalkeenana qarniyadii hore dawladahii iyo nidaamkii maamul ee jiray waxay ku tiirsanaayeen dakhliyadii ay ka soo uruur in jireen shacabkii ay xukumeen hanti ahaan ama lacag. Laakiinse markii ay soo baxday sharci ku saabsan bixinta canshuurta waxay ahead xiligii uu xukunka hayay boqorkii Zara yaqub qarnigii 15aad.

## Layliska 7aad

Waxaad ka doodaan su'aalahan soo socdo

1. Maxaa sida ay taariika ahaan canshuurta ku bilaabatay loo la xaxidhiidhiyay dhalashada nidaam daaw li ah?
2. Goorma ayaa dalkeena laga bilaabay canshuur uruurinta?
3. Goorma ayeey dadku bilaabeen bixiinta casnhuurta?

**"Sidii ay ku bilaabantay canshuurta taarika ahaan" Qaybta 2aad**

- Maxaa loo bilaabay bixinta canshuurta?

Dadku siay goob uguwadanoo laadaan waxay u baahanyahiin in la ilaaliyo nabadgalyada iyo amniga deegaanka. Waxaa muhiim ah in dadku si ay uga gaalaystaan weerarada dibada ugu iman karo in ay is ku duubnaadaan ayna abaabul naadaan. Haddaba si ay iskaga difaacaan weerar

kasto oo dibada kagayimaado, shacabkane loo maamule waxay samaysteen wax layidhaahdo dawlad. Markaas si ay dawladaas u fuliso masualiyada saran una daboosho baahida dadka waxaya cadaatay in ay u baahatay dhaqaale, hanta iyo xoog. Xiligaas waxii ka dambeeyay dadka muwaadiniinta ah lacagtii iyo hantidii ay daw lada si is daba jooga u siinjireen ayaa labilaabay in loogu magacdaro canshuur.

## Layliksa 8aad

1. Dawladahii hore ee ka jiray dunada hantidii ay canshuur ahaan usoo ururin jireen maxay inta badan ku fulin jireen?
2. Waxii ay dadku u bilaabeen in ay bixiyaan canshuurta maxay badalkeeda ahayd in ay helaan?

## 4.4.2. Noocyada Dakhliyada ah ee laga soo uruuriyo canshuurta

- Qora qarniyadii hore dadka canshuurta ay dawlada siin jireen noocyada ay ka koobnayd.

### Noocyada canshuurta ee xiliyadii hore iyo wahktiga casriga ah

***B. Xiliyadii hore:*** dawladihii jiray qarinyadii hore waxay canshuurta ka soo uruurin jireen dakhliyo kala duwan. Badanaa canshuurta waxay ahayd mid lagu soo uruurin jiray lacag ahaan, ama dalag soo go'a, mararka qaarne dadku waxay masuuliyada ka saran cashuur bixinta ku gudan jireen in ay xoogooda ku shaqeeyaan. Intaas ka dib waxii sii jiray nidaamka ah in canshuurta loo bixiyo sii xanti ah iyo isku awood sheegasho. Sidaas awgeed, ayay hanaankii canshuur bixintu unoqday mid ay ku dheehantahay cadaaladaro. Dadka taagta yaraa ayaa waxay bixin jireen canshuurta, lacag ahaan ama dalaga iyo xoogooda ay ku adeegaan. Kuwa xukunka heyay ama maalka baddan haystay ma,aanayn bixin jirin canshuur.

***T. Noocyada dakhliyada ah ee xiligan casriga ah laga soo uruuriyo canshuurta:***

Xaalada canshuur uruurinta waa mid marba marka ka dambayso isasii badalayso. Ilaha canshuuraha laga soo uruur weey ku kala duwan yahiin xiliba xil, dawladbadawlada kale ama dalba dalka kale.

Nidaamka dimuqraadiyada canshuur uruurinta waa mid aad u wanaagsan. Waxa ay tahay in canshuurta lagu bixiyo, cida laga qaaday; inta la qaado waa kuwa lagu cadeeyay sharciyada.

Waxaa jira Ilo iyo dakhliyo kala duwan oo canshuurta laga soo uruuriya. Waxaa ka mid ah; beeraha, hawlaha kala duwan ee ganacsiga, mushaarka, warshadaha m iyo khayraadka, macdanta.

## Layliska 9aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socdo

1. Hanaanka canshauur bixinta iyo saamiga lacagta la bixiyo ee dalalka kala duwan ma waa isku mid ayaad leedahiin? Sabab?
2. Adeegyadan soo socdo nooca ay qoyskiinu canshuurta ka bixiyaan waa kuwee.

| | |
|---|---|
| • Dhulbeereed | • Gancsi |
| • Muhshaar | • Guriga/xaafada |
| • Meeherad | • Tilifishinka |
| • Taleefon Laydhka | • Khayraadka xoolaha |

### 4.4.3. Canshuurta oo si daacad ah loo bixiyo waa waajibaad ka muwaadiniinta

- Maxay bixinta casnhuurta unoqotay waajibaadka muwaadiniinta?

Canshuurta in rabitaankooda iyo dareenku masuuliyad ku bixiyaan waa waajibaadka muwaadiniinta. Nidaamka dimuqraadiga ah canshurta waa dakhli lagasoo uruuriyo muwaadiniinta laguna fuliyo adeeg bulshada. Xarumaha kala duwan ee sida dugsiyada, caafim aadka ama jidadka dhamaantood waxaa laga dhisaa dakhliga canshuurta ka soo xeerooda. Sidaas daraadeed, bixinta canshuurta waa waajibaadka muwaadiniinta waxaana loo baahanyahay in ay sidaas u fahmaan dadku. Canshuurta oo la bixin waayo ama xiligeeda ladhaafiyo waa talaabo ka soo horjeedo sharciga.

#### Layliska 10aad

1. Dhibaatooyin caynkee ah ayaa dhalan kara haddii canshuurta si haboon loo bixini waayo?
2. Xiliyadii hore ujeedooyinkii canshuur bixinta maxay kuwa hadda jira kaga duwanyahiin?

## Gebogabada Cutubka

Falaka cadaalad darada ah siyaabo iyo meelo kala duwan ayeey kud hici karaan. Goobaha adeegyada bixiyo ee yaryar ilaa kuwa waawayn dhamaan weey ka jira kartaa cadaaladarada. Falalka cadaalda darada ah ee jira waxay leeyahiin sababo kaladuwan. Dhamaanba falalkan waxa gaysto dadka waana kuwa loo baahanyahay in muwaadiniintu ka dhiidhiyaan.

Si falalka cadaald darada ah looga hortago waxaa kale oo loo baahanyahay in xarumaha adeega bulshada fidiya loo dhamaystiro xoog waxbartay oo ka shaqeeyo iyo qalbyo kufilan islamar kaane ay si cadaalada ah ugu adeegaan dadaka ku dhaqan deegaanka ay ku yaalaan.

Waxyaabaha sababa cadaalad darada iyo ku xadgudubka xuquuqaha waxaa ka mid ah xuquuqda muwaadiniinta oon ladaryeelin, ku tagrifalka awooda, iyo muwaadiniinta oo si aan isku mid ahaan looga adeego.

Waxaa dhamaan muwaadiniinta saran waajibaad ah in canshuurta ay bixiyaan xiligii loogu talagalay. Canshuurta dakhliga laga soo uruuriyo ayaa lagu fuliyaa adeegada kale duwan ee ay dawladu dadka ufidiso.

### Erayada ugu muhiimsan ee Cutubka

| | |
|---|---|
| Sharci: | Nidaam,Xeer, laysku maamulo ooy dhamaanba shacabku ku he shiiyeen. |
| Canshuur: | Dakhli ,dhaqaale lagas oo uruuriyo shacabka oo ah saami xadidan. |
| Maalqabeen: | Dad hantiilayaal ah oo hantidooda galiyo qaybaha kala duwan ee agabyada hor umarka. |

## Su'aalaha Gebogabada ee Cutubka 4aad

Su'aalahan soo socdo kuq ora buugaagtiina kadibne ka shaqeeya.

1. Meelaha ay ka jiraan xarumaha adeega bulshada hanaanka cadaaldu wuu hirgalikaraa.
2. Xarumaha kala duwan waxa lagu xaqiijiyaa tayadooda
3. Marmar in lagu kaco cadaalad daro weey haboontahay.
4. Nidaamka dimuqraadiyada ,bixinta canshuurta waa waajibaadka muwaadiniinta.
5. Falalka cadaalad darada ah ee laga fuliyo goobo kale duduwan asal ahaan waa isku mid.

II. Kuwa hoosyaalo xarafka "B" uga soo dooro kuwa ku hoos qoran xarafka "T"

| A | B |
|---|---|
| 1. Ku shaqaynta qabyaalada | B. dhibaato kartila'aan |
| 2. Waajibaad ka muwaadinka | T. wado cadaalada lagu horumarinayo |
| 3. Jirtiaan la'aanta qalabkii loo baahnaa | J. Eexasho |
| 4. Go'aaminta go'aan garsoor oo been abuur ah | X. diciifida cadaalada |
| 5. Ilaalinta sharciga | Kh. Bixinta canshuurta |
| | D. xarun bulsho |

III. Su'aalahan soo socdo ka dooro Jawaabta saxda ah.

1. Heerka cadaalada ee canshuurta waxaa lagu cadayn karaa mid ka mid ah kuwan ?
   - B. Muwaadiniinta in ay bixiyaan hadba awoodooda dhaqaale.
   - T. Marka ay dhamaanba muwaadiniinta cadad isku mid ah
   - J. Marka ay hoogaamiy ayaasha dalku ka madax banaanaadaan bixinta canshuurta
   - X. B & T ayaa ah jawaabta.
2. Kuwan soosocda keebaa ah ilaha canshuurta?
   - B. Beeraha
   - T. Mushaarka
   - J. Ganacsi
   - X. Dhamaanba
3. Waa kuwee goobaha falalka cadaalad darada ah lugu fuliyo?
   - B. Xaafad (Qabale)
   - T. Xarumaha Cadaalada
   - J. Dugsiyada
   - X. dhamaan

4. Kee baan sabab u noqonkarin waxa dhaliya ku xadgudbuka cadaalada?
   B. Ku shaqaynta lacag iyo gunooyin dheeraad ah
   T. Ku takri falka awooda
   J. Waxyeelaynta cadaalada
   X. Qadarinta xuquuqda dadka
5. Maxay tahay in lagu dhaqaaqo si loo ilaaliyo xuquuqda dadka?
   B. Sharciga oo la adeegsado
   T. Xuquuqdaad oo xoog lagu helo
   J. Cadaalada oo la balaadhiyo
   X. "B" iyo "J" ayaa jawaab ah

## IV. Goobaha banana ku buuxi erayada ama weedhaha saxda ah.

1. Muwaadiniinta kharashka ay dawladoodu siiyaan ayaaga oo ku salaynayo dhaqaalahooda ____________ ayaa loo yaqaan.
2. Xurumo adeeg bixiya, adeegyada ay fulinayaan kuwo ku salaysan _________________ waa in ay ahaadaan.

## V. Su'aalahan soosocdo ka bixi Jawaab kooban.

1. Faaf faahin ka bixiya waxa laydinka baahanyahay in aad samaysaan si dugsiga dhexdiisa uga hirgasho hanaanka cadaalada.
2. Qor waxay tahay in lagu dhaqaaqo si looga hortago falalka cadaalad darada ah.

CUTUBKA 5

# Dal jacayl/Wadaninimo

Ujeedooyinka cutubka : Ka dib dhamaadka cutukban waxaad

- Ogaan idoontaan astaamaha dal jacaylka.
- Fahmi doontaan kaalinta barashada taariikhda dalkaada ay ka gaysato dhisida dareen wadaniniimo.
- Garowsandoontaan uj eedada ka qaybgalka isxilqaanka
- Ogaani doontaan wadooyinka lagu helo jinsiyada dhalaashad/muwaadinimada

## 5.1. Dal jacayl/Wadaninimo

### 5.1.1. Xaaladaha Muhiimka u ah dhisida Dareen Wadaninimo

- Waa maxay arimaha horseedi karo dhisida dareenka dal jacaylka?

"Doodii Ardayda"

Ardayda fasalka 6aad ee dugsiga Wiilwaal ee magaalada Jijiga waxay saddaxdii biloodba yeeshaan dood. Sanadkan qodobka dooda waa "Arimaha muhiimka u ah dhisida dareen wadaniyad" waxaane doodaya Fasalada 6aad B, T, & J . Fasalak 6aad B waxaa ka socdo Cismaan iyo Caasho, fasalka T. Cali yo Ceeblo. Fasalka "J" Cumar iyo Cindi. Waxayna kala wataan qodobo ay isleeyahiin waad kaga gulaysan kartaa kuwa kale ay dooda ku soo bandhiyaan waana sidan soo socoto: Fasalaka B wuxuu ku doodayaa "haddii hanaanka garsoorka iyo cadaalada looga kala eexdo muwaadiniinta dareenka ay u qabaan dalkooda hoos ayuu dhici.

Fasadka T. Hddii Gabdhaha iyo Willash looga kala sooco dhinaca waxbarashada iyo helida fusadaha shaqada dareenka loo qabo dal jacaylku hoos ayuu u dhici.

Fasalka J. Maadaama bini aadamku si isku mid ah ay usimaynyahiin dabiici ahaanba, ma haboona in caruurta, dadka da'da ah iyo dumarkaba loo fidiyo daryeel dheeri ah.

**Layliska 1aad**

Indinka oo ku salaynayo Dooda ka jawaaba su'aalahan

1. Qodobada dooda keebaad is leedihiin wuxuu soo dhigay qodob uu ku guulsan karo?
2. Idinku qodobkee ayaad dood ahaan uga qaadan lahay deen qodobada ardayda soo dhigeen?

Waxaa kor uqaado dareenka wadaninimo ee muwaadiniinta marka qof walba ama kooxba

xuquuqahooda loo daryeela si ay ka dhowrantahay eex iyo cadaaladaro. Marka xuquuqaha qowmiyadaha iyo shucuubta dalka ku dhaqan loo daryeelo si aynay gacan bidixayn ku jirin oo siman waxaa hubaal ah in dareenka wadaniyada iyo jacaylka dalku uu xoogaysani. Wadaniyada waxay xoogay sani oo kale marka saraynta sharciga lagu dhaqmo; marka muwaadiniintu u is taagaan hor umarka dalkooda ayna is qadariyaan.

Dhinaca kala, haddii ay cadaalad darada faafto, muwaadiniintane loo kala eexdo ma iman karto dareen wadani yad. Guud ahaan, in dalkaada laga difaaco waxii khalkhal iyo waxyeelo u gaysan karo lana daryeelo waa arin laga sugayo muwaadinka wanaagsan.

**Laylisha 2aad**

Ka dooda su'aalahan soo socda

1. In loo riyaaqo ama lagu faano bilicda dhulka iyo dalka ayada oon la daryeelin xuquuqda muwadiniinta wax macna ma saymay nayso maxaa loo leeyahay?
2. Maxay noqnokartaa natiijada ka dhalata shacab aanay ka jirin cadaalad daro kuna wada nool waaltinimo iyo dal jacayl?
3. Idinka maxaad ku cadaynkaraysaan in aad dalkiina jeceshahiin?

## 5.2. Ficilada wax yeelayn karo dareenka Wadaaninimada

### 5.2.1. Daryee lid la 'aanta Hantida Bixisa Adeega laga wada faa'iidaysto Ee Bulshada

- Waa kuwee hantida loo yaqaan kuwa bixiya adeega bulshada?

"Ficil ku Dayasho Mudan"

Dugsi ka mid dugsiyada ugu ardayda baddan ayaa wuxuu samaystay Naadi( Club). Waxay naadigaasi ugu magacdareen" Naadiga dal jacayl". Xubnaha Naadiga waxay usugu jiraan arday iyo Macalimiinta. Mar walba ficilada iyo wax qabadyada ku dayasha mudan ee uu Naadiga sameeyo wuxuu soo jiitay dad iyo xataa hay'adaha aan dawliga ahaan. Mid ka mid ah banadhigyada ay samayeen ayay maalin ku soo qaateen alaabada iyo hantida dugsi ee la dacay. Waxay u qaybiyeen saddex meelod. Kuraasta, iyo miisaska jajabay in tay soo ururiyaan ayeey ugu magacabeen kooxda "B". Buugaagta iyo waraaqa ay ardaydu googooyeen Inteey meel isuge geeyeen ayay ugu magacdareen kooxda "T". Qaybta saddaxaad waxay soo uruuriyeen Qalimaanta iyo kuwa kale ee loo adeegsadoo qoraalka ee ladayacay ka dib ugu magacdareen kooxda "J".

Waxaa u soo daawasho tagay dad baddan in ay daawadaan. Dadkii waxay ku baraarugeen sida uu Naadigani ugu shaqaynayaan dugsiga ooda waxayna balan qaadeen hay'adahii iyo bulshadiiba in ay lagarab taaganyahiin wixii kaalmo ah ee dugsigooda uga baahdo.

**Laliska 3aad**

Ka jawaaba su'aalahan soo socdo

1. Dareen caynkee ah ayay idinku dhalisay sheekada Naadiga kor ku xusan ee "Dal jacayl"?
2. Idinkuse sidee ayaad hantida dugsiiga u ilaalisaan?




Jaantuska 5.1 Kuraas Dacycan 5.2 . Buugaag la dayacay

Hantida adeega loo dhanyahay bixisa ee dugsiyadeena laga helo waxaa ka mid ah kuraasta ,Faselada wax aan ku barano, miisaska buugaagta iyo qalabyada kale ee baris barashada. Hantidaasi waa mid laga soo iibiyay ama lagu dhisay lacag uu dalku aad ugu baahnaa. Waa kuwa aan inaga leenahay, wax ku barano, mustaqbalkane walaalaha inaga dambeeyo wax ku baran doonaan. Sidaasdaraadeed,dhamaanteen ardayda waxaa in saran xil ah in aan daryeelo qalabyada iyo hantida dugsiyadeena.

Shaqo kooxeed

Intaad hantida adeega bixisa ee dugsiigana una baahan in ladaryee llagana ilaaliyo waxyeelada soo qortaan kadibna faahfaahiisaan sida loo ilaalin karo qalabkaas, macaliinkiina warbixin qoraal ahaan ugu soo gudbiya.

### 5.2.2. Falalka Qayra masuulinmada ah, wasakhda oo meel walba lagu tuuro iyo suuliyada oon si haboon loo isticmaalin.

“Ficilada deegaankii Nadiifta ahaa”

Dhalinyarada ku nool xaafad ka tirsan Magaalada Godey ayaa waxay ka sheekaysteen sida deegaanka magaalada ugu lito dhinaca nadaafada. Qaar ka mid ah dhalinyaradii ayaa soo jeediyay in la sameeyo Gudi ka halwgala baraarujinta dadwaynaha Magaalada ee dhinaca nadaafada. Ugu dambayntii hase yeeshee waxay aas aaseen Naadi loogu magacdaray “Naadiga Nadaafada Deegaanka” waxyna ka koobnayeen dhalinyaradaas 12 xubnood.

Dhalinayarada ayaa bilaabay in ay ka nadiifiyaan waxyaabaha hadhaaga ah ee wasakhda nadafad darada keeni karo deegaanka. Waxay gacan ka heleen duqa Magaalada oo layaabay sida dhalinyaradani isu xilqaantay, wuxuuna siiyay Xafiis. Dhalinayrada ayaa yeeshay xubno badaan oo kale waxyna hadda yihiin kuwa aad u habaysan oo leh hogaan si nidaamsane ugu shaqeeyo nadaafada Magaalada. Waxyba adeegsadaan qalaba lagu rido qushinka iyo waxyaabaha wasakhda ah.

## Layliska 4aad

Idinka oo ku salaynayo sheekada ka jawaaba su’aalahan.

1. Maxaad ka baran kartaan dhaqamada Naadiga dhalin yaradaasi?
2. Sidee weeye xaalada nadaafada ee deegaankiinu?
3. Sida dhalinayrada Naadiga “Naadafada” maj ireen qaar idinka mid ah oo sidaas oo kale Naadi hore u sameeyay?



Jaantuska 5.3 .Waxyaabha Wasakhda hadii goob lagu ridi-waayo cudur ayaa ka dhalani

- Maxaad sawiradan ka baranaysaan?
- Idinka deegaankiinase ma ka jiraan dhibaatooyin sidan oo kale ah?

Waxyaabaha hadhaaha ee wasakada iyo qushinka ee la dhigo wadooyinka iyo goobaha dadku ku badanyahiin waxay dhaliyaan caafimaadaro. Haddii wasakhda deegaanka iyo qushinka la nadiifin waayo cayayaanka sida cudur sidah Daqsiga oo kale ee ugudbin meelo kale ka dibna waxaa ka dhalan karo cuduro faafo. Sidaas daraadeed, waxaa dhamaan bulshada iyo ardaydaba saran masuuliyad ah in lagu dadaalo sidii qashinka iyo waxyaabaha hadhaaga ah loogu ridi lahaa goob asturan.

## Layliska 5aad

Waxaad ka doodaan su'aalahan soo socdo.

1. Waxaad koox ahaan ugu doodaan dhibaatooyinka nadaafad ee dhalaankara haddi wasakhda iyo qashinka meel kasta lagu tuura suuliyadane aan la nadiifin.
2. Falalka deegaanadiina sida "Maxaa iga khuseeyo" oo kala ah ee keenayo nadaafad darada bal koox koox uga doodaa.
3. Waa maxay qaybta kaaga aadan daryeelida naaafada deegaankiina?

## 5.3 Dabeecadaha Isxil qaamida ku dheehantahay

- Maxaad ku tilmaami lahaydeen qofka garab siiya qof laxaad la oo dhabo ay ku kulmeen?

Dareenka guuda ee wadaniyada waxyaabaha dhisa waxaa ka mid ah dhaqamada ay ku dheehantahay is xilqaanka. Dhaqanka is xilqaamida (Mutadawacnimada) waa marka adiga ama idinka oon cid kale arin, hawl ama waxqabad idinku qasbin rabitaankina uga qaybqaato. Talaaboyinka aad u qaadid dhinaca is xilqaamida marka hore adiga ayaa ka faa'iidaya mar ka xigana bulsho weeynta.

In aad booqatid qof xanuunsan; xushmaynta ehelka ama dadka waweyn iyo kuwa yar yarba waa tusaalooyinka dareenka wadaninimada. Dhaqanka ka qaybgalka isxil qaamida waa dabee cadaha wanaagsan ee ay ku gu gartaan qoys kiina, saaxiibadaa, bulshada ama daris kaada. In aad iska dhowrid falalka waxyee layn karo dadka kale, kana dhiidhidid ficilada cadaalad daraada ah waa astaamaha kale dareenka iyo dhaqanka isxil qaanka.

## Layliska 6aad

Shaxda hoos ku qoran inta aad ku qortaan buugaagtiina waxaad eegtaan ficilada aad leedahiin waa in aan ku dayanaa iyo ku wa aad leedahay waa in aan ka ree banaadaa.

## Dal jacayl/Wadaninimo

| Ficilada ay tahay in aan ku dayano (yeelano) | Ficilada ay tahay in aan ka reebanaano (dabeecadaha) | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Xaafada dhexdeeda | Xaafada dhexdeeda | | | | | |
| Tusaale | Tusaale | | | | | |
| 1. | In dadka kaaweyn ku adeegsadaan | 1. | Xubnaha qoys ood been ku murantaan | | | |
| 2. | | 2. | | | | |
| 3. | | 3. | | | | |
| Dugsiga dhexdiisa | Dugsiga dhexdiisa | | | | | |
| Tusaale | Tusaale | | | | | |
| 1. | Saacadaha waxbrashada oo la ilaaliyo | 1. | In aadan fashiliin ardayda ku cayaarta hantida dugsiga | | | |
| 2. | | 2. | | | | |
| 3. | | | | | | 3. |
| Deegaankayaga | Deegaankayaga | | | | | |
| Tusaale | Tusaale | | | | | |
| 1. | In wax lagu dayankaro aad samaysid | 1. | Ogaansho la'aanta waxyaabaha nadaafad darada ugaysan karo deegaanka. | | | |
| 2. | | 2. | | | | |
| 3. | | 3. | | | | |

## 5.4 Tirtirida Saboolnimada

### 5.4.1 Muhiimada siyaasadaha iyo istiraateejiyada horumakra u leedahay cidhibtirida saboolnimada



Sawir 5. 4/ Jiilaalka dheeri wuxu isku badala abaar

- Look at the above photographs carefully, compare each of them and discuss what lessons you learn from them.

"Willashii Xumaa ee Xaafada"

Nur, Nasrudin, Cabdi iyo Cali waxay ahaayeen Afar wiil oo saaxiibo ah kuno saaxiiboobay dhaqamadii xun xumaa ee ay caadada ka dhigteen. Waxay ku heshiyeen sida cabida sigaarka, xatooyada, xashiishka iyo buuq badnida. Waxay dadka xaafadu uyaqaaneen "kuwii xumaa". Maadama si joogta ah loo xidhi jiray waxay dadka marka la yidhaahdo kuwii xuxumaal xageey aadeen ugu jawaabi jhireen "xabsiga" ka daya.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxaa dhacday in ayaga oo kuraagay xabsiga markii la soo dayay uu la kulmay will dhalinayara ah oo Xaafada aad loogu yaqaan waa goobta ee ,Qowdhan wuxuuna uga sheekeeyay xaalad hadda ka hor soo marya iyo sida hadda uu hadda ku noolyahay.

Waxay qaateen wanaagii uu u sheegay Qowdhan kana waanto been dhaqamadii xun xumaa dhamaan. Si ay uga faa'iidaystaan siyaasadaha iyo barnaamijyada horumarinta ee dawladda ayuu gacan ka siiyay gudoomiyaha xaafada, wuxuuna geeyay goob ga waadhida lago maydho.

Nur, Nasrudin, Cabdi iyo Cali maadaama ay u shaqo badnayeen daacad nimana laguyaqaanay waxaa dhacday in dad baddan ay isbartaan dhaqaala fiicane helaan. Waxay samaysteen iskaashato yar halkaas ayey na ka sii heleen dhaqaale kadibne furteen shirkad ay ugu magacdareen "shirkadii wiilashii xuxumaa".

Waxay bilaabeen in ay dhalinyarada ku nool giidarada ee dhaqamada xun xun ku saloobay gacan siiyaan. In ay waxbarashada geeyaan, dhar u iibiiyaan ayna shaqo siiyaan.

#### Layliska 7aad

Indinka oo ka duulayo sheekada kor ku xusan, ka dooda su'aalahan soo socda.

1. Kadib is badal kii xaga noolasha ee Nuur iyo saxiibadii maxaa ka dambeeyay?
2. Noolashoodii xumaad ee ay hore ugu noolaayeen dhalinyaradan sii lloga hortago maxay tahay in la sameeyo?
3. Koox koox ugu doodaa kaalinta siyaasadaha iyo barnaamijyada hor umarinta ka gaysan karaan cidib tirida saboolnimada.

Dalkeenu wuxuu hoddan ku yahay khayraad dabiici ah iyo taariikh soo jireen ah. In kaste oy jireen khayraadi kaasi balaadhan iyo taariikhadaas dheer haddane waxaa ina haysto dhinaca kale dhibaatooyin.

Aaban la haana khayraad dhabiici ah oo balaadhan

ee maadaama aanay lahaan jirin xoog waxbartay iyo bulsho u jajaban shaqada ma suurtagalin in aan ka faa'iidaysano. Waxaaba dalkeena bulshada caalamka ku tilaamaan kuwa dunida ugu faqiirsan. Waxaa dadkeena ragaadisay macluul iyo dib udhac mudo dheer ay ku soo jireen. Haddaba, si looga baxo dhibaatooyinkaas dib u dhaca iyo saboolnimada ayaa waxay dawladu ku dhaqaaqday siyaasado hor umarmeed oo natiijo laga soo hooyay.

Marka si ay barnaamijada iyo siyaasadaha horumar ka dalka u noqdaan kuwo hiraglo, oo natiijo leh waxaa loo baahanyahay in ay muwaadiniintu wax bartaan lana yimaadaan dareen shaqo.

## Layliska 8aad

ka jawaaba su'aalahan soo socdo

1. Waxaad koox ahaan ugu doodaan astaamaha saboolnimada ee lagu arki kara heer qoys, deegan, heer dal.



Jaantuska 5.5 Hawlo Mutadawacnimo

- Fariin maxay ah ayeey sawiradu i a tusinayaan?

Waxaa jira hawlo badaan oo inagaba aan qaban karo oo wanaaga dhinaayada xaafadeena, deegaankeena iyo dugsigaba.

Qaar ka mid ahne waxaa laga daalacan karaa shaxda hoos "kux un.

| Xaafada dhexdeeda | Deegankeena | Dugsiga |
|---|---|---|
| 1. In aana la sugin amar waalidiinti ee adigaba isxil qaantid qarshane samaysatid in taan lagu dirin.<br>2. Rabitaankaada ood ku daryeeshida nadaafada deegaankiina iyo gurigiina | 1. Daryeelida dadka taagta daran; iyo kuuwa da'da ah een garab haysan.<br>2. Adiga oo kaas hanayo saaxiibada in aad ka qaybqaadataan nadaafada deegaanka. | 1. In aad u adeegtid dugsiga adiga oo xubin ka noqdo naadiga wadaniyada iyo Anshaxa.<br>2. Daryeelida nadaafada dugsiga guud ah aan. |

### Layliska 9aad

Ka jawaaba su'aalaha soo socda.

1. Waxaad qortaan ficilada wanaaga ah eed leedahiin haddii aan uqabto deegaan kayga iyo dugsiga wey i farxad galin hayaan.
2. Dhaqamada wanaaga (isxilqaamida) dad caan ku ah taariikhda guud ahaan inta aad weeydiisaan dadka ka dib sheekada taariikhda qof kaas la wadaaga saaxiibadiin.

## 5.5 Muwaadinimada (Jinsiyada)

### 5.5.1 Wadooyinka lagu helo muwaadinimada

- Waa maxay muwaadinimo?
- Intaad dib u xasuusataan cashiradii horay aad u soo qaadateen waxa bal aad ka taqanaan muwaadinimo u sheega saxiibadina.

Muwaadinimadu waa qofka oo xubin buuxda ka noqdo dal. Waa xidhiidka ka sharci ee ka dhaxeeya qofka iyo dalkiisa. Muwaadinimo waa xuquuq, waxaana lagu helaa lebo wado. Waa mida hore haddii qofku ay dhaleen waalidiin Itoobiyaan ah wuxuu heli xaquuqada muwadinimada maadaama ay dhaleen dad Itoobiyaan ah.

Waada labaad ee lagu helo muwaadimiada waa mid looyaqaan muwadinimaa sharciga lagu helo. Haddii qof udhashay dalkale uu rabitaankiisa ku codsado in uu helo muwaadinimo (dhalasho) Itoobiyaan ah uuna buuxiyo sharcuyada dalka ee la xidhiidho muwaadinimada wuxuu heli karaa xuquuqda muwaadin imada.

### Laliska 10aad

1. Sida ku cad sharciga Itoobiya, meeqa nooc oo lagu helo muwaadin imada ayaa Jirta?
2. Maxay xuquuqda muwaadinimada lagu helo dhalashada (xidhiidhka waalidka) kaga duwan tahay tan lagu helo sharciga.
3. Qof ka soo jeeda waalidiin Itoobiyaan ah oo kunool Itoobiya ma odhan karaa madoonayo dhalasho (muwadinimo) Itoobiyaan?

## 5.6 Calanka Qaranka

### 5.6.1 Fasiirada calanka Qaranka iyo Astaanta calanka



Jaantuska 5.6 Calanka JDFI iyo Astaanta Calanka

- Maxay tahay fariinta ay gudbinayso calaamad astaanta ee calan keena ka muqaato?

### Layliska 11aad

Muxuu calnku astaan u yahay?

Calanka Qaran ee Itoobiya dhinaca dusha waa midab dooga ah dhexdune waa huruud,xaga hoosane casaan, islamar kaana dhexda ku yeesho astaan xidig midab bilu ah waxay si cad ugu

qeexantahay dasstuurka dalka Qodobka 3aad. Saddexda midaba waa kuwa siman dhinac walbo. Saddeda midab ee calanka waxay leeyahiin fasiraad iyo macna ay u taaganyahiin Doogaha wuxuu u taaganyahay horumar iyo barwaaqo; huruudane rajo wanaagsan iyo wakhti fiican; midabka casaanka ahne wuxuu ka turjumayaa halyeeynimo iyo naf u hur id wadanka.

Dhexda calanka/badhtamaha astaanta lagu xardhay midabka biluuga ah waana mid leh xariiqimo si iskumid ah loogu sawiray xidig. Falaadhaha ka soo jeeda dhinacwalba ee xidigta iyo xidigtabo waxaa lagu xardhay midab dahabi ah.

Waxayna xidigta u taagantahay qaramada, qowmiyadaha iyo shucuubta Itoobiya sinaan shahooda dhinaca xuquuqda, dhaqmada, luuqdaha diimaha IWM iyo in ay kuwada noo laadaan midnimo.

## Layliska 12aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socda.

1. Qara midabada calanka Itoobiya iyo calaamada astaanta qranka oo dhamaystiran.
2. Mid mid u faahfaahiya fasiraada midabada calankeena qaranka.
3. Si gaaban uga jawaab macnaha ay xambaarsantahay calaamada astaanta qaranka.

## Gebo gabada Cutubka

Waxyaabaha qaybta ka gaysan karo dhisida dareenka wadaniyada iyo dal jacaylka waxaa ka mid ah Ilaalinta xuquuqaha; in aynay jirin cadaalad daro; ogaanshaha taar iikhda deegaankaad iyo dalka; dareen masuul iyadeed. In laga hor tago ficilada xun ee waxyee laan karo dadka kala waxay ka mid tahay waxyaabaha xoojinkaro dareenka dal jacaylka. Saamaynta dhaqamada wanaaga iyo isxilqaamida waa tusaale ka mid ah astaamaha muwaadiniinta dhabta ah.

Si looga gudbo xaalada saboolnimo ee uu dalkeena ku jiro waxaa jira kaalin muwaaaadin walba la iman karo.si Barnaamijyada iyo siyaasadaha horumarka ee ay dawlada dajisay ay u taabagasho. Inta aan ka biloowno xaafadeehan, Dugsiyadeena iyo deegaankeena in aan la nimaadyo dareen wanaagsan oon dadka kale ugu gargaarayno waa masuuliyad saran muwaadiniinta.

Muwaadi imada lagu helo dhalashada (Xidhiidhka waalidka) iyo mida sharcigaba ha noqotee waxaa la so coto waajibaad muwadinimo oo ah in aan ka soo baxno masuuliyada Ina saran. Mid ka mid ah masuuliyada muwaadinimdaana waa ixtiraamida iyo barashada calan keena iyo heesta astaanta qaranka.

## Erayada ugu muhiimsan ee cutubka

| | |
|---|---|
| Cadaaladaro: | Waa ficil aan haboonayn oo qof qofka kale looga eex do |
| Musuqmaasuq: | Fal sharci daro ah oo lagu lunsado hanti |
| Istiraateejiyad iyo siyaasad: | Hirgalida barnaamij, mashariic, am nidaam sharic oo laraaco |
| Muwaadin: | Qof xubin buwxda ka ah dal oo leh xuquuq iyo waajibaad. |

## Su'aalaha Gebogabada ee Cutubka 5aad

Su'aalahan soo socdo intaad ku qortaan buugaagtiina ka shaqeeya.

I. Jimladahan soo socda uga jawaaba "Run" ama "Been."

1. Waxyaabaha dhisi kara wadaniyad waxaa ka mid ah cadaalad darada.
2. Cida ay tahay in ay uriyaaqdo ficilada wanaaga ah waa dawlada oo qudha.
3. Siyaasadaha iyo baranaamijyada ho umarinta ee ay dawlada soo saarto waxay ka dhaqan galaan xafiisyada dawlada oo kali ah.

II. Kuwa hoosyaal xarafka "B" uga soo dooro xarafka "T"

| B | B |
|---|---|
| 1. Guurka yaraanta | B. fikir dimuqraadi ah |
| 2. Aastamaha dal jacaylka | T. dhul wanaagsan |
| 3. Muwaadinimo | J. ficil waxyeelanaa kuwa kale |
| 4. Cadaaladdaro | X. dhaqamada xun xun ees oo jireenka ah |
| | Kh. Ixtiraamida shacabka |
| | D. Si sharci ah uga mid noqoshada dal |

III. Su'aalahan soo socdo ka dooro jawaabta saxda ah

1. Maxaa ka mid ah ficilada lagu sugayo muwaadan leh dalkayga waan jecelahay?
   - B. Ixtiraamida dhaqanka bulshada
   - J. Qof ka dhowran cadaalad darada.
   - T.Lahaanshaha dareen shaqo
   - X. Dhamaanba
2. Mid ka mid ah arimaha lagu tiriyo in ay sabab u noqdeen saboolnimada dalkeena waa?
   - B. khayraad la'aanta
   - T. Biyo la'aanta
   - J. la'aanta dhaqanka shaqada
   - X. Hoos udhaca gar gaarka
3. Waa maxay sabata keenatay in aan ilaalino hantida adeega guud bixisa?
   - B. Sharciga oo nagu amraya
   - T. Maadaama axyeeladooda aan ka faa'iidayno
   - J. In uusan khayraadka iyo hantida baa'biin

4. Teebaa noqonkarto tusaale ficliada "maxaa' iga khuseeyo" loo sameeyo?
   B. Wasakhda oo meel walba lagu tuuro
   T. Suuliyada oo si aan haboonayn loo isticmaalo
   J. Hantida dugsiga oo si haboon loo isticmaalo
   X. malaha jawaab
5. Teebaa noqonkarto tusaale ficliada "maxaa' iga khuseeyo" loo sameeyo?
   B. Wasakhda oo meel walba lagu tuuro
   T. Suuliyada oo si aan haboonayn loo isticmaalo
   J. Hantida dugsiga oo si haboon loo isticmaalo
   X. malaha jawaab
6. Kuwan soo socdo mid ka mid ah wuuxu cadayn u yahay adeega aan u fulino wanaag ahaan?
   B. in aan kasoo baxno masuuliyadeen ka dib marka aan amar ka helo waalidiinta iyo macalimiinta
   T. Saacada ha wax barashada oo si haboon loo adeegsado.
   J. Xanaanaynta dadka da'da ah iyo kuwa taagta daran.
   X. In loo hogaan samo dastuurka dalka
7. In lafashiliyo Tuuga iyo Falalka cadaald darada
   B. Waa kaalinta Boolika
   T. waa arin khusayso qaybaha cadaalada oo kali ah
   J. Waa masuuliyada muwaadin walba
   X.Dhamaan

## IV. IV Goobaha banana ku uuxi jawaabta ku haboon

1. Xuquuqda lagu helo dhalashada ama sharciga ___________ ayaa looyaqaan
2. Fariin gudbinayso oo ka turjumayso go'aanka shacabka iyo dawlada ____________ ayaa loogu yeedhaa

## V. Su'aalahan soo socdo jawaab gaaban kabixi

1. Magacoow labo kamid ah xuquuqaha iyo waajibaadka laga sugayo dhamaan muwaadiniinta.
2. Faahfaahin gaaban ka bixi saamaynta ay ficiilada dhaqamada xun xun iyo cadaalada darada ku yeelan karto hor umarka dhaqaalaha.

CUTUBKA 6

# Masuuliyada

Ujeedooyinka cutubka: marka uu cutubkan dhamaado ardayeey waa in aad:

- Fahamtaan in kaalintiina muwaadinimo ood kasoo baxdaan tahay masuuliyad
- Ogaadaataa in qof kasta oo muwaadin ah waajib ku tahay daryeelida khayraadka dabiiciga ah iyo raadadka taariikhiga.

## 6.1 Balan qaadka (Balanta)



Jaantuska 6.1 Arday Ka qalin jabisay Xirfada Caafimaadka oo Balan Qaadaya

- Dhalinyarada sawir ka muuqato ee xirfada caafimaadka baratay maxay samaynayaan?
- Dhalinyarada sawir ka muuqato ee xirfada caafimaadka baratay maxay samaynayaan?

### "Halyeeygii wakhtigan casriga ah"

Kayd Mauxamed markii uu ka qalin jabiyay xirfada Injeernimada ka hor waxaa ku waanin jiray Aabaliis Muxamed in uu sidiisoo kale noqdo geesi. Kayd marwalba ficiladii iyo hadaladii Aabahii wuu uriyaaqi jiray. "Dalka waa sida hooyada oo kale weeye. Muwaadinka hooyadiis si xaq ah ugu adeega matirsado ma gdhow." ayuu u sheegi ajirya Aabahiis wuxun ahaa halyeey xiligii dagalkii Taliyaaniga dalka kusuu duulay. Kayd wuxuu u istaaganaa in uu raaco dhaqankii Aabahiis ee halyeey nimada.

Xili xilayada ka mid ah ayaa waxaa uu ku jiray Kayd kormeer u ju samaynayay wado cusub oo laga furayay. Wuxuu arkay in wadada ka hooseeyso heerka caadiga ah ee wadooyinka lagu yaqaan; wadadane aanay tayo lahayn. Wuxuu Kayd go'aan ku soo saaray in wadada markale lagu noqdo oo dib loo habeeyo. Laakiinse maamulahii shirkada ayaa soo faragaliyay arinta. Wuxuu mareeyahu u soodiray Kayd baqshad ay ku Jiraan waraaqo ay ku qoranyahiin balan qaadyo in uu u ilbinhayo gaadhi casri ah jagane siinayo Kayd haddii uu go'aan kiisa ka noqdo.

Kayd oo ku gacansaydhay fariinta maareeyaha ayaa yidhi war aniga lacag kuma badalanyo dalkayga ee dadka iyo gaadiidka wadadaas ku

safri doono waa dad Itoobiyaan ah mana yeelayo in aan waxyeeleeyo dadkay gaas

## Layliska 1aad

Ka jawaab su'aalahan soo socdo idinka oo ku salaynayo sheekada kor kucad :

1. Waa maxay ficilka qofkii isku dayay in uu Kayd hadiyad ku, aamusiiyo waxyeelane u gaysto horumarka?
2. Waa maxay halyeey? Arimo caynkee ah ayaa lagu tilmaamaa?
3. Saboobta Kayd loogu bixiyay "halyeeygii wakhtiga casriga ah" maxay ahayd?

### Balantu

waa xaqiijinta aan qof u cadayno in aan arin ufulin doono in aga oon khiyaamin. In balan qaad la sameeyo waxay u baahantahay masuuliyad balaadhan iyo niyad wanaagsan. Haddii balan aad qaaday fulini waydo waxaa iman aamin daro. Sidaas daraadeed, ayay muhiim u tahay in laga taxadaro ka hor inta aan balanta la qaadin, sababtoo ah Soomaalidu waxay tidhaahdaa "balanta waa sheey qaali ah."

## Layliska 2aad

Ka jawaaba su'aalaha soo socdo

1. Waa maxay balantu?
2. Waa maxay sumcada uu ku yeehso dadka dhexdooda qofka ka soo baxo balanta uu qaado?

## 6.2 Aragti wanaagsan iyo Aaminimo/ Daacadnimo

- Waa maxay Aaminimo?
- Side loo muujiyaa daacadnimo iyo Aaminimo?

Waa maxay Aaminimo?

### Xoogsadihii Aaminka Ahaa

Nin ku noolaa shaqada xoogsiga ee nulala maalmeedkiisa ayaa mahaalin uu dhisahayay dayr/ Xayir ka helay boors yar ay waxaago cadaymaha iyo lacag ku Jiraan. Wuxuu ogaadan boorsada in uu leeyahyay ninka uu guriga dayrkiisa u dhisayay. Wuxuu ka danqaday sida ninkii boorsada lahaa hadda u walwal sanyahay una fikiraayo. Wuxuuna go'aan ka gaadhay inuu u celiyo hantida ninkii lahaa.

Dhinaca kale maadaama uu helay boorso ay ku Jirto lacag baddan wuxuu la tashaday saaxiibkiis. Wuxuu Saaxiibkiis kaas oo u sheegay faa'iidada ku jirto haddii uu isticmaalo hantida. Laakiinse ninkii guriga dhisiyay ee ku noolaa dhacaan kiisa ayaa iska dhiiday talada saaxiibkiis kuna adkaystay go'aan kiisi hore. Wuxuu u celiyay boorsadii ninkii lahaa ee uu dayrka u dhisiyay. Ninkii oo layaabay daacadnimada iyo aaminimada ninka guriga u dhisayay ayaa intuu ka reebay waraaqahii caday maha ahaa dhamaan siiyay lacagtii ninkii xoogsadaha ahaa. Wuxuu ba masuul uga dhigan un u dabagalo shirkadiisa dhismaha shaqadeeda.

## Layliska 3aad

Ka jawaab su'aalaha soo socda

1. Sheega faa'iidadu uu ka helay ninkii dayrka dhisiyay markii uu u celayay boorsade ninkii lahaa.
2. Dhaqanka dayrka ninkii dhisayay maxaa laga baran karaa?
3. Aaminimadu waa dabeecad lagu faano. Faah faahiya jimladan?

Aragtida wanaagsan, Aaminimada iyo daacadnimada: waxaa lagu cadeeyaa shaqada. Shaqudane, waxay leedahay dabeecad bulsheed. Shaqo inta ay midho dhal noqonayso waxay u baahantahay aqoonta, xooga iyo wakhtiga dad baddan. Haddii qof walba qaybtiisa shaqada ku fuliyo daa cadnimo, aaminimo iyo dareen wanaagsan waxaa dhalan natiijo faa'iido leh. Tusaala ahaan, hadduu darawalku gaadhigiisa dhowrio xawliga uu ku socdo; diyaar u ahaado baadhitaanada waxay faa'iido tahay damaanada naftiisa iyo hantidaba. Qofka beeralayda ah waxaa saaran masuuliyad ah in uu beerta walkhtigeeda beero dabadeedna midhaha u soo bandhigo bulshada. Haddii qof walba hawsha uu hayo u fuliyo si daacadnimo iyo aaminimo ku dheehantahay waxay la mid tahay in uu ka soo baxay waa jibaadkiisa muwaadiimo

## Layliska 4aad

Idinka oo ku salaynayo fikradaha cashirka kor ku xusan ka jawaaba su'aalahan:

1. Waa maxay waxa loo leeyahay shaqadu dabeecad bulsheed ayey leedahay?
2. Maxaa loogu baahday in masuuliyada looga soo baxi si ay ku dheedhantahay daacadnimo iyo aa minimo?

## 6.3. Khayraadka dabiiciga ah iyo dhaqmada taariikhiga ah



Jaantuska 6.2 a Dayrka Taarikha ah Ee Harar



Jaantuska 6.2.b Tusaale Dhaqanka Soomalida

### Khayraadka deegaanka Soomalida Itoobiya

Dhulka dawlad-deegaaneedka Soomalida wuxuu Alle ku manaystay khayraad aad u baladhan. Waxaana kamid ah wabiyo, dhul beereed, dhul


daaqsin, dooxooyin, macdano kala duwan sida shidaalka, Milixda, iyo kuwa kale. Haddii aynan si haboon uga faa'iiaysano khayraadkaasi dadkeenu Kama baxayaan saboolnimada. Sidaas daraadeed, waa masuuliyadeena in aan baraarujiro dadkeena in ay hurdada ka kacaan kana faa'iidaystaan khayraadkaas



Jaantuska 6.3 Tusaale Geela Deegaanka Soomalida

Waxaa kale oo deegaankeenu hodon ku yahay khayraadka xoolaha nool. Xooluhu waxay isugu jiraan Geel, Adhi, lo, iyo duur joogto baddan. Waxay dhamaantood ku nool yahiin daaqa sida Geedaha , cawska iwm. Waxaase jirta nabaadguur lagu hayo dhirta iyo geedaha. Haddii ay sii socoto xaalufinta dhirta ee kaymaha xoolaheenu iyo noolasha dadkeena waxay halis ugu jireen in ay ku saloobaan gargaar-sugayaal





Jaantuska 6.4 Khayraadka Dabiiciga ah

## Layliska 5aad

Idinka oo ku salaynayo sheekada kor ku xusan ka jawaaba su'aalahan

1. Waa maxay khayraadka lafdhabarta u ah dhaqaalaha bulshada Soomaalida?
2. Ayeey masuuliyadiisa tahay daryeelida khayradka deegaan keena?

## Masuuliyada inaga saaran in aynu khayraadka dabiicigi ah iyo hadhaaga raadadka tariikhiga ah ilaalino

Khyraadka dabiiciga ahi waa wax Eebe ku manaysto dhulkiisa dabiici ahaan. Inta baddane haddii ay dhamaadaan waxaa laga yaabaa in aanay dib u soo laaban. Qof walba oo muwaadin ah khayradka dabiicega ah iyo raadadka taariikhiga ah waxyaabaha ka soo hadhay waxaa ka saaran masuuliyad daryeelkooda. Waxaa loo baahanyahay in qof walba yidhaahdo hantidan "ayaa anaa leh dabadadeed ilaaliyo.

# Masuuliyada

Qof walba hooygiisa iyo goobaha uu ka shaqeeyo qalabyada iyo agabyada kala duwan eeyeela inta uu xanaaneeyo meel ku asturo masuuliyad ayaa ka saaran. Tusaale ahaan, Ardayda waxaa saaran masuuliyad in ay daryeelaan alaabada guryahooda ee ay wax ku cunaan, ku seexdaan ama ku cabaan. Sidoo kale waa in aynu ka ilaaliyaan qalabka dugsiga dayacida iyo burburinta maadaama ay jiraan jill inga danbeeyo oo wax ku barandoono.

Waxaa laga doonayaa in ay deegan kooda khayraadka dabiiciga ah iyo raadadka taariikhiga ah, daryeelaan, hor umariyaan kana dhawraan waxyeelada. Ilaalinta iyo daryeelida khayradkaiyo raadadka haadhaga taariikhihii hore ama goobaha taariikhiga ah waxay horseedi kartaa in ayba abuuran shaqo baddan oo laga faa'iidaysto. Marka carada, kaymaha, macdanta, duur joogtada, biyaha iyo xoolaha laga ilaaliyo waxyeelada si haboone looga faa'iidaysto dhinaca horumarka waxay gacan ka gaysan karaan hoos u dhigida saboolnimada

bequeathed to us. If and only if we act in such manner, we can say that we are responsible citizens.

## Layliska 6aad

Ka jawaaba su'aalahan soosocda :

1. Ayeey faa'iido u tahay in la daryedo oo la ilaaliyo khayraadka dabiiciga ah iyo hadhaaga raadadka taariikhiga ah?
2. Sideey khayrad dabiiciga ahgacan uga gaystaa tiritida saboolnimada, gaajada iyo shaqa la'aanta?

## 6.4 EJ-AY-FI/Aydhis S

- Maxa ka mid ah wadooyinka layskugu gudbiyo EJ-AY-FI Aydhis?
- Waa maxay talaabada la qaado si faafida Aydhiska loo yareeyo?

"Aydhis"

Dulisanaa cudurku
Dadkuu baa bashaa yoo
Da'yartuu ku badan yahay
Dulin aan la arkeeno
Diicifaya Jidhkeenoo
Dadkuu baa ba'shaayoo
Da da dhexe ka doontaa
Dareenka jidhkee iyo
Damaceenuu wiiqaa
Duli weeye cudur

## Layliska 7aad

Intaad tixda yar ee kur kor ku xusan kusalansaan ka jawaaba su'aalahan

1. Maxaad ka fahmeeysaan tixda?

2. Aydhisku ayuu ku badanyahay baad u malaynaysaan?

EJ-AY-FI/Aydhis: waa cudur cadow ah oo ku socdo xowli aad u dheer baabi iyane dadka. Ilaa iyo hadda wax dawo ah loo ma helin cudurka Aydhiska. Cudurku wuxuu dilaacay 1981 dii; wuxuuna si xawli ah ugu faafayaa dunida.

## Masuuliyada

Qaar kamid ah wadooyinka layskugu gudbiyo cudur ka waxaa ka mid ah:

- Marka dhiig qaaday fayraska uu u gudbo dhiiga qof caafimaad qaba;
- Marka qalab uu isticmaalay qof buukaan Aydhis ah sida Cidiyajar, Cadday, Sakiin, Cirbad iwm uu ka daba isticmaalo qof caafimaad qabo,
- Marka hooyo uu gaadhay cudurka nuujiso ilmo

Waxyaabaha aan cudurka layskugu gudbinin waxaa ka mid ah:

- Salaanta gacmaha;
- Wadaagida suuliga
- Fasal qudha wax ku wada barashada iyo kuwa kale.

Waxyaabaha halista ka dhigahaya cudurka Aydhiska waxaa ka mid ah in ay daciifto qaybta dhiigcad ee jidhka islamarkaane qofku u nugulaado nooc kasta oo xanuun ah. Mida kale cudurku waa mid mar kaliyeeta ay qaadi karaan dad aad utiraban una dhiman karaan. Waxaa kale oo halis ku yahay dhaqaalaha qoyska, bulshada iyo dalka.

Cudur Kan wuxuu badiyaa haleelaa qaybaha bulshada ee dabaqada wax soo saarka (da'da dhexe). Sidaas daraadeed, waxaa dhaawac soo gaadhi dhaqaalaha dalka maadaama ay ku waasi yahiin xoogi wax soo saarka ee bulshada. Marka waaliduntu u dhintaan ama ku dhaco cudurka waxaa caruurta ku iman xaalad aan haboonayn.

Dhamaanteenba ardayey waa in aan qaadano sida cudurka layskaga ilaaliyo kana taxadaro isticmaalka qalabada kor aan ku soo sheegnay. Mida kale waa masuuliyad saaran muwaadiniinta in la daryeelo dadka la Jiifo cudurka loona muujiyo dareen wanaagsan

### Layliska 8aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socdo:

1. Qora wadooyinka layskugu gudbiyo Aydhiska.
2. Sideedey noqon kartaa xaalada qoys ku waxyeeloobay Aydhis? Caruurta qoysaskuna?

## Gebogabada cutubka

Si loo soo saaro muwaadiniin xabaarsan dareen masuuliyadeed waxa aas aas u ah qoyska. Dhalinyarada qoysas wanaagsan oo leh anshax suuban ka soo baxo waxay noqon hayaan kuwo ka soo bixi karo masuuliyadooda.

Masuuliyada waxay ka bilaabantaa noolasha iyo dhaqoonka qoyska. Ilmahuna si uu u dhaqan galiyo waanada iyo xeerarka waalidku wuxuu ku muujini in uu kasoo bixi doono masuuliyadiisa balan qaad. Wakhtiga lagu jiro waxbarashda iyo noolasha dugsigane, amarada lagugu siiyo dugsiga aad ugu soo baxdid si daacadnimo iyo aaminimo waa qayb kale oo ka mid ah wadooyinka masuuliyada lagasoo baxo.

Ilaalinta iyo daryeelida khayraadka dabiiciga ah iyo dhaqamada raadadka taariikhiga ah ee qoyskiins, bulshadaada, iyo dalkaada waa musuuliyad lagaa sugayo. In aad naftaada ka ilaalisid cudurka EJ-aad naqtaada ka EJ-AY—FI/Aydhiska islamar kaane dadaalada loogu jiro xakmaynta faafida cudurka ka qaybqaadatid waa masuuliyad balaadhan ood ka soo baxday.

### Erayada ugu muhiim san ee cutubka

| | |
|---|---|
| Qalin jabin: | Qaadashada shahaada (cadayn) ka dib marka aad heer wax barashada ka mid ah dhamaysid |
| Halyeey: | Muwaadin nooc kasta oo xirfadu uu ku shaqeeyo ka soo hoya natiijo wax ku ool ah |
| Balan: | Axdi ama erayo hadal ah oo laysku aamino |
| Anshax: | Fikrad tusmaynayso in dhaqanka qofu wanaagsan yahay in uusan wanaagsanayn |
| EJ-AY-FI: | Erayo la soo gaabiyay oo ah luuqada Ingiriisiga una taagan fayraska dhaliya cudurka Aydhiska. |

## Su'aalaha Gebogabada ee Cutubka 6aad

Su'aalahan soo socdo intaad ku qortaan buugaagtiina ka shaqeeya .

### I. Jimlahadan soo socdo haddii ay saxyahiin ku qora "Run" hadii ay Khalad yahiina " Been."

1. Balantu waa ficil aad qorshaysatay in aad ka soo baxdid iyo arin aad u qaadan qof ama bulsho in aad ufulin doontaa.

2. Hadii qof uu dhowro saacadaha shaqada oo kali ah waxaa loo tirin in uu ka soo baxay masuuliyadiisa.

3. Goobaha lagu daryeelo duurjoogta, shimbiraha iyo dhirta kala cayn caynka ah ayaa loogu yeedha beer ama carwo.

4. Faafida Aydhiska waxay saamayn ku yeelanaysaan saboolnimada iyo dib u dhaca.

### II.Kuwa hoosyaal xarafka "B" uga soo dooro kuwa xarafka "T"

| A | B |
|---|---|
| 1.Masuuliyada | B. Kahyraad ka turjumayo taarikh la soo maray |
| 2.Qoys | T. Hawsha ood ku fuliso rabitaan kaada ama amar |
| 3. Gara nuug | J. Goob dakhli laga helo iyada oo la booqanayo goobaha taariikhiga ah iyo khayraadka |
| 4. Khayraadka dabiiciga ah | X. Wax khatar ku ah horumar k dalka iyo dadka |
| 5. Dal xiis Dal xiis | Kh. Hanti lagu soo dhisi |
| 6. EJ-AY-FI | D. qayb ka mid ah bulshada oo ah caruur iyo waalid isku tagay |
| 7. Raadaadka taariikhiga ah | R. kayraadka kali ah ee dal. |

### III.Goobaha banaan ku buuxi erayada ama weedhaha ku haboon

1. Qayb walba oo ka mid noocyada shaqada hadii karti iyo si natiijo leh loo ga soo baxo ________________ ayaa loo yaqaan.

2. Dahabka, Birta, Duur joogata ___________ marka ay yahiin, dhismayaasha dawladihii hore, sawirada farshaxanada gidaarada lagu xardhay, masaajidadii hore __________ weeyaan

3. Mid ka mid ah waxyaabaha xagal daacin karo horumarka dalka Kan u halisan __________ weeyaan.

## IV.Su'aalahan soo socdo ka dooro jawaabta saxda ah

1. Masuuliyada oo looga soo baxo dacaadnimo, aaminimo waxaa wayeen
   B. In lanoqdo dul qaate
   T. In aanan lagu dhiiran in lagu shaqeeyo amar amaba rabitaan kaada
   J. In aad u halgantid natiijo dhalin aadne kasoo bixin waajibaadka muwadininimo.
   X. Muujin is fahan
2. Hirgalinta waanada waalidka iyo awaamirtooda waa
   B. Guriga dhexdiisa oo shaqada ku qabaato
   T. Anshaxa wanaagsan ood gudbiso
   J. Wakhti ku filan akhriska ood u weydid
   X. Ilaalinta balanta
3. Haddii qof walba ka soo bixi waayo masuuliyada
   B. Dhibaato kuma keenayso noolasho bulshada.
   T. Balanta ayaa la dhowri
   J. Samayn ayay ugaysani horumarka dalka iyo deegaanka ba
   X. Noolasha nabadgalyada ku dhisan weey sii xoogaysani
4. Kee ayaan cadaynayn ilbaxnimada iyo heerka horumarka ee shacabka
   B. khayradyada dabiiciga ah T. Buugaagta taariikhiga ah
   J. Raadadka tariikhiga ah X. Makhraatiga dadka
5. Faafida cudurka EJ-AY-FI/Aydhiska waxaa lagaga hortagi karaa.
   B. In laga leexdo wadooyinka layskaga ilaliyo
   T. In laga dheeraado bukaanka
   J. In la ogaado sida lays kugu gudbiyo kadibna la taxadaro

## V.Su'aalahan Soo socdo jawaab kooban ka bixi

1. Sideey balan qaadka oo la fuliyaa u noqon kartaa ka soo bixid masuuliyadeed?
2. Masuuliyada daryeelida khayraadka dabiiciga ah iyo daryeelkiisa ayey saarantahay?
3. Faahfaahi waxyeelada uu EJ-AY-FI ga u gaysankaro caruurta marka uu haleelo walidiinta.

CUTUKBA 7

# Dhaqanka Shaqada

Ujeedooyinka cutubka: kadib marka aad cutubkan dhamaysataan ardayayee waxaad awoodi doontaan in add:

- Fahamtaan muhiimada shaqada
- Ogaataan faa'iidada ka dhalato in shaqada dhaqan laga dhig to wakhtigane looga faa iidaysto waxqabad.
- Kala dhig dhigtaan u jeedooyinka dhaqalaha iyo horumarka ee lagu qeexay dasturka JDFI.

## 7.1 Macnaha dhaqanka shaqada

### 7.1.1 Hawl karnimo

- Waa maxay hawl karnimo?
- Faa'iido caynkee ah ayaa ka dhalata shaqo adayga?

Dhaqanka shaqada waa rabitaanka iyo ka go'onaanshaha shacab ee ku aadan in ay ku noolaadaan waxay shaqaystaan; islamarkaana natiijo wanaagsan ka dhalato shaqada xirfada iyo shaqalaaha. Shaqada maadaama ay tahay damaanad qaad dhinaca nool asha ee biniaadamka haddii si haboon loo shaqaysto midhaha ka dhasha shaqada waxay anfici qofka iyo qoyskaba.

Haddii shaqada lagu bilaabo waxyaabo yaryar oo degaanaka lagahelo si adagne loo shaqeeo, waxay isii gudbi kartaa shaqo balaadhan oo ku gaadhsiisa nool heer sare ah. Marka aynu leenahay si adag oy hawlkarnimo ku dheehantahay haloo shaqashysto ma ehe oo kali ah in shaqada aad ku hawlan tahay laga soo hoyo natiijo; ee waxay ka koobantahay dhowrida saa cadahashaqada, xirfad ay kudheehantahay anshax iyo kor uqaadida natiijada shaqada.

**Layliska 1aad**

Ka jawaaba su'aalahan soo socda

1. Sheega qaybaha shaqada ee ka jirato deegaan kiina lagane shaqayn karo?
2. In si adag oo hawlkarnimo ah loo shaqeeyo muhiimada ay u leedahay dalka koox koox u ga dooda.



Jaantuska 7.1 Shaqo Walbaayi Ahmiyad Ayeey leedahay

- Maxaad ka daalacan kartaan sawiradan?
- Dadka deegaankiina shaqooyin caynkee ah ayeey ku hawlanyahiin?

- Maxaa loo gajeeda marka la leeyahay shaqo yaraysi maleh?

### Wiilkii Hawl Karka Ahaa

Nimcaan Axmed in kasta oos ku nolyahay Magaalada Jijiga haddana wuxuu ku koray deegaanka Bambaas. Yaraantiisii wuxuu maqli jiriay dadka oo ku sheekaysanayo in Jijiga shaqo badan taalo. Wuxuuna soo raacay Adeerkiis oo u iibiyaya qalab uu ku shaqaysto. Wuxuu markaa bilaabay in uu ku shaqaysto qalabkii shaqada ees Adeerkii u iibiyay, kuna noqday mid si wanaagsan oo dhakhse ah u caseeyo kabaha. Wiilkan, nimcaan ah oo looyaqaan Wiilkii hawl kar ka ahaa in tuu kaco aroor hore dabadeedna caseeyo dhowr kabood ayuu aadaa dugsiga. Wuxuu macalimiinta iyo dugsigaba ahaa mid laga jecelyahay maadaama uu waxbarashada ku fiicnaa.

Wiilkan shaqada jecel wuxuu bilaabay in uu ku fikiro sidii uu lacag meel u dhigin lahaa una furin lahaa shaqo kale. Ugu dambayntii meherad kabaha lagu iibiyo oo adeeg fiican macaamiisha siisa ayuu ka furay goobahii uu kunoolaa. Mudo yar gudaheed waxaa kor u kacday tirada dadka iman jiray tukaankii Nimcaan.

### Layliska 2aad

Idinka oo ku salaynayo sheekada kor ku xusan ka jawaaba su'aalaha

1. Maxay dadku Nimcaan ugu yeedi Jireen?
2. Inta aad deegaankii nadad ka bilaabay sahqada meel hoose una gudbay heer sare iyo noolal wanaagsan weydiisaan waalidiintiina kadibna soo qortaan warbixin ku saabsan dadkaas sida ay u gaadheen heerkas u soo Jeediya fasalka.
3. Maxaad u malaynaysaan hawl karnimada Nimacaan in ay ku dhalisay.

### 7.1.2 In dhamaan Noocyada Shaqada la qabto

Marka aynu leenahay "Shaqo yaraysi maleh" waxaynu u jeednaa in dhamaan noocyada shaqada si isku mid ah loo arko layskane weeynaysiin ama la quursan qaybo ka mid ah shaqada. Haddii nooc walba oo ka mid ah shaqada aanan la odhan waa mid yar ama weyno si adagne loo qabto waxaa laga gaadhi horumar dhinaca noolasha ah.

### Layliska 3aad

1. Qora faa'iida ay leedahay in aan shaqada laga faanin?
2. Maxa lagu cadayn karaa sharafta iyo xushmada shaqada keento?

### 7.1.3 Wakhtiga oo looga faa'iidaysto shaqada

- Sida aad u isticmaashaan wakhtigiina u sheega saaxiibadiin.
- Waa maxay wakhtiga oo si hboon looga faa'iidaysto shaqo?

### Beer Qodatadii Xaawo Ahayd

Marwo Xaawo deegaanka ay ku nooshahay ee Qalaafo waxay can ogu ahayd ka faa'iidaysiga wakhtiga. Maaan ay ogolayn in ay daqiiqad bilaa camal ku dhaafto. Aroor hore in ta ay kacdo ayeey aadi jirtay beerta si ay u qodo. Beerta yar ee Xaawo waxaa ka soo go ay dalag ka baddan kan dadka kale ee deegaanka.



Jaantuska 7.2 Dadaal Shaqo

Waxay Xaawo marka ay ka soo laabto subaxii beerta wakhtigaeeda kala guriga shaqo ka qabato haddane iib gaynjiratay caanaha ay ka maasho halka sac ee ay lahayd. Xaawo waxay dalagii uga soo go ay beerta in tay si haboon uruurisay ka iibsatay Matoor biyeed. Waxaay samaystay iskaashato ka kooban dadka ay beeraha wada qodan jireen si ay uga faa'iidaystaan biyaha baddan ee Matoorka Xaawo iyadana ugu celiyaan kharash marka beerta soo go'do.

## Layliska 4aad

Idinka oo ku salaynayo sheekada ka jawaaba su'aalahan soo socdo.

1. Maxaad ka baranaysaan sida haboon ee ay marwo Xaawo wakhtiga u isticmaashay?
2. Sheega labo wax oo ka mid ah kuwa aad is leedahay waa taariikho dhiiragalin shaqo leh?
3. Waa maxay faa'iidada ku jirta si haboon u adeegsiga wakhtiga?

### 7.1.4 Wakhtigaada oo si haboon loo isticmaalo iyo shaqooyinka oon la quursan faa'iidada ay u leedahay naftaada iyo dalka

- "Wakhtiga oo si haboon loo isticmaalo" waa maxay?
- Odhaahada "wakhtiga waa qaali" odhanayso maxay natusinaysa?

Muwaadiniinta ayaga oon ka faanayni (iska weynaysiinayn) nooc kasta oo shaqada ka mid ah ee gaadhay heer wanaagsan aad bay u tira badanyahiin. Ma aha in shaqada laga faano. Waxay dhamaanba shaqooyinka si haboon u midha dhalin karaan marka wakhtigaada aad qorshaystid una hogaansatid nidaamyada shaqada leedayay. Muwaadinka fahma sida wakhitga looga faa'iidaysto si adagna u shaqeeyaa waxuu badali noolashiisa, mida qoyska, bulshada iyo dalkaba.

Wakhtiga oo si haboon looga faa'iidaysto isla markaane si adag loo shaqeeyo waxay leedahay faa'iidooyin badan. Waxay gacan ka qaystaa sidii looga dheeran lahaa saboolnimada, dulsaarnimada, faqriqa, waxayna dadajisaa horumarka dadka iyo dalkaba. Shaqadu guud ahaan waxay qofka u keentaa sumcad wanaagsan.

## Layliska 5aad

Kaj awaaba su'aalahan soo socdo

1. Qora faa'iidad ay leedahay s haboon u isticmaalka wakhtiga?
2. Maxaad u malaynaysaan sababta ay tahay in aanan shaqada ka faanin am quursan nooc ka mida shaqada?

## 7.2 In wax la cuno ayada oon la shaqaysan

### 7.2.1 Waxyeelada ay qoyska u gaysan karto ayada oon la shaqaysan in wax la cuno.



Jaantuska 7.3 Tuugsigu waa dhibaato bulsho oon haboonayn

- Waa maxay sabta tuugsigu in ta uu sii dhafo shaqsiga u noqdo dhibaato bulsho?
- Maxaad isleedahiin waa in la fuliyaa si aanay dadku ugu banbixin tuugsi?

### "Walee Aniyo Tuugsi kala Tagnay"

Ceeblo waa haweenay gidaarada iyo dariiqyada Magaalada Jijiga ka tuugsato iyada oo sidata limaheeda 8 sano Jirka ah. Maalin walba, Gawaadhida dariiqa istaaga ayay daaqada gacanta u fidiisa, dadka wadada socdo ayeey baridaa, meheradaha ayeey ka tuugsataa. Waxay hor istaagtaa Hudheelada ooy bac inta qaadato loogu ridaa hambada ama cuntada soo hadha. Ma aanay aamin sanayn noolal kale oon ka ahayn tuugsi.

Ceeblo oo aad ugu mashquulsan sida xun ee ay ku nooshahay ayaa waxaay mar ku baraarugtay bal sida ay ugu bixi karto noolashan cadhiidhiga ah. Waxa ugu daraa ee ceeblo ka fikirtay ayaa ahaa sida dhakhsaha ah ee Ilmaheeda dhaqanka uga dhiganayo tuugsiga. Maalin ayay ku fikirtay in ay ku laabato miiga iyo reeraheedii ay ugu dambaysan mudo dheer. Markii ay tagtay reerkii ayey layaablay sida tuuladoodii u hormartay. Waxay aragtay dumar baddan oo samaystay iskaashatooyin inta ay daymo yaryar ka helaan ururada kale. Ugu dambayntii waxayka mid noqotay haweenka iskaastada ahaa.

## Layliska 6aad

Su'aalahan soo socda ka jawaaba idinka oo ku salaynayo sheekada.

1. Waa maxay waxa loo yidhaahdo tuugsigu waa dhaqan xun?
2. Maxaad idinku ku talin lahaydeen si loo tirtiro dhaqanka tuugsiga? Uga dooda koox koox.
3. Sida she kada ku cad maxaad filaysaan bal hadda in ay noolasha ceeblo ku sugantahay?

Haddii qoys xubnaha kawada tirsan ay qaar ka mid ah shaqeeyaan ku kalane ka qaybqaadan waayaan shaqada waxaa laga yaaba in ay ku daalaan kuwaas. Ha noqoto dadka waa weyn, Wiilasha, Gabdhaha ama caruurtaba waxaa loo baahanyahay in ay gacan ka gaystaan dadaalka shaqada ee qoyskooda. Haddii ay jiraan qaar ka mida ah qoysaska iyo bulshada oo iyaga oon shaqaynin ku nool xooga ku wa kale waa in loo sheego in ay sidaasi ceeb tahay laguna waaniyo in ay shaqaystaan.

## Layliska 7aad

Ka jawaaba su'aalan soo socda.

1. Sideey caruurtu uga qayb qaadan karaan hawlaha guriga?
2. Qora labo fikrad ood leedahiin xal ayay u noqonkartaa sidii loo tirtiri lahaa caadada ah in waxaan la shaqaynin layska cuno.
3. Sidee buu qoysku ku xoojinkaraa dhaqanka in shaqada layskugu kaalmeeyo laysuna gar gaaro?

## 7.3 Anshaxa Xirfada iyo Shaqada

### 7.3.1 Macnaha Anshaxa Xirfada iyo Shaqada

- Marka layidhaahdo qof shaqaalaa ah wuxuu leeyahay karti xirfadeed maxaa loo jeedaa?
- Anshaxa ardaynimo ee idinka laydinka sugayo maxay yahiin?

Xifradu waa shaqa si gaar ah u lasocoto aqoon khaas ahaaneed iyo karti. Tusaale ahaan, macalin, shaqaale beeraha, saxafi, dhakhtar iwm kartida xirfadooda waa aqoonta iyo xirfada gaarka ah ee ay barteen si ay u fuilyaan shaqo gaar ah. Marka la yidhaahdo anshaxa xirfadane waa qofka shaqaalaha ah markuu shaqada galo sharciyada iyo nidaamka shaqada in uu u hogaan samo.

Sidan marka ay tahay kartida xirfada iyo anshaxu

waa dabeecadaha ficilahaan uu qofka u leeyahay in uu shaqo si karti leh uga soo bixi karo. Hase yeeshee haddii uu qof leeyahay aqoonta iyo xirfada shaqada uu san lahayn anshaxa xirfad as adeega uu bixinayo wuxuu noqon mid aad u lilto. Haddii buukaanka xanuunsan u yimaadaan dhakhtarka in uu daweeyo, siiyane talo caafimaad xirfadas waa takhasuskiisa, laakiinse ka hor inta dadka cudur ka qaadin haddii dhakhtarku talo siiyo si da ay cudurada ku dhashaan taasi waxaa tusaale u trahay anshaxa xirfada.

## Layliska 8aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socda

1. Maxay ka dhigantahay marka la leeyahay xirfada iyo anshaxa xirfada weey kala duwan yahiin?
2. Waa maxay sababta loo leeyahay xirfad walbaa kaalin muhiim ah ayey ku leedahay hor umarka dalka?

### 7.3.2 Anshaxa Xirfada oo yaraada dhibaatooyinka ka soo gaadhi karo muwaadiniinta.

- Haddi qof xirfad leh ay yaraato anshaxa xirfadiisaas ayay waxyeelo u gaysani?
- Maxaa loo leeyahay kartida xirfada kaligeed faa'iido yar ayeey leedahay?

Haddii xirfad walba lagu salayn waayo naftaada, tan bulshadu iyo dalkaba saamaynta ka dhalankarta kuma ekaanayso oo kali ah shaqsiga xirfad laha ah. Qofka shaqaalaha ah haddii uu ixtiraami waayo anshaxa xirfada natiijo ma iman karto, mana badali karo noolahsiisa iyo tan qoyskaba. Marka xirfada wax natijo ah aad ka heli waydo damaca kor u qaadida xirfadaada wey yaraani. Marka haddaba sidaas noqatane qancinta rabitaanka dadka hoos ayey u dhici.

## Layliska 9aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socda.

1. Sideey marka anshaxa xirfada yaraado u waxyeelaynkartaa horumarka dalka?
2. Maxaytahay in laqabto si loo xushmeeyo xirfada iyo anshaxa xirfada?
3. Intaad faahaahisaan sida anshaxa xirfada oo hooseey u waxyeelan karo dadka loo adeegayo dabadeed qora.

## 7.4 Xidhiidhka Ka Dhaxeeyo Shaqda iyo Horumarka

### 7.4.1 Ujeedooyonka hor umarineed ee Jamhuuriyada Dumuqraadiga Fdaraalka Itoobiya.

- Maxaa ka mid ah ujeedooyinka horumarined ee dhaqaalalaa?
- Maxay tahay in la sameeyo si ujeedooyinkaas u noqdaan taaba gal?

Dawlada JDFI si dalka looga hirgalio horumar degdag ah waxay dhaqan galisay siyaasado iyo istiraatejiyo horumarineed oo xooga saara beeraha iyo horumarinta ree miiga. Ujeedooyinka dhaqaalaha iyo horumarka ee uu dalku ku socdo waa kuwa ay dhamaan shacabku u simaynyahiin,kawada faa'iidaysanayaan loogane bixi karo saboolnimada kana qaybgalayaan dhamaan muwaadiniinta. Sidaas daraadeed, ujeedooyinka dhaqaalaha dalka waxay si cad ugu qeexanyahiin dastuurka JDFI qodobkiisa

89aad. Qaar ka mid ah ujeedooyinka dhaqaalaha ee dalka ee ku cad dastuur ka waxaa laga soo qaadan karaa kuwan:

89 (1) waxaa dawlada saaran waajibaad ah in ay dajiso wado dhamaanba dadka ree Itoobiya ay ugu wada faa'iidaysan karaa khayraadka iyo aqoontaba. 89 (2) waxaa dawlada saaran masuuliyad ah in dhamaanba dadka Itoobiya u dajiso una fududayso sidii ay kor ugu qaadi lahayeen islamarkaane khayraadka si cadaalad ah loogu qaybin lahaa.

89 (5) Dawlada waxaa saaran masuuliyada intay dhulka iyo khayraadkaba gacanta dawlada ku hayso iyada oo magaca shacabka ku maamuleeyso kadibna aadeegsato si ay u noqonlahaayeen kuwa u adeega danaha iyo horumar ka dadka.

89 (7) Dawlada waxaa saaran masuuliyada sidii ay u abuuiri lahayd xaalad ay dumarka si lamida sida raga si siman uga wada qaybqaadan lahaayeen ugana faa'iidaysan lahayeen arimaha dhaqaalaha iyo bulshadu.

### Ka dooda su'aalahan soo socda

1. Waamaxay nidaamka dhaqaalaha suuqa xurta ah? Inta aad qof aqoonyahan ah weey diisaan fasalka dhexdiisa uga dooda.
2. Waa maxay kaalintiina ku aadan si Kor looga gaado hor umarka dalka?
3. Waa maxay faa'iidooyinka ku jira in ujeedooyinka dhaqaalaha loob dhaqan galiyo ficilahaan?

## Gebogabada Cutukba

Shacabka yeesha dhaqanka shaqada iyo hawlkarnimaa waxay si deg dag ah ku gaadhi karaan horumar. Shaqadu waxay laf dhabar u tahay rajada iyo noolasha qofka, qoyska iyo bulshada. Wadamada dunida maanta lagu tiriyo kuwa horumaray waxay dadaal ka sameeyeen wakhtigooda ay uga faa'iidaysteen si haboon.

Maadama shaqada ay tahay inta badan arin wadajir iyo ka qay baglka dhamaan bulshadu u baahan waxaa lagama maarmaan ah in aan kawada qayb qaadano dadaalada shaqada. Haddii qof uu shaqeeyo qof kalane ku noolaado waxa qof kaas soo shaqeeyo waxay waxyeelo ugaysan kartaa noolasha qoyska iyo dalkaba. Qof walba oo xirfadla ah kuna shaqeeyo xirfadiisa waxaa muhiimah in uu lahaado dhaqamda anshaxa xirfada iyo shaqada si wanaagsane ugu adeego bulshada xirfadiisaas.

Ujeedooyinka horumarineed ee dastuurka JDFI waa kuwo siinaya dhamaanba muwadiniinta in ay sisiman uga wada faa'iidaystaan khayraadka iyo fursadaha dhaqaalaha.

Sidaas daraadeed, dhamaanba muwaadiniinta aqoonta leh waxaa loo baahanyahay in ay isticmaalaan xuquuqda dastuuriga ah sidii ay xirfada ay leeyahiin ugu adeegi lahaayeen dadkooda iyo dalkoodaba si ay qayb uga noqdaan horumarka.

## Erayada Ugu Muhiimsan Ee Cutubka

| | |
|---|---|
| Hawlkar: | Qof ad-adag, dadaal badan, shaqo baddan |
| Shaqo: | Dhaq dhaqaaq waxqabad oo lagu hawlanyahay isla markaane natiijo dhala. |
| JDFI: | Jimhuuriyada Dimuqraadiga Fadaraalka Itoobiya |
| Horumar: | Isbadal dhaqaale, oo heerka noolashada oo kor u gacda, waxbarashada oo |

## Su'aalaha Gebogabada Cutubka

Su'aalahan soo socda intaad kuq ora bugaagtiina ka dibne ka shaqeeya.

### I. Jimlahadan soosocda ugu jawaaba "Run" ama "Been"

1. Wadan wuxuu horumaraa marka dadkiisa shaqada caadaystaan.
2. Cida looga baahanayahay in ay si adag u shaqeeyaan waa beeralayda dhulka miiga ah kunool oo kali ah.
3. Qof xirfadla ah waa in uu marka laga reebo xirfdadiisas uu haddane dhowro anshaxa xirfada.
4. Haddii qof shaqaale ah xirfadii uu bartay shaqo ku waayo looma baahno in uu xirfadiisa si ka baxsan uqabto shaqooyin kale oo yaryar.
5. Iyada oon la shaqaysan in wax la cuno waxay ka mid tahay astaamaha dulsaarnimada

### II. Kuwa xarafka "B" hoosyaal uga soo dooro xarafka "T"

| B | T |
|---|---|
| 1. Ujeedooyinka dhaqaalaha | B. wakhtigaada oo si haboon loo adeegsa |
| 2. Astaamaha anshaxa xirfada | T. waxay sal u tahay horumarka shacabka |
| 3. Lahaanshaha dhaqanka shaqada | J. qofka shaqaalaha ah noolaashiisa, amaankiisa iyo heerka noolashiisa oo loo dhamaystiro |
| 4. La dagaalanka dulsaarniniada | X. Rabitaan la'aanta in aad ku. Noolaato |
| | Kh. wax dadka kale ku daaleen in aad ku noolaato |

### III. Su'aalaha soo scodo ka doorta jawaabta saxda ah

1. Waajibaadka laga sugayo xirfadle waa?
   - B. Kartida xirfada
   - T. Wakhtiga oo si haboon loo isticmaalo
   - J. Anshaxa xirfada
   - X. Dhamaanba
2. Dal wuxuu ku hormari karaa?
   - B. Dhaqan shaqo
   - J. Marka shaqooyin kooban isku si loo eego.
   - T. In wax lacuno ayada oo la shaqaysan
   - X. Dhamaanba

3. Midee ayaa khalad ku ah shaqada?
   - B. Dulsaarnimada oo lala dagaalamo
   - T. Xrfadaada ood dadka ugu adeegtid
   - J. Wakhtiga oo si haboon loo isticmaalo
   - X. In wax lacuno iyada oon la shaqay san
4. Midee ah dhibaato bulsho ama shacab?
   - B. Dhaqanka shaqada
   - T. Tuugsiga
   - J. Sinaanta
   - X. Dhamaan
5. Kuwan soo socda mideen ahayn shaqada beeraha?
   - B. Dhaqashada Xoolaha
   - T. Horumarinta Kaymaha
   - J. Beer yar oo casri ah
   - X. Qadida macdanta

## IV. Buuxi goobahan banaan erayada ama weedhaha ku haboon.

1. Waxaa horumarka dalkeena ficil ahaan loo gaadhi karaa marka shacabku dhaqanka ______________ la yimaadaan.
2. Dhibaatooyinka bulsho ee dalkeena waxaa kamid ah ______________ iyo________.
3. Qof xirfadla ah marka laga yimaado kartida xirfadeed waxaa looga baahanyaha in uu layimaado ______________ xirfada.

## V. Su'aalahan soosoco ka bixiya jawab gaaban

1. Waa maxay marka la leeyahay shaqo weeyni iyo yari ma kala laha?
2. Maxaa lagu cadayn karaa dulsaarnimo?

CUTUBKA 8

# Isku filaansho

Ujeedooyinka guud ee Cutubka: kadib marka aad cutubkan dhamaystaan waa in aad:

- Kala fahantaan dulsaarnimada dhaqaalaha iyo tan bulsho
- Aqoonsataan muhiimada in fikradaha dadka kale iyo midaada lays waafajiyo.

## 8.1. Faa'iidada Isku Filaanshaha

- Qeexa waxa aad u malaynaysaan isku filaansho
- Sheega magacyada shaqsiyaad deegaankiina aad leedahiin waa kuwa isku kalsoon. Sheega waxyaabaha muujinayao iskufilaansha dadkaasi

Isku filaanshaha waa adiga oo hadba heerka aqoonta ,dhaqaalaha iyo xoogaada inta aad isticmaashid qaadid masuuliyad dabadeed naftaadaada, qoyskaada, bulshada iyo dalkaba u qabatid hawlo faa'iido leh kana dheeraatid dulsaar nimada.

Inkufiilaanshaha waxaad ka'go bree kartaa wax dabaceed dulsaarnimo ah oo dhinaca dugsiga, bulshada, dhaqaalaha iyo go'aanka fikradaha kuwa kale.

Tusaale ahaan, ardayda inta ay qaadan masuulayd anfacaan naftooda ayaga oo ixtiraamayo sharciyada fasalka, daryeelayo hantida dugsiga kana shaqaynayo casharada iyo laylisyada.

Guud ahaan, isku filaanshaha waa kartida iyo awooda qofka u leeyahay in uu ku filaado naaftiisa, isla markaane gaadhi kara go'aan u gaar ah. Dadka leh isku filaanshaha waa kuwa ku tiirsan aqoontooda, kartidooda diyaaene u noqdo in ay qaataan talada dadka kale waxna ka bartaan. Isku filaanshaha marka laga yimaado faa'iidada qofka iyo bulshada u leedahay, waxay kaalin weyn ka gaysata koritaanka dalka.


### Layliska 1aad

Ka jawaab su'aalahan soo socdo:

1. Iska dhexdoorta qof xoghaye ah iyo mid afhayeena. Kadib intaad gacmaha taagtaan faa'iidada Isku filaanshaha sheega. Ka wada dooda sababaha saxda ah iyo kuwa aan ahayn. Ugu danbayntiina waxa isla gaadhin go'aan loo dhanyahay ood leedahiin waa mida faa'iidada noqon karta.

## 8.2. Dulsaarnimada

### 8.2.1. Waa maxay Dulsaarnimada?



Jaantuska 8.1 Arday Qishayo Imtixaan Fasalka Dhexdiisa

- Ardayga sawirka ka muuqda ee imtixaanka qishaya sida uu ku noqon karo dulsaarnimo waa sidee?
- Maxay tahay in uu ardaygan sameeyo si uu uga baxo dulsaarnimada?

Willkii Dulsaarka ahaa

Ismaaciil, wuxuu haystaa labo caruur ah oo la kala yidhaahdo Axmad iyo Axado. Waxaa kale oo Xaafada kula nool Siyaad. Siyaad maadaama ay waalidintiisa dhinteen asagoo yar waxa korsaday Ismaaciil.

Axmed wuxuu sameeya Jidh-dhis isaga oo qaada biraha cululis ee jidhka adkeeya. Cuntadane aad ayuu u cunaa. Sidaas daraadeed, Jidhkiisu aad ayuu u dhisanyahay. Axado waxay meeydhaa dharka. Siyaadne wuxuu nadiifiyaa qolka la seexdo. Axmed, iskabadaa hawl uu qabtee marka cuntada loo kariyay la soo hoos dhigo xataa ma doonanayo biyo, haddii dhakhso loo keeni waayane wuu xanaaqi, dugsigane maadama uu yahay nin xoog baddan oo murqo-waa waayn ardayda wey ka baqdaa imtixaankane wey u qishaan.

Dhinaca kalane Siyaad, intu dugsiga aado, laylisyada loo soodiray ka shaqaayo, shaqada xaafadane wax ka qabto ayuu aadaa geerash ka Ismaaciil si uu garab u siiyo. Siyaad wuxuu sidaas u yeeli Jiray maanuun doonayn in uu noqdo dulsaar. Ismaaciil inkaste oos ku farxay xaalada Siyaad hadane wuxuu ka xumaaday tan Axmed.

Maalin ayuu iskugu yeedhay labadooda wuxuuna ku yidhi “anigu waan gaboobay sidaas daraadeed waxaan doonayaa in aan labadiina mid ku wareejiyo maamulka geerashka. Bal marka hore waxaan idinka qaadi Imtixaan yar oo ku saabsan aqoonta aad u leedahiin geerash “Siyaad intuu dhakhso u soo booday ayuu yidhi waa yahay”.

Axmed laakiinse maadaama uusan waxba ka aqoon geerash wuxuu noqday mid aan isku filayn iskuna kalsoonayn. Wuu xanaaqay wuxuuna yidhi “Aabe aniga waxaan ahay ilmahaada sidaas daraadeedne lamatartamayo dulsaar.” Ismaaciil oo og xaalada ayaa aad uga xumaaday Jawaabta Axmed kuna yidhi wallee “dulsaar waa adiga ee Siyaad ma aha.”

## Isku filaansho

### Layliksa 2aad

Idinka oo ku salaynayo sheekada ka jawaaba su'aalaha

1. Ismaaciil marka uu leeyahay Siyaad dulsaar ma ehe muxuu u jeeday?
2. Waa maxay arinta ka hor istaagtay in uu Axmed isku kalsoonaado oos galo imtixaanka?
3. Idinku fikirkiina Axmed iyo siyaad midka leh aragti dulsaarnimio waa kee?
4. Maxaa Axsmed la gudboon in uu qabto si uu mustaqbalka u noqdo muwaadin is anfaca oo kalsooni leh?

Dulsaarnimadu waa baahidada aad qabtid ee dhinacyada fikirka iyo dhaqaalaha ood ka sugtid in ay cid kale kuu qabato. Dulsaarnimada waa in qofku aamino in uusan naftiisa ku filaan karin ilaa uu gacan ka helo cid kale mooyeen. Waxay inaga dhigi kuwa aan wax awood ah u lahayn in ay rabitaankooda ku socdaan, xoriyadeena aan cid kale siino.

Dul saarnimadu, dadku waxay ku tiirsan yahiin aqoonta, xooga, dhaqaalaha, aragtida iyo kartida cid kale. Waxay horseedaa dhibaatooyin badan oo isugu jiro dhinacyada dhaqalaha, sumcad oo hoos u dhacda, go'aan qaadasho la'aan, jiho wareer iyo mustaqbal aan haboonayn

### Layliska 3aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socda

1. Waa maxay sida ay dulsaarnimadu inooga dhigayso kuwa aan kor u qaadi karin aqoontooda?
2. Sideey dulsaarnimadu inooga qaadaa kalsoonida?
3. Sidee ayeey dulsaarnimada inooga qaadi kartaa xoriyadeena?

### 8.2.2 Dulsaarnimada Bulsho ahaaneed iyo tan Dhaqaale

- Sheega sida ganacisga sharcidarada ah ama koontiroobanku u waxyeelayn karo dhaqaalaha iyo noolasha bulshada

# Googaa/Cigale

## Googaa/Cigale(1)

1.Googaa cigale

Su'aal: waa maxay koontiroobaan?

Jawab: Rashin aan tayolhayn,iyo dawooyin ama badeeco aan la tijaabin oo dalka la soo galiyo.

Su'aal: maxaa kale

Jawaab: hub lasoo galiyo, maan

dooriye iyo daroogo, xadka ood huumasho lagusoo gala, wuxuu

hoos u dhiga nabada iyo caafimaadka shacabyoowga.

## Googaa/Cigale (2)

2. Googal/cigale

Su'aal: koontiroobaanku wuxuu wiiqaa

dhaqaalaha dalka, wuxuuna dalka u

horseedi in uu noqdo dulsaar. Yaa

arintan in oo faah faahin?

Jawaab: Anaa faah faahin, Badeecada iyo alaabada oon canshuur laga bixin oo dalka lasoo gaasha ama looga saaro

Suaal: Haddaba maxaa xal ah?

Jawaab: si dalkeen u uga mid noqdo kuwa horumaray ogana bad baado dulsaar iyo dayn ama gargaar, waxaan la dagaalamaynaa kuwa la baxsada canshuurta dalka kuna hawlan ganacsiga kontiroban ka

## Isku filaansho

### Layliska 4aad

Idinka oo ku salaynayo sheekada googaa/xigale ka jawaaba su'aalaha :

1. In taad si wanaagsan u akhridaan googa xagale ee kor ku xusan, balidinka oo labo labo ah ku soo bandhiga fasalka sida xeerka dhaqanka googaalaysiga.
2. Iska dhexdoorta mid af hayeen ah iyo mid xoghaye noqda. Kadib dhibaatada ganacsiga koontiroobaanka u keeno dalka ee dhinacyada bulshada iyo dhaqaalaha ee ku xusan googa/xigale sheekada ah ka dooda.
3. Marka badeecadaha dalka soo galayaan ama ka baxayaan waxaan inta baddan maqalaa waa la qabtay. Badeecada oo laqabto ka liah waliba ma ehee waxa sharciga la hor keena kuwa sita laguna xukamaa ganaax lacag iyo xabsi. Hadaba ganacsiga koontiroobaanka muxuu ku mutaystay waxan oo dabagal ah baad isleedahiin?

"Ganacsiga Koontirobanka ah" /ganacsi sharicdaro ah/

Waa hanaan ganacsi oo xaaraan ah kaas oo inta lagu xadgudbo sharciga dalka alaabo/badeecooyin aan canshuurta laga bixin dalka si dhuumasho ah lagu soo galiyo ama looga saaro. Waxaa meesha ka baxa dakhli baddan ay dawlada soo xarayso iyo lacaga adag oo loo adeegsan lahaa in lagu fuliyo adeegyada bulshada.

Dhinaca kale waxuu lagu soogaliyaa waxyaabo baa biin kara dhaqa meedana iyo caadooyinkeena sida cajalo filimo aan haboonayn, sawiro, boostara, iwm. Wuxuu suurtagalin karaa xataa in hub sharcidaro ah dalka loo soo galiyo kaas oo loo adeegsado in lagu waxyeeleeyo amaanka bulshada iyo dalka. Waxaa lasoo galin dalka badeeco iyo dawooyin aan tayadooda la baadhin iyo alaabo tayadooda aad u hoosayso.

Ganacsiga koontiroobanka meeha qaar dunida maanta ay ka jiraan dambiyada abaabulan asaga ayaa u sababa ah. Waxaa dhuumasho lagu soo galin waxyaabaha muqaadaraadka sida daroogada, xashiishka taas oo horseedi karto dhibaato baahsan oo dhinacyada bulshada iyo dhaqaalahaba.

### Layliksa 5aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socda :

1. Qora dhibaatada dhaqaale iyo tan bulshe ee ganacsiga kantiroobaanka u gaysto bulshada.
2. Waa dad dhaqan iyo dabaceed caynkee ah leh kuwa ka qayb qaata ganacsiga koontiroobaanka

## 8.3 Isku kalsooni

### 8.3.1 Wadooyinka lagu muujinkaro isku kalsoonida

- Qora astaamaha aad leedahay waxaa lagu garan karaa isku kalsoonida.
- Sheega dugsiga dhexdiisa dabeecadaha lagu yaqaan ardayda isku kalsoonida leh?

### Natiijadii Ardayga

Macalin ayaa ardayda afka uga sheegayay natiijada imtixaanka. Arday ayaa arinta oo lagu guda jiro ku yidhi arday garab fadhiyay “macalinka natiijada ayuu iga khalday”. Saaxiibkiisne “war naga amuusan” haddad weydisid wuu ku canaan ayuu ugu jawaabay. “Aniga waan hubaa, waan ka dhaadhicin karaa” ayuu ku yidhi. Inta uu istaagay ayuu ku yidhi” macalin? Dhibcahayga natiijada wey khaldanyaahiin.” Macalinkii Intuu soo booday ayuu yidhi waraaqahiina imtixaamka intaan si sax ah u saxay ayaan ka guuriyay natiijada”. Laylisyadii aadnasiisan dhamaan waan ka shaqeeyay imtixaankane iguma adkaan maadama aan si fiican u soo akhriyay waan hubaa in aan ka shaqeeyay tanine ma noqonkarto natiijadayda macalin ayuu ku jawaabay ardaygii.

Macalinkii maadama cabashada ardaygu sax ahayd wuxuu ku noqday xafiiskii dibne u eegay warqadihii imtixaanka. Ka dib natiijada ardayga markii uu warqadiise eegay macalinku aad ayuu u dhaka faaray. Sababtoo ah dhibcaha ardayga aad ayeey u sareeyeen. Inta uu macalinkii ku laabtay faasalka ayuu ardaygii raali galiyay.

## Layliska 6aad

Idinka oo ku salaynayo sheekada, ka jawaaba su’aalahan

1. Ardayeey iska dhexdoorta qof afhayeen ah iyo mid xoghayn noqda. Kadib idinka oo ka duulayo sheekada kor ku xusan waxaad faahfaahisaan arimaha ku dhaliyay in uu ardaygu yeeshoo ficilada isku kalsoonida, ku dhee hantahay.
2. Idinkaba haddii sidii ardaygii fariidka ah idinla soo daristo dhibaata sidan oo kale ah maxaad sa mayn lahaydeen?
3. Sheega sababta ku dhalisay macalinka in uu aqbalo fikradii ardaygii fariidka ahaa

Isku kalsoonida waxay si toos ah u la xidhiidhaa isku filaanshaha. Qof ku nool dulasaarnimo sinaba uma noqon karo muwaadin leh isku filaansho. Waxaa loo baahanyahay in uu la yimaado dhaqan shaqo si uu unoqdo mid isku kalsoon. Qofka Isku kalsoonida leh waa mid ka aaminsan shaqsiyadiisa fikir wanaagsan.

Dadka isku kalsonida leh waa kuwa aqbala fikradaha dadkale leh, la yimaado dulqaad, diyaar u ah fikirka in lawaado, go’aan qaadasho leh, khaladkiisa qaata kana barto wax. Waaa kan aan la gaban fikir kiisa si madax banaane usoo bandhiga, ixtiraamo fikradaha dadka kale.

## Layliska 7aad

Ka jawaab su’aalahan soo socda

1. Maxaa loogu baahanyahay isku filaanshada haddii aad leedahay isku kalsooni?
2. Qora dabeecadaha gaarka u ah dadka leh isku kalsoonida

# Isku filaansho

## Gebogabada Cutukba

Isku filaanshaha waa arin la xidhiidha islamarkaane ku xidhan sida hadba diyaar loogu yahay in dhaqan shaqo lala yimaado masuuliyadne ku dheehentahay. Isku filaanshaha waxay suurta galisaa in la yeesho isku kalsooni. Waxay inoo horseedi sidii aan u wada noolaan lahayn saboolnimadane ugu bixi lahayn. Dhanka kale, dulsaarnimada waxay kugu riixdaa dhanka rajo beelka iyo in aad aamintid waxbo in aadan qabansankarinba.

Ganaciga kontiroobaanka (Sharci darada) ah wuxuu waxyeelo ba'an ugaysto dhaqaalaha dalka iyo shacabka. Waa fal dambiyeed lagula baxsado canshuurta dowlada. Sidaas daraadeed, waa masuuliyada dhamaan muwaadiniinta in lala dagaalamo falkaas.

Waxaa muhiim ah in aan qaadano ficilada aan leenahay waxay u wanaagsan yahiin nafteena iyo bulshadaba. Isku filaansha iyo isku kalsoonidu waa labo arin oon kala hadhi karayn. Qofka leh isku kalsoonida wuxuu yeelanayaa isku filaansho.

### Erayada ugu muhiimsan ee cutubka

| | |
|---|---|
| Koontiroobaan: | Ganacsi sharcidaro ah kaas oo lagula baxsado canshuurta ,dalkane lagu soo galiyo badeeco tayo yar |
| Dulsaar: | ku dul noolaansho; qoka oo aaminaba in uusan is anfaici karayn |
| Isku filaansho: | kartida, kalsonida iyo ku tiirsanaanta aqoonta iyo xoogaada |

# Isku filaansho

## Su'aalaha Gebogabada Cutubka

Su'aalahan soo socdo ku guuriya buugaagtiina ka dibna ka shaqeeya.

I. Jim'lahadan soo socda uga jawaaba "Run" ama "Been"

1. Isku filaanshaha waxay dhalisaa dareen ah in aan ka gudubno dhibaatada.
2. Dulsaarnimadu waxay inoo suurta galisaa in aan si buuxdo uga faa'iidaysano xoogeena.
3. Dhib ayey nagu keeni haddii aan dadka kale uqabano hadba inta karaankeena ah.
4. Waxaan ku kalsoonaan karaan nafteena marka aan shaqsiyadeena ka aaminsanahay aragi fiican.
5. Si aan aragtideeena ula socodsino aragtida kuwan kale waa in aan qaadaan dhamaan waxa ay go'aan ku soo jeediyaan.

II. Kuwa hoosyaal xarafka "B" uga soo dooro xarafka "T"

| | B | T |
|---|---|---|
| 1. | Isku filaansho | B. wuxuu wax yeela dhaqaalaha iyo nabada shacbka |
| 2. | Arday aan isku filayn | T. isku kalsooni |
| 3. | Qof iska aaminsan fikrad fiican | J. dulsaar |
| 4. | In arin lafuliyo marka la filiyo | X. dood ku aamin siin fikradada dad kale |
| 5. | Ganacisga kontirbanka | Kh. Mid imtixaanada qisho a (dadkale ka eegto) |

III. Su'aalahan soo socdo ka dooro jawaabta saxda ah

1. Isku kalsoonida
   B. Qof walba hadii uu dadaalo tartanka oradka kaalinta kowaad wuu ku soobixi karaa
   T. Waa marka aad kartidaa iyo aqoontada ogaatid ka dibna dadaal ka samaysid sidii aad isku a fici lahayd.
   J. Waa ka fogaanshaha dulsaarnimada cid kale si aad u daboosha baahidaada dareen iyo mid dhaqaalaba
   X. Jwaabtu waa B & T
2. Isku filaanshaho si aad ugaadhid
   B. Waa in aad noqotid qof caan ah oo magic leh
   T. Waxay u baahantahay in waxyeelo lagu shaqeeyo.
   J. Waxay u baahantahay in naftaada aqoon uyeshid oodne adkaatid
   X. Waa T & J

3. Dadka isku kalsoonida leh
   B. Ma qaataan fikradaha dadka kale
   T. Wey ka baqaan in ay la yimaadaan arimo cusub
   J. Intay fikradaha dadka kale si anshax leh u dhagaysataan ayay daraan koodana ka dhaadha ciyaan dadka kale.
   X. Dhamaan waa sax marka B laga reebo
4. Dulsaarnimadu
   B. Wey fiicantahay maadaama dhibyari aad wax ku cunaysid
   T. Waxay hoos u dhigtaa niyadeeda waxayna inagu dhalisaa dareen ah in aan hooseeyno
   J. Waa arin aashu ah dhaqaalaha.
   X. Dhamaanba
5. Khalad kaada ood qaadatid waxay faa'iido la haanayso
   B. Marka loo saameeyo si looga badbaado canaanta iyo waxyeelada kuwa inaga xoogbadan.
   T. Marka loo sameeyo si loo ogaado waxa dhabta ah ee arinta
   X. Marka loo sameeyo si kuwa kale inoo amaanaan faa'iidana aan u helo.

### IV. Goobahan banaan ku buuxi erayada ama weedhaha ku haboon

1. Marka xuduudka laga soogalo ama laga bixiyo badeeco sharci daro ah waxaa looyaqa aan _______________.
2. Marka xili walbaaad ku tiirsantahay fikradaha dad kale_____________ ayaa loo yaqaan
3. Iyada oo loo maro dhanka dadka maamulka haya lacagta la bixiyo si hawl ama faa'iido aan haboonayn ________________ ayaa loogu yeedhaa.

### V. Su'aalahan soosocdo ka bixi sawaab gaaban

1. Qeexa dhibaatada dulsaarimada keento
2. Qora faa'iidad ay leeday in aad isku filaansho gaadhi
3. Maxaa loogu baahday in fikradeehana iyo aragtiyadeena aan fikradaha kuwa kale waa tajino?

CUTUBKA 9

# Dhaqanka Kaydsiga

Ujeedooyinka Cutubka: ka dib marka cutukban dhamaado waxaad:

- Ogaanidoontaan muhiimada kaydsiga.
- Garowsandoontaan in kharashka aanu iska bixino een loo baahnay oo la dhimo ay ka mid tahay dhaqanka kaydsiga.
- Fahmidoontaan sida noolaashada loogu hago qorshe islamarkaane loogu socdo awoodahaada dhaqaale.

## 9.1. Kaydsiga

### 9.1.1. Faa'iidada kaydsiga

- Magaranaysaan deegaankiina dad isku filaansho ku gaadhay dhaqanka kaydsiga? Intaad isbarbar dhigtaan noolashoodii hore dadkaas iyo mida hadda ay ku jiraan u faahfaahiya saaxiibadin.

#### Hinda iyo Walaalaheed

Hinda iyo labadeeda walaalood sanad ka kor ayeey Aabaheed iyo Hooyadeed ku geeriyoodeen shil gaadhi. Laakiinse xiligii ay waalidiintoodu noolaayeen maadama ay jirtay lacag ay kaydsadeen noolashooda weey fiicanayd. Hinda, maadama ay tahay gabadh caqli badan waxay walaalaheed si haboon ugu adeegi jirtay lacagtii waalidiinteen kuna waanin jirtay in ay si haboon u isticmaalaan lacagta ay siiso. Waxay walaalaheed ku sii jireen dugsiga ayna sii wateen waxbarshadooda.

"Waalidiintay waxay ahaayeen ku wa abaal aad u balaadhan nagu leh. Maaanta hadaynan iyga ahayn noolahsayadu…?" iyada oo leh ayay u maahad celinjirtay.

#### Layliska 1aad

1. Hinda iyo walaalahayd in aysan sii wadan lahayn waxbarashada hadayna waalidiintoodii u kaydin lahayn lacag ayaa sheekadu ina tusinaysaa. Hadaba, Waalidiinteed waxaa ay lacagta u kaydiyeen mawaxay ogaayeen in ay mar un geeriyeenoon doonaan mise ma aynay? Haddii jawaabtiinu tahay haa sideey ku ogaan karaan? Jawaabtiinii haday tahay maysan ogayn, sheega sababta ku kayntay in ay lacag meel dhigaan?
2. Sida sheekada ku xusan Hinda iyo Sidee luuga baahanyahay in ay u isticmaasho lacagta ay waalidinteen ka dhaxashay si ay u sii wataan waxbarashadooda dhib, la,aan?

# Dhaqanka Kaydsiga

Kaydsigu faa'iidooyin badan ayuu u leeyahay noolasha mustaqbalka ee qofka, qoyska, bulshada iyo dalkaba. Waxaa ka mid ah dakhliga iyo kharaska ku soo gala mudo koobaan ood meel ku kaydsatid waxay gacan ka gaysani in aad marka dhibaato aan la filayn timaado isticmaashid.

Kaydsiga wuxuu aad muhiim ugu yahay in lagu noolaado iyada oo la daboolo waxyaabaha noolasha aas aaska u ah waxaa ka mid ah cuntada, biyaha, dharka, iyo hoyga. Kaydsigu wuxuu suurtagaliyaa qofka, qoyska iyo bulshadaba in ay gaadhaan is ku filaansho.

Kaydsiga waxaa uu aad muhiim uga yahay dhinala waxbarashada caruurta. Marka aan guur sano, xanuunsano, gabowno, ama xaalad degdeeg ah nala soo daristo waxaan isticmaaleeynaa wixii aan meel dhiganay.

## Layliska 2aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socda

1. Inta aad eegtaan xaalada deeganka aad ku nooshahiin, sheega sida dhaqanka kaydsiga uga jiro halkaasi.
2. Sheega haddii ay jiraan wax idinkaba aad kaydsan kartaan ee heer kiina ah.

### 9.1.2. Hababka kala duwan ee kaydsiga loo dhaqangalyo

- Waa maxay marka aynu leenahay habka ama sida wax loo kaysada? Macalinkiina iyo saaxiibadiina fasalka u sheega.

Qorshahii dhicisoo bay.

*Deegaan Tuulo ah dadka ku dhaqan ayaa xili lagu wargaliyay in aan sanadkan wax roob ah oo fiican la filayn. Sidaas waxaa u sheegay saddalin ay sameeyaan khaburo xirfadlayaal dhanka cilmilada ah. Ka dib waxaa deegaankii u kicitimay koox xirfadlaaal ah oo beeraha aqoon u leh waxayna ku wacyagaliyeen bulshada deegaanka in ay si haboon u isticmaalan waxa ay kaydsadeen hadda ka hor maadama la filo roob yaraan iyo raashin la'aan soo wajahda.*

*Dhinaca kale mudane Guuleed iyo Xaaskiisa Faadumo ayaa waxay ku wada arinsan hayeen qorshaha sanadkan iyo ka soo socdo waxaay qabandoonaan.*

- In sanadkan ay geeyaan Kuliyada wiilkooda weyn ayuu Guuleed soo jeedayay faadumana way la qaadatay. Wiilkooda kale Maadama ay xaaskiisu dhalmo ku dhawdahay in ay timaado ku umusho xaafadooda inta ka hadhayne ka sii diyaar garoobaan dhaqaalaha ku baxa.

Marka sadexaadna in ay gurigooda ka samaysan cawska ugu badalaan jiingad. Qorshayaashan oo dhan waxay ku fikirayaan in ay ka fuliyaan sadexdooda dibi oo mid iibiyaan dalaga uyaal ee sadaxda kiish in aymid iibiyaan iyo walitaba Digaaga oo idil.

Laakiinse qorshahoodaas oo dhani waxay bilaabeen in ay ka fikiraan. Waxaa intaas dheer ay thay in ay ka fakaraan dhaqaalaha ka baxa reer kooda ka kooban sagaalka qof. Si kastaba si ay arimaha iyo qarshayaashooda mustaqbal u fuliyaa waa in ay marka hore isla eegaan dhaqaalahooda iyo waxaa ay tahay in ay ku dhaqaaqaan.

## Layliksa 3aad

Ka dooda su'aalahan soo socda

1. Mudane Guuleed iyo Faadumo qorshaha sanadkan u yaale waa meeqa?
2. Lacagta ay u qorshaynayeen in ay ku fuliyaan hawlahaas iyo awoodooda dhaqaale ma isku dheeli tiranyahin? Sidee?
3. Ma jiraan qaar qorshahooda ka mid ah oy tahay in la joojiyo? Jawaabtiinu "Weey Jirtaa" hadadd leedahiin sabab?
4. Faa'iido caynke ah ayaa ku jirto in la qaato lana dhagaysto talada xirfadlaha?

Waa muhiim in dakhliga mar ama marer kaladuwan ku soogalo loogu xisaabtamo in kaydsi noqonkaro. Waa kuwee qaababka iyo wadooyinka wax lagu kaydsado? Waxaan tusaale loo soo qaadan karaa hananka iyo siyaabaha ka laduwan ee wax loo kaydsada ee sida hoos ku xusan.

***B. In ladareeyo ama layska ilaaliyo kharashka iska baxa*** Kharashak iyo lacagaha iska baxa een loo baahnayn oo la yeero ama layskaba joojiyo waxay ka mid thay dhaqanka kaydsiga. Tusaale ahaan, Qoys ay Caruurtooda dugsiyada dhigtaan inta ay lacag ama kharash ka bixin la haayeen wax kale marka hore waa in ay daboolaana baahida waxbarashada caruurta.

***T. Qooyskaaga iyo Adiga oo ku socdo qorshe iyo hadba awoodaada dhaqaale*** Adiga iyo qoyskaadaba in ay ku socdaan qorshe iyo nidaam dhaqaale waxay ka mid tahay siyaabaha wax loo kaydsado. Sida dhaqanka Soomaaliduba in ay uu qoysas baddan isku keeno isuna kaalmayno waa wax nalagu yaqaano. Xaaladaha noocani oo kale ah waxay a baahanyahiin xoog iyo dhaqaale badan. Qoys tira badan wuxuu u baahanyahay cuno, daryeel caafimaad, dhar,hooy dhaqaale lagu bixiyo waxbarashada iyo hawlaha badan. Waxaa laakiin inta badan dhici karta in aan la helin dhaqaalaha iyo dakhli ku filan oo hawlahaas lagu filiyo.

Guud ahaan, waxaa muhiim ah in aynu ku socono qorshe dhaqaale oo ku salaysan awoodane dhaqaale. Waa in aan iska ilaalino waxyaabaha kharashka iska baxo ee aan wax qorsha ah ku fadhiyin.

***J. In aad lacag kaydsadid*** Waxaa ka mid ah sida in aad Baanka ka furato buuga xisaabta/Akown,ama aad hagbad (Jamac), iskaashatada daymaha ku biirto iwm. In aad wax kaydsato uma baahno lacag badan  waxaad ka bilaabi kartaa waxooga yar.

## Layliska 4aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socdo


1. Waa maxay marka la yidhaahdo qorsha iyo awoodaada dhaqaale ha lagu socdo?
2. Qoyskiina ama deegankiina dhexdiisa waxyaabaha kaydsiga ee aad leedahiin waa la isticmaala qortaan ugu akhriya saxiibadiina fasalka.
3. Qoysaskaiina dhexdooda qofka aad leedahiin wuxuu furtay buuga bangiga ama wuxuu ka mid yahay iskaashato sida hagbada, Jamac ama kuwa kale ay uu ka mid ah haduu u jiro weeydiisaan su aalahan soosocda Jwaabaha

qoral ahaan ku soo jeediya una gudbiyo macalinkiina.

B. Wakhti intee la eg ayeey kauqaadataa marka lacag bangiga dhigayaan? Marka ay ka soo bixinayaane?

T. Marka bangiga ay doonaan in ay lacag ka soo saartaan waa marka ay dhibaato caynkee ah lasoo daristo?

## 9.2. Ficilada Waxyeelayn karo dadaalka kaydsiga




Jaantuska 9.1 Ficilo Waxyeelaynkaro Kaydsiga

- Sheega waxa aad ka idiinka muuqdo sawirka sida ay u waxyeelayn karto dadaalka kaydsiga.

B. Xafladaha kharashaka baddan lagu bixiyo.

- Deegaankiina dadka aad leedahiin waxay u qabsadaan xafladaha si awoodooda dhaqaale ka sarayso qora.

"Dhibaatadii is ku Uruurtay"

Khadar iyo Kafiya dharka ay dugsiga ku aadan markii loo iibay sadax sano ka hor ayeey ahayd. Maadaama ay lahayn dharka kale ooy is kaga badalaan waxay u dayacmeen si xun. Weey dil dilacceen oo waxaaba badalmay midabkoodii. Waalid koodne wuxuu ugaj awaabay markay weeydiiyaan waxaan u diyaar garoobeynaa dabaal daga sanadka cusub wiixii dhaqaale ahne halkaas ayaan si fiican ugu ciidaynaa. Marka munaasabada ciidaha kale lagaadhane waxaan rabnaa in aan dadka kale si ayna wax nooga sheegin ku ciidno xoola badaan oon qalo.

### Layliska 5^aad

Idinka oo ku salaynayo sheekada ka jawaaba su'aalahan.

1. Qoyskan dhibaatadooda ugu wayn waa maxay?
2. Dhibaatadan sidee ayaa looga bixi karaa?

***B. Fikradaha iyo aragtiyada dib u dhaca ah***

- Sheega fikiradaha aad ka taqaanaan aragti dib u dhac ah.

Qayladii Qorana iyo Xaas Kiisii

Qorane iyo Xaaskiisa Qarad waxaa aad ugu xan uunsan gabadhooda Sahro. Markaas si ay u ogaadaan xanuunka gabadha waxay u socdaalane meel aad uga fog deegaan kooda si ay u la kulmaan nin halkaa jooga oo caada dhaqameed dadka dawo ugu sheego. Markay tageen Ninkii ayuu arkey gabadhoodii markaas ayuu ku yidhi gabadha waa laga dhax dhawaqay oo wadaadaa cunayo ee waxaad sor iibisaan lax madoow.

Qorane iyo Qarad weey soo iibiyeen laxdii madoobayd iuna keeneen ninkii ahaa dadka quraafaadka ka shaqeeya. Laakiinse wuxuu hadane u sheegay in ay u keenaan dahab gabadha

qoorta loo galiyo maadama waxa ka dhexqaylyayo uu jecel yahay dahabka.Waal iidka, Qorane iyo xaaskiisa oo dadka weydistay dayn. Ma aanay dhicin in ay helaan daynta. Waxaay ku labteen reerkii ay ka yimaadeen soona iibiyeen labo neef oo geelooda uga hadhsanayd. Dahabkii ayayna u keeneen ninkii. Waxaase aad walwal ugu dhalisay Qorane iyo xaaska ayaga oo reerkii hantiidiissi oo dhan ku bixiyay gabadha iyo gabadhii oo wali waxii uu hayo, hantine farahooda ka baxday. Xataa u maheli karaan caruurta wax ay dhar iyo buugaag ugu iibiyaan.

## Layliska 6aad

Su'aalahan soo socda ka jwaaba

1. Araagti dib u dhac ah waa maxa?
2. Fikrada sheekada kore ku cad ee Aragtida dib u dhaca ah ee Qorane iyo ugaystay wal walka iyo walaaca oo kale in ta aad qoysaskiina weeydiisan macalinka ugu soo gudbiyo qoraal ahaan.

Aragtiyada dib u dhaca ah iyo dhaqama xun xun waxay leeya hiin xoog ay dadka waxaanay karayn ku qasba in aysameeyaan. Tusaale ahaan, inta hantida iyo dhaqaalaha yar ee qoyska la dhaafiyo in loo geeyo dadka waxs heega ama quraafaadka akhriya.

Mida kale ee aragtiyada dib u dhaca ah waa gabdhaha oo laga soo qaado in ay ka hooseeyaanwiilsha . Arintan waxay ku dhalisaa gabdhaha in aanay shaqayn hanti ay leeyahiina abuurin.

## Layliska 7aad

Ka jawaab su'aalahan soo socda

1. Sidee ayeey falalka aragtida dib u dhaca ah ugu keentaa dadku in aysan noolashooda kor u qaadin?
2. Sheega deegaankiina xaaladaha ama hadalada aad leedahiin waa lagu dhaqmaa ee aragtida dib udhaca ah.

## 9.3. Saboolnimada

### 9.3.1. Halista Saboolnimada



Jaantuska 9.2 Astaamaha Saboolnimada

- Idinka oo eegaya sawirka dusha ku yaala, shhega khatarta gaajadu leedahay.

Saboolnimada waxay hoos udhigtaa rajada. Saboolnimdu waxay kalagaysaa dadka is jecel. Saboolnimadu sumcada ayeey baa biisaa. Saboolnimadu labo nooc ayaa loo eegaa. Midka koobaad waa saboolnimada lacagta. Tan kalane mida aragtida ama fikirka. Labadoodaba waa astaamaha muujinayo in lagu noolyahay noolalal aad u hoosayso. Waxay labadooba horseedaan dulsaarnimo.

Qofka leh saboolnimada fikirka shaqoma qaadanayo Si adagne oo hawl karnimo ku

dheehaatahay uma shaqaynkaro. Wuxuu ku noolyahay xooga dadka kale. Saboolnimada fikirka waxay aaad uga xun tan lacagta.

Saboonimada lacagta waxaa lagaga gudbi karaa iyada oo dadaal shaqo lasameeyo qorshe lagu socdo. Laakiinse saboolnimada fikirka waxaa badali karoo oo kali ah in lala yimaado isbadal aasaasi ah op ku dhisan fikir ku yimaado waxbarasho.

## Layliska 8aad

Ka jawaaba su'aalaha soo socda

1. Qora saddex ka mid ah dhibaatooyinka ay horseedi karto saboolnimada
2. Intaad sheegtaan sida saboolnimada iyo shaqo xumida isugu xidhanyahiin qoraal ahaan ku seejidya una gudbiya macalnikiina.

### 9.3.2. Hantida iyo lacagaha oo la khasaariyo waxay la safan tahay saboolnimada

- Waa maxay qofka loogu yeedhiyo khasaariyo ama baabiiye? Saboolnimada maxay kaga mideysanyahiin?

Waxyaabaha saboolnimada dhaliya waxaa ka mid ah khasaarinta am xad-dhaaf marka loo isticmadlo hantida iyo lacagta. Marka aynu leenahay khassriya ama qof xad-dhaaf u isticmaala waxaan u jeednaa in hantida iyo lacagta loo bixi si caqli ka fooq ah oo xad lahayn. Waa dhaqaalaheena oon sabab la'aan ku bixino waxaan macno lahayn. Tusaale ahaan, qof ku jiro jamac ama hagbad, marka xiligiisa qaato xadka bax ah u adeegsado sida xaflado aan loobaahnayn, ama qalabka adeega fuliyo soo si aan haboonayn loo isticmaalo. Qodobkan haddan tusaale ahaan soo qaadano,Haddii an qof wada gaadhi faris mar walba daryeelo Gaadhiga, nadsiifiyo si habon u adeegsedo islamarkaane Fariska si wanaagsan u quudiyo wuxuu ku shaqaysani mudo dheer.

## Layliska 9aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socdo

1. Waa maxay siyaabaha lagu xoojin karo dhaqanka kaydsiga?
2. Hantida oo la khasaariyo waxay aas aas u tahay saboolnimada. Sida ay arintaas ku noqon karto koox koox fasalka dhexdiisa uga dooda.

### 9.3.3. Saboolnimada si loo tiritor waa in kharashka baxo la naaqusiyo kaydintane la dhaqan galiyo

- Waa maxay arimaha suurtagalin karo in kharashka baxa la naaqusiyo?

Si hoos loogu dhiga kharashka baxa waa inmarka hore la ogaado kuwa muhiimka ah iyo kuwa aan loo baahnayn. Tusaale ahaan, Nin beeraleey oo kuu nool tuulo laydh aan lahayn haddii uu iibkeeno Dibigiisa si uu ugu iibsado laambad waa sax, laakiinse hadduu u iibiyo in uu dabaal dag xus ku sameeyo taasi waa arin aan haboonayn.

## Layliska 10aad

1. Idinka oo ka duulayo xaalada dhabta ah ee deegaanka aad ku nooshahiin waxaad kala dhig dhig taan kharashka aan loo baahnayn iyo kuwa ay tahay in la bixiyo loona baahan yahay tusaale ku soo bandhiga.
2. Dood kooxeed ka yeesha sida kharashka is ka baxo oo la naquusiyo gacan ugu gaysan karo hoos u dhigida saboolnimada.

# Dhaqanka Kaydsiga

## Gabogabada Cutukba

Dadku si ay uga baxaan saboolnimada uguna noolaadaan noolala dagan waxaa muhiim ah in ay yeeshaan dhaqan kaydsi. Kaydsiga oo la cadaysto faa'idooyin baddan ayuu leeyahay. Wuxuu naga dheereeyaa saboolnimda iyo dulsaarka, makra aynu gaboowno ayaan istic maalaynaa, waxbarashadeena ayuu gacan ka gaysan ama haddii uu xanuun yimaado iyo guur waan isticmaalaynaa waxii aan kaydsano.

Wadooyin badan oo lagu dhaqan galiyo kaydsiga ayaa jira. Waxaana ka mid ah in aad hadba awoodaada dhaqaale ku noolaato. Si aad lacag dhigaal ah uyeelatid waxaa muhiimah in lagu xisaabtamo kharashka ku soogala si haboona loo isticmaalo.

Si dhaqanka kaydsiga loo xoojiyo, waxaa muhiim ah in la ogaado waxyaabaha carqalada ku noqon karo kaydsiga. Waxaana kamid ah xafladaha awoodeena ka sareeyo een samayno, sida aroos kharash badan, munaasabadaha dabaaldagyada.

## Erayada ugu muhiimsan ee cutukba

| | |
|---|---|
| Saboolnimo: | Dhibaato,Faqri, Gaajo,Dhaqaale la'aan |
| Khasaarin: | lacagta oo siaan haboonayn loo adeegsado, qorshe la,aan in lagu socdo. |
| Hanti: | lacag,maal, rasamaal |
| Amaah: | balanqaad aad samaysad in aad bixin doontid ama lacag mustaqbalka deena sidaas la gugu siiyo. |

## Su’aalahan gebogabada cutukba

Su’aalahan soo socda intaad ku qortaan buugaagtiina kadib ka shaqeeya.

### I. Jimladahan sosocda uga jawaaba “R” ama “Been”

1. Sida qofkii faqiirk ahaan jirayba taajirka u noqonkaro kii taajirka ahaana faqiir wuu noqonkaraa.
2. Saboolnimada fikirka iyo mida lacagta waa labo isku mid ah.
3. Kaydsiga iyo saboolnimadu waa labo isla xidhiidha.
4. Qof hadii aanu amaadha qaadan sinaba ugama bixi karo saboolnimada.
5. Nooc kasta oo ka mid ah shaqooyinka hadaad ku hawlantahay kaydsigu waa lagama maarmaan.

### II. Kuwa hoosyaal xarfka “B” uga soodono kuw ku hoos qaran xarfka “T”

| B | T |
|---|---|
| 1. Saboolnimo | B. dulsaarnimo |
| 2. Goobaha kaydsiga ee dhaqan ahaaneed | T. kharash aan loo baahnayn oo iska baxa |
| 3. Khasaarin | J. isku filaansho |
| 4. Goobaha kaydisga ee casriga ah | X. baangiga |
| | Kh. Hagbad |

### III. Su’aalahan soo socdo ka dooro jawaabta saxda ah

1. Kaydsigu
   B. Wa hanti loo gudibyo ubadkaada.
   T. Xiliga shilkugu dhaco ayuu wax in oo qabani.
   J. Waa wax ehelka gaadhikara
   X. Dhamaanba
2. In layska reebo kharashka baxa een loo baahnayn waxay ka turjumaysaa
   B. In qorshe lagu socdo
   T. Qoyskaada ood cadibtid
   J. Waa adiga ood cadibtid
   X. Dhaamaanba

3. Khasaarin waa
   - B. In aan laga fikirin kaydsigaba
   - T. la'aanta dareen masuul iyadeed
   - J. Qorshe in lagu socdo
   - X. Jwaabtu waa B & T

4. WMka aynu leenahay dhaqanka kaydsiga oo la caadaysto wuxuu hoos u dhigi saboolnimada
   - B. Waa adiga oo isticmaala xoogaada dabadeedna ka qanacsanaado
   - T. waxay gacan ka gayssan in aanu qoysku kala tagin.
   - J. Jwaabtu waa B & T
   - X. Midnaba

5. Saboolnimada Fikiirka wax loo la jeedaa
   - B. In aan shaqada la jeclaan
   - T.In aan shaqada la jeclaan
   - J. In lagu socdo aragtiyada dib udhaca
   - X. Dhamaanba

## IV. Goobhan banaan ee sosocda ku buuxi erayda ama weedhaha ku haboon.

1. Ficilada waxyeeleeyo kaydsiga waxa kamid ah ____________ iyo ____________.
2. Hababka kaydsiga waxa laga tilmaami karaa __________ iyo ____________ .

## V. Su'aalahan soo socdo jawaab gaaban ka bixi

1. Tusaale ku faahfaahi sida dhaqanka kaysiga gacan uga gaysto tirtirada saboolnimada.
2. In taad labo ka mid ah waxyaaba saameeyo kaydsiga ee dhaqan ahaan dadku sameeyaan soo qaadataan, kadibna tusaale ku muuji.

# CUTUBKA 10

# ka Qaybgalka Firficoon Ee Bulshada

Ujeedooyinka cutukba: ka dib marka aad cutukan dhamaystaan, waa in aad:

- Fahamtaan muhiimada ka qaybgalka firfir coon ee bulshada.
- Ogaataan arimaha ka qaybgalka firfircoon u baahin ee deeganadiina.
- Ogaataan hawlaha ay fuliyaan deegaankiina ururada bulshada rayidhka ah ee ka hawlgalo.

## 10.1 Muhiimada ka qaybgalka firfircoon ee bulshaada



Jaantuska 10.1 Olole nadaafadeed ee dugsiga



Jaantuska 10.2 Ka qaybgalka bulshda ee hor umarka

- Ka lasaraara faraqa udhaxeeyo labada sawir.
- Waa maxay waxa keenay kala duwaanshaha labada sawir ee kor kuxusan? Kee baad u malay naysaan in uu ka turjamayo ka qaybgalka fifircoon ee bulshada?

### Hadalkii Maamulaheena

Dugsiga ka mid ah dugsiyada ku yaala deegaanka Soomalida gaar ahaan magaalada Filtu ayaa sida dhaqanka u ahaydba maamulaha dugsiga hadal u soo jeediyay ardayda furfitaankii sanad dugsiyeedka cusub. Wuxuuna ku yidhi, ujeedada iyo himilada dugsiga waa in la soo saaro muwaadiniin, karti, aqoon iyo anshax ku dheehantahay mu'staqbalkane la wareega dalka. Sidaas awgeed adeegyada waxbarasho ee uu dugsigu bixiyo waa in ay ahaadaan kuwo taya leh.

Wuxuu Maamulaha soo dhigay xaalada ka mid ah kuwa hortaagan in dugsigu lahaado tayo wax barasho. Waxaane dhibaatooyinkaas ka mid ah buu yidhi dugsiga oon lahayn adeeg biyo, oo ku filan, suuliyada oo ku yar. Xarun buugagta lagu akhristo/makhtabad oon Jirin, sheeybaadh la'aan ayaa ka mid ah arimahaas. Dhibaatada kalane waa iyado oo dugsiga markii ugu horeeysay yeelanayo arday qaadanayso imtixaanka fasalka 10aad oon haddane samayn diyaar garoow ku filan.

Dugsiga ardayda wax ka barto ma aanay helin fursad ay xiliga fasaxa ah ku kobciyaan aqoontooda. Waxaa hadaba bilaabay in waalidiinta soo dhexgalaan arimaha dugsiga si ay qayb uga gaystaan xal u helida waxyaabaha dugsiga hortaagan ee dhibaato ku ah waxbarashada caruurtooda. Waxa markaas laxaliyey inta badan carqaladihii dugsigane wuxuu helay adeeg biyo oo ku filan.

Waxaa la dhisay xarun buugaagta laga akhristo (laybreeri) maktabad; ardayduna waxay fursad u helaan in ay daalacdaan cashiradooda marka ay fasaxa yihiin. Marka laga yimaado doorka waalidiinta ee dugsiga. Waxa kale oo aas aasmay gudiyo ururo bulsho sida naadiga wadaniyada iyo anshaxa. Wuxuu ka sameeyay wacycgal in baddan ardayda dugsiga ee dhinacyada ka qayb qaadashada ardayda ee dhaq dhaqaaqyada kala duwan. Gaar ahaan, maadama uu dugsigu markii uga horeeyso ka dhacayo imtixaanka fasalka 10aad waxay gudiyada waalidinta, macalalimiinta, iyo kuwa bulshada rayidka ah suurtagalyeen in ardayda heelaan fursad dheeri ah oo dib loogu baro cashiradii ay qaateen, barayaashuna dadka sameeyaan sidii xili ka baxsan kan caadiga ay ardayda "loo caawin lahaa.

## Layliska 1aad

Idinka oo ku salaynayo sheekada kor ku xusan ka jawadba su'aalahan soo socda

1. Maxay ahaayeen dhibaatooyinkii dugsiga? Xal caynkee ah ayaasa loo halay?
2. Si dhibaatooyinka dugsiga xal loogu helo loona dhameeyo kaalin intee la eg ayeey waalidiinta ka gaysteen?
3. Ma jirtay kaalin wanaagsan oo ay ardayda dugsiga ka qaadan karen xal u helida dhibaatada dugsiga? Tusaale ka bixiya.
4. Inta aad ka duushaan xaalada dhabta ah ee dugiiga, waxaad soo dhigtaan shan arimood ood leedahaiin waxay dhib ku hayaan waxbarashada dugsiga ka dib dhibaato kasta xal keed soo jeediiya.

Hawlaha qaar ayaa loo fulin karaa si shaqsi shaqsi ah kuwa kalane waxay u baahany ahiin in si wadajir ah looga hawl galo si ay midho dhal u nooqdaan. Tusaale ahaan, hadii aynu nidhaahdo aan qabano ficilo lagu sugayo amaanka deegaankeena haddii dadaalka shaqsi ahaan aan la nimaadno ay badantahay xataa ma keenayso wax natiijo ah oo badan. Haddii aynu nidhaahno agagaaraheenu aynu ku xidhno deeganada u dhow dhow aanay garab ka helin bulshada deegaankaas majiraan xal aan ka ligeen soo hoyn karo.

Xaaladaha oo dhan waxay ina tusinayo sida ka qaybgaka firfircoon ee bulshada ku leeyahay

dhisida dareenka bulshada. Sida hadaba aynu ka sheekaynay ka qaybgalka firfircoon lagama midho dhalin karin si shaqsi ah. Dhaamanba bulshada midhaha ka dhasha ka qaybgalka firfircoon een kaalinteena ka gaysano wax ayaan ka helaynaa dhamaanteenba.

Hadaba sida Soomaalida u tidhaahadaba "gacmo wada jir beey wax ku goynkaraan" waxaa muhiim ah in layska kaashada arimaha hortaagan bulshada. Haddii dadku isku yimaadaan iskuna geeyaan xoogooda, caqligooda iyo xataa malkooda, waxaa mudo gaaban lagu xalin karaa dhibaato hor taagnayd bulshadaas; sida biyo la'aan, wax barasho la'aan iwm.

## Layliska 2aad

Ka jawaab su'aalaalahan soo scodo:

1. Haddii aad la kulantaan qof ku doodaya ka qaybgalka firfircoon ee balshada wax faa'iidda ah ma leh, cadaymo caynkee ah ayaad weydiin la haydeen in uu keeno?
2. Faah faahin gaabaan ka bixiya sida ka qaybgalka firfircoon ee bulshada faa'iido ugu leeyahay noolasha bulshada?

## Xaalada ka qaybgalka ee bulshada deegaanka Soomaalida

Dawlada Deegaaneedka Soomaalida wuxuu ka mid yahay sagaal deegaan ee JDFI ka koobantahay. Sanado ka hor deegaanka aad ayuu uga dambeeyay dhinacyada wax barashada cafimaadka iyo kaabayaasha kale ee horumakra. In kasto oo hadda la odhan karin dhaamaan waa la xaliyay dhibaatooyinkaas haddane waxaa jira isbadal la,taaban karo.

Wacyigalin badan ay dawlada ka sameysay ka dib waxaa suurto gashay in ay bulshada deegaankana ka dhaadhacdo in aysan dawlada oo kali ah wada dabooli karin baahida bulshada. Sidaas daraadad, in la garabgalo dawlada si loogaadho horumar in ay tahay masuuliyad saaran shacabka ayeey ogaadeen.

Maanta, deeganka Soomaalida arintu wey ka duwantahay sidii hore oo dadku wey ku baraarugeen ka qayb qaadashada hawlaha horumarka. Waxaa haddaba suurtagashay in ay kor u kacado xaalada waxbarashda deegaankeena. Dugsiyo badan ay dadweeynahu dhisteen kuna dhisteen ka qaybgalkooda, ayaa jirtaa dawladuna ay u dirto barayaal. Waxaa jira wada shaqayn ku aadan dawlada iyo dadka oo dhinacyada dhisida adeega bulshada. Waxaa dhacday in bulshadu keento xooga, dawladaduna keento Barayaal. Marka Goobaha qaar dugsigada iyo xarumaha sida caafinaadka, ceelasha biyaha waxaa lagu dhisay ka qaybgalka buslhada deegaanka.

## Shaqo kooxeed

1. Inta aad u kuur kashaan dugsiyadiina iyo deegaankiina adeegyada ay bixiyaan ka dibna soo qortaan sida bulshada ugu qayb qaadato dhinacyada waxbarashada ood qoraal ka

samaysaan ku soo jeediya fasalka dhexdisaa.

Sida uruu kastaba, dugsiyadana waxay leeyahiin bulsha ka mid ah kuwa dugsiga. Arin walba oo dugsiga ku saabsan waxay si xoog ah u taabanaysaa xubin walba oo ka mid ah bulshada. Xaalada nidaamka dimuqraadiga ah si balaadhan uga hirgalay, qof walba iyo kooxwalba oo ka mid ah bulshada waa in ay ka qaybqaataan arimaha khuseeyo dugsiga.

## Layliska 3aad

Ka jawaaba su'aalahan soosocoda

1. Nidaam ku dhisan dimauqraadiyad qof ka sheeqaalaha ka ah xifiis wax xil ahane aan ka hayn laakiin shaqaale caadi ah, ma ka qaybqaadan karaa go'aamada ku saabsan arimaha xafiiska ama fikirkiisa ma ka dhiiban karaa? Sabab? Sidee?
2. Idinkuse ma leedahiin way tahay in aan ka qayb qaadano arimaha iyo go'aamada dugsiganaga?

## 10.2 Faa'iidada Ay leedahay in laga qayb qaato ururada bulshada rayidka ah



Jaantuska 10.3 Wasakahynta Deegaanaka



Jaantuska 10.4. Olole lagaga soo horjeedo wasakhaynta deegaanaka

- Maxaad ka fahmeeysaan sawirada kur ka muuqda?
- Uruurka ka muuqda sawirka jantuska 10.4 maxay faa'iido ah bulshada u keeni karaan?

### Waan mudanahay in aan caruurnimadayda kunoolaado noolal ka dhowran sigaarka!

"Dunida ayuu ku noolahay waxaa jrra waxyaabo badan oo dhibaataynkara caruurta. Xeerarka caalamiga ah waxaa si cad ugu qeexan in caruurtu xaq u leeyahay in ay ka dhowranaadaan dhibaatooyinkaas. Idinkuna waxaa laydinka baahanyahay in aad iska ilaalisaan waxyaabaha dhibka iidiin gaysan karo" sidaas waxaa yidhi xubin ka mid ah ururka la dagaalanka cudarka Kaansarka ee Itoobiya oo 12 sano jira.

Dhamaanba dunida waxaa laga xusaa maalinta caalimiga ah ee kaansharka. Sandakan halku dhiga wuxuu ahaa waan madunahay caruurnimadada in aan ku noolaado noolal ka dhowran sigaarka! Waxaana la aaminsanyahay in ay tanine tahay hamiga dhamaan caruurta dunida.

"Sigaarku inta uu ka sii gudbo qofka cabahaya ayay ugudbiyaa waxyeelada dadka ka agdhow goobta. Dugsigeena ama ha noqoto goobaha kale dadka ku caba sigaarka waxaa haboon in ay ficil kooda ka taxadaraan. Dhamaanteenba haddii ay deegaankeena jiraan dad cabo sigaarka in aan u sheegno sidaasi ma fiicna waa masuulyad ina saraan." Sidaas ay uu yidhi wiilkaas 12 sano jirka ah.

Sida ururka kansarka ee caalamka ugu guulaysto fariintiisaas ah in dhalaanka dunida ku dhaqan mudanyahiin in ay ku noolaado hawo ka dhoowran sigaarka, waxaa loo baahanyahay dhamaanteen in aan u istaagno dhaqan galinteeda. Waxaa waliba aad muhiim u ah dadaalka caruurta, waalidiinta caruurta, iyo dadka jecel caruurtaba ee ku aadan hirgalinta arintan.

### Layliska 4aad

Idinka oo ku salaynayo sheekada kor ku xusan ka jawaaba su'aalahan soo socda:

1. Labada urur ee bulshada rayidka ah laguna xusay sheekada sheega.
2. Sheekada Wiilka yari maxaad ka fahanteen.

**Waxaad samaysaan hawlahan soosocda idinka oo ku salaynayo waxa aad sheekada ka fahanteen**

B. Soo jeediya ficil kaasoo kale ah ood dugsiiga kaga aas aasikartaan urur bulsho rayid ama naadi.

T. In taad fahfaahisaan faa'iida ka dhalan karta uruka ama nadiga aad sojeediseen kadibne qoraal ka sameeya.

J. Idinka oo ka duuliya arintan, waxaad soo bandhigtaan sidii aad ardayda dugsiga uga dhaadhicin la haydeen in ay xubin ka nooqdaa naadiga ama ururka

Ururada bulshada rayidka waa kuwa ay aasaasaan dadweyne si kala gaargar ah ama isku yimid oo doonayo inay gaadhan u jeedooy in kooda dhaqaale iyo bulsho. Waa ururo ay sameyeen dad si madax banaan iyo rabitaankooda ku soogala. Waa ururo ka madaxbanaan dawlada una aas aasma si sharci ah. Sidaas daraadeed, hanaanka dimuqraadiga ah, waxay ururadina u suur tagalayso in ay bixiyaan adeegyo dhinaca bulshada iyo wacyigalinta dadka.

Ururada bulshada rayidka ah waxay leeyahiin faa'iidooyin badan. Waxaa kamid ah; inay fuliyaan hawlaha aanay dhaqaale yari awgeed dawladu dabooli karin. Waxay qaban qaabiyaan ama abuuraan wadooyin ay dadku uga doodi karaan siyaasada dawlada iyo sdii ay u fahmaan una xoojiyaan nidaamka dimuqraadiyada. Waxay ururadan bulshada rayidka ah ku wacyigaliyaan bulshada sidii loo tiritiri lahaa dhaqamada iyo caadooyinka xun xun.

## Layliska 5aad

ka jawaaba su'aalahan soo socdo

1. Qof waaya arag ah oo lagu yaqaan dadaal shaqo intaad xog ka soo uruurisaan qoraal gaaban ku soo jeediya.
2. Qora faa'iidada ururada bulshada rayidka ah

## Gebogabada Cutubka

Ka qaybgalka firfircoon ee bulshada wuxuu kaalin muhiim ah ka gaystaa horumarka bulshada iyo dhisida nidaamka dimuqraadiga ah. In la dhiso nidaam dimaqraadi ah, la soo hoyo horumar deg deg ah, laguna daamanad qaadi karo tirtirada saboolnimada waxaa dhamanba mmuwaadlinta looga baahanyahay in ay la yimaada ka qaybgal firfircoon. Ka qaybgalka firificoon waxaa la tilmaami karaa tusaale ahaan, xuquuqda si xor ah isugu imaatinka. Isku imaatinka ama is ababulida waxay horseedaa in xoog balaadhan meel layskugu geeyo ka dibna arin si habon loo fuliyo.

Urarada bulshada rayidka ah waa natiijada ka dhaltay xoriyada isu imaatinka. Dadka kala duwan ayaga oo gaar ama koox koox ah ayeey samaystaan ururo si ay u fushadaan ujeedooyinkooda dhaqaale iyo kuwa bulsheed. Ururadan ayaga oo ka madaxbanaan

dawlada ayaa waxay fuliyaan adeeg bulsho oo hufan kaalin muhiim ahna ka gaystaan dhisida nidaamka dimuqraadiga ah. Waxaa kale oy u dhaxeeyaan bulshada iyo dawlada ayaga oo si dimuqraadiyad ku dheehantahay uga hawlgalo wacyi galinta bulshada ee siyaasada dhaqaalaha rayidka iyo horumarka dalka. Ururada bulshada rayidka ah ee wanaagsan waxay gacan ka gaystaan in la dhiso dhaqan shaqo oo ku salaysan isu dulqaad iyo wada jir wax u qabasho.

Idinkuna iyada ood ku salaynaysaan arimaha waxaad hadda laga bilaabo xubin ka noqonkartaa ururada bulshada rayidka ah ee deegaankiina si aad kaalinta muwaadinimo ee kaaga aadan ooga

### Erayda ugu muhiimsan ee cutubka

| | |
|---|---|
| Kaqaybgal: | ka mid noqoshada arimaha, hawl laqabanayo. |
| Firfircoon: | uga qaybqaadashada hawsha si fur furan oo dhaqdhaaq muuqdo. |
| Ururada bulshada rayidka ah: | xubno kooban oo ka mid ah bulsho oo isu tagay si ay u fuliyaan dhaq dhaaqyo horumarin, wacyigalin, iwm. |

## Su'aalaha Gebogabada Cutuka

Dsu'aalahan soo socdo intaad ku guurisaan buugaagtiina ka dibna ka shaqayeeya

### I.Jimaladahan soo socda kaga jawaaba "Run" ama "Been"

1. Ka qaybgalka fir fircoon ee bulshada faa'iida ka dhalato waa mid shaqsi oo kali ah.
2. Maadaama ay dunidan casriga ah ka jirto tartan dhinaca noolasha ah, waxaa hawl kasta lagu fulin karo waa si shaqsi shaqsi ah oo kali ah.
3. Jacaylka aanu ehayno shaqada waxaan ku muujin karaa oo kali ah in aan shaqada ka sheekayno.
4. Si ururada bulshada rayidka ah isugu yimaadan uno fuliyaan hawlo waxaa muhiim ah in lahelo nidaam dimuqraadi ah.
5. Ka qaybalka firfircoon ee bulshada waxay dhalisaa dareenka dhaqanka shaqada.

### II. Kuwa ku hoos qoran xarafka "B" uga soo dooro xarafka "T"

| B | T |
|---|---|
| 1.Hawl shqsi ahaan loo fuliyo | B. Qoyska, tuulo,degmo, Kilil iyo daly |
| 2. Faa'iidada ururada bulshada rayidka ah | T. La'aanta ka qaybgalka firfircoon |
| 3. Xubnaha heliya faa'iida bulsheed | J. Ururuda bulshado rayidka |
| 4. Wax ka madax banaan faragalinta dawlada | X. horumarka deegaan |
| 5. Nidaam dimuqraadiah | Kh. Gacan siinta hawla dawlada aanay fulin karin oo qudha |
| | D. Cadaadis xaga dhaqanka ah |
| | R. Xaalad suurtagalinayso ka qaybgalka firfircoon ee bulshada |

### III. Su'aalahan soo socdo ka dooro jawaabta saxda ah

1. Midee Kee yaa ka midaah faa'iidada ururada rayidka ah?
   - B. Xubnaha oo la gaadhisiiyo maamul siyaasadeed.
   - T. In ay dawlada booskeeda galaan oy shaqeeyaan maadamaanayn lahayn awood
   - J. Abuurida xaalada uu shacabka uga qayb qaadan karo horumarka iyaga oo xoojinay siyaasada dawlada.
   - X. uhalgamid qaybaha bulshada ee dhiban kana qaybgalinta siyaasada

2. Ficilida  faa'iido keena karo
   B. Waa in si shaqsi shaqsi ah loo fuliyo
   T. Waa in wada jir loo fuliyo
   J. Waxay u baahantahay in sigaar gaar ah iyo si wado jira loo fuliyo
   X. Midnaba
3. Mideeba sax ah marka laga hadlayo ururada bushada rayidka ah?
   B. Waxaay ku aas aasmi karaan mid shaqsi ah aaneed mise mid koox kooxeed
   T. Waxay ku shaqeeyaan awaamiirta dawlada.
   J. Ujeedooyin bulsho ahaaneed mooyeen ma laha kuwo dhaqaale
   X. Midnaba
4. Xub nahan mika ka faa'iidaysanaya midhaha ka dhasha ka qaybgalka firfircoon ee bulshada waa?
   B. Dalka  T. bulshada  Tuuladaas
   J. Bulshada degmada  X. Dhamaanba

## IV. Goobahan banaan ee soo socdo ku buuxiya erayada ama weedha ku haboon

1. Ururada buslhada rayidka ah waa natiijada ka dhalata __________ ka isu imaantinka.
2. Haddii bulsho deegaan ku wada dhaqan hawl horumarineed si buuxda oo wada jir ah uga wada qayb qaataan ayna ka heelaan faa'iido balaadhan tana waxay cadayn u tahay _________ faa'iidada bulshada.

## V. Su'aalaha soo socdo ka bixiya jawaab gaaban

1. Qora labo ka mid ah faa'iidada ururada bulshada rayidka ah
2. Tusaale ka bixiya waxa ay ku kala duwanyahiin faa'iidooyinka bulshada ee ka dhalto ka qaybgalka firfircoon.

## VI. Su'aalahan soo socdo jawaab gaaban ka bixi

1. List two benefits of civic organizations.
2. Explain with examples the personal and societal advantages that are gained from active community participation.


CUTUBKA 11

# Aqoon Raadsi


Ujeedooyinka cutukba: ka dib marka cutubkan dhamado ardaydu waa in ay:

- Faahfaahiiyaan ilaha ugu muhiimsan ee aqoonta lagu helo.
- Iska fogeeyeen fikradaha iyo aragtiyada khaldan
- Ogaadaan sida loo xafido macluumaadka, xoojiyaane dhaqanka akhriska.

## 11.1 Ilaha Ugu Muhiimsan Ee Aqoonta Laga Helo



Jaantuska 11.1 Buugaagta Waa Ilaha Aqoonta



Jaantuska 11.2 Waxbarashadu waa Ilaha Aqoonta



Jaantuska 11.3 Dadku waa Ilaha aqoonta

- Dadka inooga muuqdo sawirka jaatuska 11.1 xagee ayeey ka helayaan Ilaha aqoonta laga helo?
- Ilaha laga helo aqoonta ee ka muuqo sawirka jaantuska 11.2. iyo 11.3 maxay iskaga mid yihiin? Maxayse ku kala duwan yihiin??

Aqoontu waa hanti dareen taasoo aanu ku helo khibrad ama waxbarsasho iyo waaya aragnimo ku waas oo dhameentood ku salaysan cadaymo dhab ah. Aqoontu waa awooda garaadka ama maskaxda ee qofka taas oo karti u siinayso in uu fikiro, wax eego, wax xaliyio. Haddii aynu xog helo waxaaynu ku salaynaynaa heerka aqoonta. Sidaas

daraadeed, geedisocodka loogu jiro aqoonta lama yaraysan karo doorka xogta ku ledahay.

Aqoonta waxaa laga helaa ilo kala duwan. Waxynu ka helaa buugaagta, Jaraa'iidyada, Tilifishenka iyo Adeecada, iyo walibo dadka iyo deegaanka. Deegankaanku wuxuu ka mid ah ilaha aqoonta. Waxaan aqoonta deegaanka oga helaa, sida maqalka, aragtida, daalacashada, taabashada iwm. Waa arimaha oon sitoos ah u eegno; taabano; urino, dhadhamino ama daalacano oon dhagaysano. Tusaale ahaan, deegaankeena Wabiyada ka jira oo yareeya xadiga biyaha ama siyaado, dhaqdhaqaaqyada horumarka ee deegaanka samaynta ay ku yeelanayso, waxaan aqoon uga helaynaa inaga oo si toos ah goobta u joogno.

Aqoon ku saleysan nidaam cilmiyaysan oo lagu xoojinayo natiijo cilmisaynis waxaan ka heli karaa dugsiyada. Tanine waxay suurta ga ku noqotay iyada ooy dugsiyada joogaan barayaal aqoon leh kuna takhasusay xirfado iyo madooyin kala duwan. Waxaa kale oo aqoonta ku heli karaa inaga oo akhrino qoraalo kaladuwan. Qalabyada warbaahinta ee Tlifishinka iyo Adeecadane waa ilo muhiim ah oo lagahelo aqoonta. Waxaa kale oo aqoonta laga heelo booqasho iyo socdaal lagu tago goobaha taariikhiga ah.

Marka aynu hadaba qaadanayo ilaha aqoonta laga helo sida warbixinada ama xogta, waxaa loo baahanyahay in aan si taxadar leh u isticmaalo. Sababtoo ah hadii qalabka war baahinta, jaraa'iid ama dadkaba aan ka helo xog aan sax ahaan ama la buun buuniyay, aqoonta aan helayno waxay noqonaysaa mid khaldan. Sidaas daraadeed, inta aynaan adeegsanin xogta aynu helo waa in aan iska baadhno halka ay ka soo baxday

## Layliska 1aad

Ka jawaaba su'aalaha soo socdo:

1. Ciwaanadan soo socdo intaad ka doorataan mid amaba ka macalinka idin siiyo ku soo uruuriyo warbixino ama xog ahaan isu gu duba rida siyaaba kala duwan.
   - B. Sida ay tahay xidhiidhka Waalidiinta iyo dugsiga;
   - T. Cudurka Shuban Biyoodka waxa dhaliya iyo waxa ay tahay taxadarka loo baahanyahay inla sameeyo;
   - J. Deegaankiina beeralayda, Xoola dhaqatada, ganacsatada ku dhaqan inta aad weydiisaan waxaay tahay dhibaatadooda aas aasiga ah iyo xal waxa ay u arkaan.
   - X. Waxa ay tahay kalinta waalidiinta ee hanaanka baris barasho.
2. Xogahan ama macluumadkan aad soo uruuriseen in ta aad isku duba ridaan u soo jeediya macalin kiina

## 11.2. Fikradaha iyo Aragtiyada Dib u dhacanimo

- Waa maxay fikradaha khaldan iyo aragtiyada dib u dhacnimo?
- Deegaankiina waxyaabo caynkee ah ood ku tirisaan aragtiyi dib u dhacnimo ayaa ka jiro?

**Macalimad Kaltuun**

Macalimid kaltuun ardayda ay waxbarto ee fasalka 6aad ayaa waxay udirtay in ay soo diwaangaliyaan waxyaabaha ay leeyahiin deegankooda waa aragtiyo dib udhac. Waxayna ku wada dood siisay fasalka dhexdiisa. Ardayduna waxay soo qoreen waxii ay islahayeen waa aragti dib u dhac. Arday kooban hadaan soo qaadano waxaan u soo dhiga karaa sidan soosocto:

Arday Baynax

Caruurta marka ay xanuunsadaan in geed dhaqameedyo lagula ordo xal ma ehe

Arday Qaalib

Gudniinka gabdhaha waa arin lid ku ah caafiimaadka

Arday Khaliif

Intaad u sii jeedsato dhinaca dayaxa hadaad kaadidid cudur ayaad ka qaadi

Arday Badri

Gabadh ardayad ah meelema gaadhayso

Arday Cigaal

Ilmo -Will ha ahaado

## Layliska 2aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socdo

1. Shanta Arday kuwa soo jeediyay aragtiyo dib u dhaca waa ku wee? Maxay sidaase u leeyahiin?
2. Idinkase astaamo aragtiyo dib u dhaca oo kuwan oo kale ah deegaan kiina ma ka jiraan? Bal intaad kolba sheegtaan kaga dooda fasalka.
3. Aragtiyadan iyo fikradahan khaldan maxay salka ku hayaan?
4. Fikradaha iyo aragtiyada dib udhacnimo side ayeey u waxyeelayn karaan dadaalka aqoonta?

Fikradaha dib udhaca ah waa caado iyo dhaqamo xun xun ku waas oon lagu salayn wax cadaymo dhab ah. Gaa rahaan marka ay nasoo wajahdo dhibaato dabiici ah ama mid bulsho waxaanu si xun ugu nugulaanaynaa fikradahan iyo aragtiyadan dib u dhacnimo. Matalnaba, haddan farasamo casri ah kaashan weeyo oo soo saaran weyno dalag wanaagsan, marka rob yaraan dhacda ama roobka siyaado, dalageena wuu baabi markaasne waynu baahani. Laakiinse hadaan isticmaalo farsamo casri ah oon beerano beeraha waxaan ka baxaynaa malo awaalka. Aragtiyada iyo fikradaha dib udhacnimo badanaa waa kuwo soo jiray mudo dheer; waxayna ugudbaan fac ilaa fac.

Dadka qaar ayeey fikradahan dib adhaca ah ku keenaan in ay waayaan xoolahoodii iyaga oo ku

bixiya wax aanay iska hubinin. Tusaale ahaan, marka qof xanuunsado hadii lola kaco dadka la'aaminsanyahay in ay leeyahiin karaamo oo kale. Dadkan waxaa laga yaaba in ay qoys caydh ah ku qasbaan inay soo iibiyaan xoolahooda si ay ugu daweeyaan qofka xanuunsan. Fikradaha qaar ayaa aaminsan in dadka ka mid ah ama ka tirsan bulsho gaarah ay ka hooseeyaan dadka intiisa kale iyada oon wax cad oo sidaasi muujinayo aanay jirin.

Dad ayaa qaarkood aaminsan in dumarka waxbarshada looguba tala galin ama aaminsan inaanay gabdhaha waxbarsho waxbo oogu filayn kol haddii la guursanayo. Waxaa jra oo kale aragtiyo ama fikrado dib u dhac ah oo soo jiray mudo dheer sida in reer ka laan dheeraysanyahiin reer kale; sidaas daraadeedna ay ka fiican yihiin dadka kale.

Guud ahaan, fikradaha iyo aragtiyada dib udhaca ah waa kuwa aan dunida casriga ah meel ku lahayn, waxayna hor seedaan midnimo la'aan iyo faqir. Waxay sidoo kale yihiin kuwa aan ku salaysnayn cilmi saynis iyo waxbarasho sidaas ayayna carqalada ugu yihiin aqoonta dhabta ah.

Ugu dambayntii waxay horseedaan caafimaad daro, in aan bulshada qaar waxbarashada tagin iyaga oo ka baqa in wax laga sheeko haday tagaan goobaha layskugu yimaado ama sida gudniinka dumarka oo kale.

## Layliska 3aad

Su'aalahan soo socdo ka jawaaba

1. Fikradaha dibudhaca ah waxyeelo caynkee aha yay soo gaadhsiin karaan caafiimaadka?
2. Maxay dhalin kartaa haddii gab dhaha dugsiyada ka ha dhaan?
3. Sideey waxbarashadu door uga gaystaa tirtirada fikradaha dib u dhacnimo?

## 11.3. Xog/Macluumaad

- Xogta aad heshaan intaad isku habaysaan si haboon ma u xafidaan? Ilaa iyo hada xogaha aad hesheen eed si agaasiman u xafideen kuwuee ka mid ah?
- Waa maxay faa'iidada ku jirto in aad xogaha ama macluumaadka aad heshaan si haboon iskugu dubaridaan ka dibnasticmaashaan.

### Cabdiyare kaynaan

Cabdiyare kaynaan waa arday dhigta fasalka 6aad dugsi ku yaal dacasha Wabi shabeele. Wiilkan waa mid si dabiici ah ugu firfricoon waxbarashada iyo ka qaybgalka. Isla xiligii u bilaabay in uu wax akhriyo waxna qoro, ayaa waxuu diwaan ku samaysan jiray xog uu ka uruuriyay waalahiis,iyo qoyskooda guud ahaan. Wuxuu xusuus qor ku samayn jiray xiliga aydhasheen Walaahiis, markii ay da'diisa sii waynaatayne wuxuu bilaabay in uu xog uruurin ka sameeyo eheladiisa kale ee qarabada la ah taariikh dooda.

# Aqoon Raadsi

Intaas intuu ka sii gudbay ayuu shan Tuulo oo kuyaal agagaaraha Wabiga shabeele bilaabay in uu diwaan ku sameeyo magacyadooda, iyo inta qoys ee kunool Tuulo kaste. Wuxuu weydiiyay dadka waawayn waxa Tuulooyinkan magacyadaas loogu bixiyay ka dib ka qori jiray buug xusuus dhowr ah. Hadda mar dhowaytane, cabdiyare wuxuu bilaabay in uu ogaado halka biyaha Wabiga shabeela kasoo bilaabmaan asaga oo weydiinayo macaliminta Maadada Cilmiga bulshadau dhigta iyo dadka deegaanka. Ardaygan fasalka 6aad ee ku wanaagsan maadada wadaniyada iyo anshaxa suuban; marka uu wax barashada ka yimaado wuxuu gacan siiyaa waa lidiintiisa hawsha gariga.

Cabdiyare sida hasameeye, laakiinse wuxuu hadalo aan fiicnayn kala kulmijiray qaar ka mid ah saaxiibadii oo ku odhan jiray oo waryaa ninkii camal la'aanta ahaayoow ee dadka magacyadooda qorqori jiray.

## Layliska 4aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socdoidinka oo ku salaynayo sheekada kor ku xusan:

1. Cabdiyare ma ku saxsanyahay arintaas mise dhab ahaantii waa bilaa camal?
2. Maxaad u malaynaysaan in uu Cabdiyare sameeyo oo kale si xogta uu uruuriyo ku noqoto mid natiijo dhaliso?

Xogta ama macluumaadku waa wado aan si muhiim ah ugala socono xaalada qoyskeena, deegaankeena, nafsaateena, xaalada dugsigeena iyo sidoo kale dalkeena. Cabdiyare wuxuu u diwaan galin jiray xogta uu la kulmo inta karaankiisa ah maadaama uu fahansanaa muhiimada xogta u leedahay. Sidaas daradeedna, wuxuu mudan yahay in loo riyaaqo.

Maadaama ay xogtu/macluumaadku yahay shey muhiim ah waxaa haboon in sit axadar leh loo xafido. Tani micnaheedu waaxaa weeyaan in aan diwaan ku samaysano xogta aynu lakulano oon yaraysan. Tusaale ahaan, Cimilada sida ay ahayd todobaadkii hor iyo sida ay maanta tahay kulaybo isbadal yar ayaa u dhaxayn. Hase yeehse inta aan dhahno todobaadkan ayaan diwaan galinay in aan maanta dhaafno ma ehe.

Sidaas oo kale dabeecada iyo xaalada ganacsiga deegaanka, qiimaha maciishada, dabecadaha dadka, taranka xorlaha iyo dhirta iwm weey is bad badali karaan. Marka inago oon mid ka tagin ayaa loo baahanyahay in aan diwaan kasamayno.

Marka aynu leenahay xogaha (macluumaadka) waa in si taxadar leh loo xajiyo xafido, dhinac waxaan ujeednaa bay ka dhigan tahay sirta in aana xajino. Sidaas oo kale, marka aynu xaalada caafimaad keena iyo dabeecada qoyskeenu diwaan galinayno waa in aan si hoose oo sir ah xafidno.

## Aqoon Raadsi


In xogta la diwaangaliyo oo kali ah kuma filo ee waa in waxa la diwaan galiyay si haboon loo daryeelo si aanay u lumin, u halaabin ama u dayacmin. Haddii xogaha iyo warbixinada aynu uruurinay si haboon u xafida weeyno, marka aynu u baahano ma helayno; mase in ay tirtirmaan oon akhrin weyno ayaa laga yaabaa.

### Layliska 5aad

Ka jawaab su'aalahan soo socdo

1. Waa maxay sababta aynu u leenahay xogtu waa muhiim?
2. Waxyeelo canynkee ah ayaa ka dhalan karto haddii aan xogta la'daryeelin oo si haboon loo xafidin?

## 11.4. Akhriska



Jaantuska 11.4 Arday Ku Akhrinayso Laybrariga/Maktabada



Jaantuska 11.5 Arday ku akhrinayso Guri-hooskii



Jaantuska 11.6 Arday Ku akhrinayso Geed Hoostii

- Si joogta ah ma u akhridaan? Hadii aad u akhridaan maalintii ilaa khibrad akhrisasho oo intee dhan ayaad leedahiin? Hadii aydan a khriyeen sababtu waa maxay?
- Qoraalo caynkee ah ayaad akhriidaan? Maxaad buugagtan noocani ah in aad akhridaan ku jeclaateen?
- Goobaheed sijoogta ah wax oogu akhridaan? Maxaadse ku doorateen goobahan oo kale?

Kee baa Hagaagsan?

Daa'uud, Dalmar iyo Dahab waa sadex arday oo dhigta fasalka 6aad. Waxay aragtiyo kala duwanka qabaan nidaamka akhrisashada. Kaladuwanaanshahoodaane waxay u soo bandhigeen sidan soo socoto.

**Daa'uud:** Anigu in aan akhriyo xiiso badan ayaan uqabaa.

Waxaan akhriyaa qoraalo kale duwan oo badan. Jaaraa'idyada, buugaagta, waxaane ku akhriyaa goobaha leh iftiin ku filan oo isku dheeli tiran. Waa geedaha hoostooda, laybrariga, dibada guriga hortiisa, iyo guriga gudahiisa.

**Dahab:** Daa'uadoow waad khaladantahay. Waxaa loo baahaynyahay in aan in yar un akhrino, hadii kale indhaheena weynu beeli. Aabahayba waa qof aad u akhriyo oo camal la'aan ah wuxuuna igu yidhi madax xanuun ayaa laga qaadaa. Waxa ay tahay in aan akhrinane waa buugaagteena iyo buugaagta aan wax ka barano oo kali ah. Arinta

kale ee aytahay in aan aad u akhrino waa marka sida macalinkeena aan weeynaano. Marka aan akhrinaynane waa in aan ku akhrinaa laybrariga iyo Gurigeena gudahiisa, qolka akhriska oo kali ah waa in ay ahaato.

**Dalamar:** Daa'uud iyo Dahab waad khaldantihiin. Ma aha in aan akhrino, qoraal walbo oon helo. Buugagta gacanta inaga siin kara si aan uga shaqayno laylisyada macalinkeena uu soo diro waan akhrinaynaa. Haddii aan akhrino sheekooyinka xiisaha lehne waa caadi laakiinse, hadii uu jaraa'iid yahay, waxaa inagu filan in aan ka akhrisano qaybta cayaaraha isboortiga oo kali ah. In qoraalada kale la akhriyo laakiin wax faa'iido ah ma leh.

## Layliska 6aad

Ka jawaaba su'aalahan soo socdo idinka oo ku salaynayo dooda kor ku xusan.

1. Sadexda arday waa kee midka fikir ka fiican kuwa kele ka haysta dhaqanka akhriska? Maxaadse ugu malaynaynsaan?
2. Marka aad ka wada sheekaysteen dooda sadaxda arday maxad ka faheenteen khibrada akhrisashada?

Akhrisku waa aalad aanu ku kobcino aqoonteena. Marka aynu wax baranaynane looma baahno oo qudha in aan ku ekaano waxa macalimiinteena ina baraan oo kali ah. Waa in aan inagaba akhrino inbadan si aan uhelo aqoon dheeri ah.

Hase yeesha ,marka hore inagu waa in aan ilaa caruur nimadeena ka soo bilowna dhaqanka akhriska si aan u yeelano khibrad akhrisasho. Waxaa jira arimo ay tahay in aan raacno oo ku saabsan akhriska. Marka aynu akhrinayno waa in aan dooranaa goobaha leh iftiin isu dheeli tiran. Dadka qaar ayaa waxaay wax ku akhriyaan cadceeda amase iyaga oo ku jiro goob laydh saa'id ah leh, ama xooga dabka korontada ku badanyahay. Dad ku akhrinayo iftiin yarne waan arkaynaa. Marka aad la kulantaan caruur sidan

oo kale ku jirta fadlan ku wacyigaliya in aanay la soodarsin xanuun indhaha ku dhaca.

Arinta kale ee ay tahay in aan raacno waa doorashada akhrisashada. Waxa aytahay in aan akhrino ma ehe oo kali ah kuwa aan dugsiga ku barano. Waxaa nalaaga baahanayahay in aan akhrino ilaha aynu ka heli karo aqoon dheeraad ah. Ugu yaraantii waa in aan akhrino jaaraa'idada iyo qoraalada kale ee xiisaha leh. In kasto ay tahay mid mudnaan leh meelaha iyo xiliga la akhrinayo. Ma ehe in aanu nidhaahno hadii aynan makhtaba buugaagta (laybreeriga) ahaan aniga wax ma akhrinayo. Mar hadii uu jiro iffiin isu dheeli tiren waxaad ku akhrin kartaa Geedaha hoostooda, baska iyo taksiga dhexdooda, qolka Jiitka iyo goobo kalalba.

### Layliska 7aad

Ka dooda su'aalahan soosocda :

1. Waa maxay waxa loo leeyahay si wax loo akhriyo shardi ma ehe in ladoorto goob cayiman oo kali ah?
2. Faa'iido caynkee ah ayaa ka dhalan hadii si joogta ah loo akhriyo?

## 11.5 Habka loo daalacdo waxbarashada ama casharada

- Diyaar garoow intee la eg ayaad samaysan ka hor intiinan bilaabin akhriska cashirada?
- Marka aad ku guda jirtaan geedi socodka akhriska waxbarashada xeelada side ah ayaad raacdaan? Marka aad

### Kadar iyo Hodon

Dugsiyaga waxaa jooga arday lakala yidhaahdo khadar iyo hodon oo dhigta fasalka 6aad. Kadar mararka qaarkood isaga oo kujira fasalka aya hordu qabataa. Waxbarashadane wuu ku liitaa. Laakinse Hodan waa gabadh ku fiican wax barashada. Marka faslaka dhexdiisa macalinka cashir soo jeedinayo, waxay weeydiisa wax aanay fahmin. Su'aalo marka la weeydiiyo wey ka jawaabtaa.

Macalimad Hibo waxay u goyd faraqa u dhaxeeyo labdadan arday. Maalin ayeey macalimada labadan arday ku weydiisay in ay fasalka dhexdisay mid walba sida uu wax u akhriyo soo bandhigo.

Kadar ayaa sidan ku bilaabay. Anigu waan nacaa in aan maalin walba akhriyo. Waxaan akhriyaa oo kali ah marka imtixaanka soo dhowaado. Marka laylidhaahde waa bari imtixaanka ayaan soo qaato buuga. Markaas waxaan akhriyaa ilaa aan ka daalo. Waxa aan garan waayo waan iskaga gudbaa oo iskuma daaliyo.

Waxaa ku xigtay Hodon oo tidhi aniga ma jecli in aan malin qudha waxbadan akhriyo oon is wareeriyo. Maalin walba casharada aan qaadano ayaan eeg eegaa. Hadaanan fahmin waxaan weeydiin saaxiibaday ama macalinka. Ka hor inta aanan akhriska bilaabin waxaan soo diyaarsadaa dhamaan waxa muhiim ka ah sida baugta erayada fasiran ku qoranyahiin,

buuga xasuus qorka, iyo buugagta wax laga barto. Waxwalbane waxaan ka reebaa xusuus qor ama diwaan kooban,hadaan sidaas yeelo waan fahmaa. Waxaan u malanaya sababta aan sanadkii hore kaalinta koobaad ugalay een ku helay abaalmarinta in ay ahayd sidaas. Sanadkane imtixaanada tijaabada ah dhibco fiican ayaan ka haystaa. Shaki igagama jiro in aan kaalanta koowaad kusoo bixi doono.

## Layliska 8aad

Kadooda su'aalahan soo socda

1. Midkee ayaa khadar iyo Hodan leh khibrad akhrisasho oo wanaagsan?
2. Marka aad eegtaan jawaabtiina su'aasho koobaad sidee ayaa loobaahanyahay in loo akhriyo si natiijo wanaagsanl oo keeno?

| Talaabada 1aad | Talaabada 2aad | Talaabada 3aad |
| --- | --- | --- |
| Diyaar garoow | 1. Akhris<br>2. Qaada dhig buugaagta | Dib u eegid iyo is qii-mayn |

# Aqoon Raadsi

## Erayda ugu muhiimsan ee cutubka

**Aqoon:** awooda kartida ee maskaxda qofka u siinayso in uu fikro, wax xaliyo arimahane si taxadar leh u eego.

**Xog:** fikrada laga soo ururiyo xaalada dadka, deegaanka, iwm si loo fahmo dabeecadooda gaarka ah.

**Aragtidib udhaca:** fikrado aan ku salaysnayn cilmi saynis ama xaalad dhab ah oo layska aamino ayadoo wax cadayn ah loohayn.

**Akhris:** daalacashada qoraalada ay ku qoran yahiin warbixinada kala duwan.

Is qiimayn: ka dib akhrisashada cashirka su'aalo laga shaqeeyo si loo ogaado reerka fahnka.

## Su'aalaha Gebogabada cutubka

Su'aalahan soo socdo intaad ku qortaan buugaagtiina ka shaqeeya.

I. Jimlahadan soo socdo ugu juwaaba "Run" ama "Been"

1. Aqoontu waxaa lagu helaa wado kali ah.
2. Xogta in taaan la adeegsan ka hor waxaa haboon in layska hubiyo.
3. Akhriska cashirada intaan lagalin waxaa muhiim ah in diyaar garoow laga sameeyo

# Aqoon Raadsi

II. Su'aalahan soo socod ka dooro sawaabta saxda ah

1. Aqoontu

   B. Faa'iidooyin yar ayeey leedaahy

   T. Waxay keentaa jahli

   J. Waxaa laga helaa Ilo kala duwan

   X. Midnaba

2. Ilaha laga helo aqoonta waxaa ka mid ah

   B. Buugaagta

   T. Dugsiyada

   J. Adeecadaha

   X. Dhaamaan

3. Xogta aynu helo waa in ay

   B. Noqotaa mid meel laga soo xigto leh

   T. Noqotaa mid meel loo raaco leh

   J. ku salaysnaata arin cad

   X. dhamaan

III. su'aalahan soo socdo ka bixiya jawaab kooban

1. Waxaad diwaan ku samaysaan muhiimada aqoonta.
2. Maxay ku kala duwanyahiin akhriska qoraalada guud iyo kan casharada dugsiga iyo waxbarashda?